# RAADKA RIYADAYDI

*Xusuustebyo*

**CALI M. DIINI**

**©2022 Cali M. Diini**

Xuquuqda buuggan idilkeed waxa ay u dhawran tahay qoraaga.

Dib looma daabici karo qayb ka mid ah ama giddigiis, lama minguurin karo, hab electronic ah na looma faafin karo ayada oo aan qoraaga laga haysan oggolaansho qoraal ah.

Xiriirka qoraaga: diini42@gmail.com

Galka buugga waxaa suubbiyay Ibraahin Cusmaan Afrax (Nolosha).

Waxaa daabacay:

**Laashin Publishers and Publications**

Katrineholm, Sweden

Mareegta: www.laashin.com.

# JAANTUS


HORDHAC....................................................................10

BOHOSHII BALAATO ....................................................20

BIRTA BUUBTA ...........................................................33

SEBAN COLAADEED.....................................................40

DUGSI QUR'AANKII......................................................65

SHIRQOOLIDDII MACALLINKA .................................76

INKAARTII WADAADDADA........................................86

BENDAR QAALI ...........................................................95

U DHUUMASHADII MUQDISHO ................................104

GAALKACYO ILAA MUQDISHO.................................119

MIRTUUGO..................................................................132

MUQDISHO.................................................................140

QALASHADII MAXAMED-SAWIR ............................156

FARUUROW FADUUL BAA LAGU DILAY ................162

BALLANTII SAMAARA...............................................168

RAQDII AFISYOONE........................................................186

FOOGTII FILLADA ..........................................................197

CEELALYO .....................................................................207

TAHRIIB .........................................................................213

WELI MA NOQON KENYAN...........................................230

BUUGKAASHI.................................................................254

*"I don't write books because I have answers, I write books because I have questions.'* -Thomas E. Ricks

## Hibayn

Buuggan waxa aan u hibaynayaa habaryarahay Ardo, Astur, Xaawo, Khadiija, Caasha iyo Faadumo Nuur Cawl.

Ka hor inta uusan erayga hooyo weerar abaabulan reerka uga saarin, HABBAR (oo hadda loogu dhawaaqo HABAR) waxa uu ahaa magaca aan maanta ugu yeerno HOOYO.

Habbar oo ah "hab" iyo "bar" la isku kabay, macnihiisu waa "barihii habka nolosha." Dabcan, doodi ka ma taagna in hooyadu tahay baraha nolosha. Inkastoo magacaas quruxda badan inta badan maanta macnihiisi runta ahaa laga faramaroojiyay haddana weli waxa uu baaqi ku sii yahay oo magac u yahay hooyada labaad: habaryar (habbaryar). Sidaas daraaddeed, haddii Islaamku hooyada siiyay saddex derajo oo aabbaha ka sarreeya, afka Soomaaligu waxa uu habaryar siiyay labo derajo oo aabbe ka sarraysa hooyo na hal derajo ka hoosaysa. Kolka ay halkaas joogto, oo habaryartu joogto booskii hooyo, runtii ma jiro qof ku dhiirran kara ama gaari kara gudista xaqa hooyo, ama habaryar. Jacaylka bilaa shuruudda ah ee habaryarahay ii qabaan, iyo maxabbadii iyo kalgacaylkii

ay mar walba igu qaabili jireen waa mid aanan illoobi doonin inta aan nool ahay. Waxa kale oo aan buuggan u hibaynayaa abtigay Khaliif Nuur Cawl oo ah ninka ka nool afar wiil oo hooyaday la dhashay. Sidaa oo kale, waxa aanan hilmaamayn habbaryartay Faadumo Salaad Cawl oo ahayd hooyada Nairobi igu haysay. Habo mahadsanid kun jeer.

## Mahadnaq

Waxa aan u mahadnaqayaa dhammaan hawlwadeennada iyo qalinleyda madbacadda iyo mareegta Laashin oo uu ugu horreeyo Dr. Xuseen-Wadaad. Qoraa, Halabuur Ibraahin-Nolosha ayaan asagana si mug leh ugu mahadnaqayaa. Waxa kale oo aan u mahadnaqayaa Cabdiraxiin Hilowle Gallayr, Bashiir Maxamed Xirsi, Xasan Cabdulle Calasow (Shiribmaal), Khadiija Eeshiya, Cabdullaahi Baabal, Bilaal Aw-Fiqi (Aar) iyo qof walba oo si un iiga caawiyay soo saarista buuggan.

## Erayga Madbacadda

**“**Raadka Riyadaydi” waa dhigane jid cusub u furaya qalinleyda Soomaaliyeed, hannaanka qoraagu u qoray oo ah mid ayan qorayaasha Soomaalidu horay u adeegsan darteed. “Raadka Riyadaydi” waa ‘xusuustebyo’ (memoir) uu qoraagu kaga warramayo waayo ka mid ah noloshiisa haddana waxa uu u qoray heer akadeemig ah asaga oo tobannaan buug soo xiganaya. Waa buug caqiibo u leh facyaal badan oo Soomaaliyeed kuwaas oo ka baran doona habka quruxda badan ee afkeenna loogu qori karo sooyaal-nololeed-qofeed ayada oo aan laga baxaynin xayndaabka akadeemiyada iyo xeerarkiisa caalamiga ah.

Madbacadda Laashin waxa ay bogaadin mug leh u diraysaa qoraaga buuggan Cali M. Diini, waxa ayna ku faraxsan tahay in ay daabacdo buuggan mudnaanta leh.

Maamulka Madbacadda iyo Mareegta Laashin

# HORDHAC

Florence Scovel Shinn oo ahayd qoraa iyo farshaxamiiste Maraykan ah ayaa laga hayaa: *waxaa jirta oraah gabowday oo oranaysa, ninku (qofku) keliya saddex ujeeddo ayaa uu ugu holladaa adeegsiga erayada afkiisa ka soo baxaya: "dhayid, mahdin ama hodmid (there is an old saying that man only dares use his words for three purposes, to "heal, bless or prosper...).* [1] Malahayga, qofkii oraahdaas gabowday laga reebay haddii la haybin lahaa sababta qof (qoraa) wax u qoro waxa uu oran lahaa "maal, magac ama maciin.

Waxa aan oraahdaas gabowday u soo xigtay waa, muddo dheer, ku dhowaad toban dabshid, baan la foolqaadayay erayada iyo jumladaha dhiganahan, aniga oo kaadsanayay

[1] Xigasho: buugga *The Game of Life and How to Play it* ee ay qortay Florence Scovel Shinn.

madashii aan ku dhurmi lahaa iyo maalintii aan burqan lahaa oo soo tufi lahaa waxa kashayda hurda dabadeedna u dhayi lahaa boogaha boggayga jiifa. Boogahaas oo ay igu reebeen balaayooyinkii geyiga Soomaalida ka belalayay beryihii aan dhashay, kuwaas oo si wacan u la jaanqaaday hanaqaadkaygi ilaa ay ugu dambayn iga soo baacsadeen beladkii Benaadir iyo geyigii Guulle igu beeray ka dib na qaxooti iiga dhigeen dhulal shisheeye.

Aramidaas uurkayga jiiftay bay ahayd tan igu qalqaalisay qalin u qaadashada dhiganahan. Sideedaba, qofka halabuurka ah, ha noqdo qoraa, gabyaa ama sheekacuriye, waxaa jira sababo ku riixa in uu wax qoro ama wax curiyo. Suugaanyahanno uu ka mid ahaa Cabdullaahi Macallin Axmed (Dhoodaan) baa si qurux badan maanso ugu qeexay sababaha qofka ku dhaliya halabuuridda. Dhoodaan waxa uu yiri:

*U ma kiilo maansada sidii, xuud kalluunsada'e*

*Kasha muran ku yaallay xikmadu, kilinkilaysaaye*

*Kulcubaha xiskaa i dooda iyo, kiishash laabta ahe*

*Faallada kalyaha buuxisay, iyo kubada uurkayga*

*Kaah iyo iftiinkay baxshaan, kaaxi maan arage.*

*Kurka gabayga soo muujiyee, sheegidda u kaalman*

*Ma kaakicine dhowr goor anigoo, kaalay oran waayey*

*Kud iyo mid karraysa ah afkana, kaabiga u jooga*

*Gaaddada wuxuu kuuriyoo, saabka kuudadaba*

*Kol hadduu karsamay oo shidmoo, aad u kululaado*

*La ma kaydin karo maansadii, kaayaheed galaye*

*Saakana karaamaa jirtee, bal aan tix kaynaansho.*

Mar kale tixdaan hoose oo loo tiiriyo suugaanyahanno dhawr ah se aanan hubin kii runta ahaa ee curiyay waxa ay tiri:

*Haddaan gabayga uurkoo bukiyo, arami kaa keenin*

*Amaan olol jacayl iyo xanuun, kugu ijbaaraynin*

*Afkuun baad ka leedehee tixuhu, arar ma yeeshaane.*

Hurgufidda (qorista) xusuusaha hurgumihii iyo haarihii ay hantaaqooyinkii noloshu nagu reebeen waxa ay dhaymo u tahay nafsadaheenna, xag jireed iyo xag dareenba. Barofaysar James W. Pennebaker oo bare ka ah

*University of Texas, Austin,* sidaa oo kale na ah qoraaga buugga *"Writing to Heal: A Guided Journal for Recovering from Trauma and Emotional Upheaval"* waxa uu qabaa in dadka waayahoodii wareersanaa iyo hantaaqooyinkii waayaha adduunku badeen ku taxa dhigaal (qoraal ama tix) ay sameeyaan isbeddal jireed iyo mid maskaxeed oo togan.

Arartaas ka dib, waxa aan filayaa in ay imminka habboon tahay in dhawrka sadar ee soo socda aan ku xantaxanteeyo aramida igu ijbaartay qorista buuggaan, iyo hurgumaha iyo haaraha aan rejaynayo in dhiganahaani dhayi doono.

Sannadihii aan ku cusbaa dalka Australia, jeer aan Af Ingiriisiga ka baranayay iskool lagu barto afafka iyo xirfadaha farsamada iyo maamulka ayaa macallimad Af Ingiriisiga na bari jirtay waxa ay na fartay in qof walba oo naga mid ahi qoro maqaal noloshiisa ku saabsan. Dabadeed waxa aan galay aamusnaan iyo feker aan dib ugu dhuganayo waayihii noloshayda. Fekerkaas iyo dib u eegistaasi waxyaabihii ay i dulgeeyeen ee maskaxdayda dhinacna u dhaafi waayay waxaa ugu waawaynaa labo arrimood oo kala ah:

1) Xusuusta riyadii aan ku taami jiray waayihii aan gabanka ahaa ee aan idaha iyo maqasha ku raaci jiray bakadaha Mudug riyadaas oo igu reebtay xusuus aan tirmin sababna u noqotay in aan galab casarliiq ah aniga oo dhuumanaya Inataree koofurta Gaalkacyo taagan bartanka u galo sidaasna Mudug ku macsalaameeyo. Xusuustaasi waa jeedaalintii samada buluugga ah ee Mudug aan jeedaalin jiray mar walba oo aan maqlo guuxa birta buubta taas oo sawraceeda iyo sancadeeduba yaab iyo anfariir igu ridi jireen goor walba oo aan indhaha ku dhufto ayada oo mushaaxaysa cirka caadka la ee Mudug.

Doondoonidda, faagfaagidda iyo ka wardoonidda wax aysan aqooni waa baxaalliga iyo jaadgoonimada dadku kaga duwan yihiin noolaha kale. Qawadidda nolosha ay yaqaannaan iyo u qalabqaadashada yagleelidda mid cusubi, waa hiddaha bini'aadamka. Waa waxa bini'aadamka u sahlay gacan-ku-dhigista carra'edag oo dhan. Indha-indhaynta dadku (human curiosity) sida ay qabto Catherine Twomey oo macallimad ka ah *University of Manchester*, waa baadigoobka wax ka daahan (knowledge) iyo tirtiridda hubaal la'aanta (eliminating of

the uncertainty). Malahayga, taas bay ahayd midda igu beertay jacaylka iyo doondoonista wax ka ogaanshaha diyaaradihii hawada Mudug heehaabayay kuwaas oo aanan ab iyo isir toona u lahayn. Waa na middaas tan i qawadsiisay habnololeedkii abkasoogaarka ahaa ee Mudug.

2) Arrinta labaad ee xusuusteeda amarkii macallimaddu i dulgeeyay waa waxii aan ugu imid Muqdisho oo aan ku soo galay Inatareegii aan Gaalkacyo uga soo fakaday. Waa Muqdisho oo dhexmaquuranaysa musiibadii dagaallada sokeeye, burbur iyo baaba'na baallaha ka rifayaan. Waa Muqdisho oo muuqeedi iyo muunaddeediba ay bi'iyeen mooryaan kalaashnikoof jeenyaqaaran marduuf cagaaranna kolkosha ku sita. Waa Muqdisho oo qabqable dagaal iyo qabyaaladdu qarribeen. Waxa aan martiyay Muqdisho dilalka iyo dulmigu karkaarrada jabiyeen.

Hawshii macallimadda caddaanka ahi ii dirtay waxa ay dib iigu celisay xusuuso xanuun badnaa iyo uurkutaallooyin badan oo aan markhaati u soo ahaa. Waxaa i hor yimid hummaagyada kuwii dulmiga lagu

qoorgooyay aniga oo indhahaygu shan yihiin. Waxaa la i hor keenay masaakiintii mooryaantu hortayda godka aakhiro ugu dirtay maciinkana ka waayay dadweynihii reer Muqdisho, Shiikh iyo shabaab, wadaad iyo waranle, majo iyo madax, iyo daris toona.

Inkasta oo baladii iyo baaskii, iyo gaboodfalladii aan markhaatiga u soo ahaa ee dalkayga ka dhacayay aysan marnaba maskaxdayda ka tirmin haddana amarkii macallimaddii caddayd waxa uu igu kaakiciyay hurgumooyin igu huursanaa waxa ay na daqniyeen boogo boggayga jiifay. Dabadeed inta aan qalinka iyo waraaqda isdulsaaray baan burqaday qormo aan cinwaan uga dhigay *"Growing Up in Chaos."* Illeen dhigaalku dhibbanaha waa u maciin'e aniguna waxa aan ahaa dhibbane hurgumo daboolnaa hurgufiddooda nafis bidaya dhaymana dhigaalku u yahay'e, qalintaraarkii waxa aan is arkay aniga oo soddon bog buuxiyay. Dabadeed waxa aan xusuustay in maqaalkii macallimaddu ii dirtay shuruuddiisu ahayd in uusan ka badnaan kun iyo shan boqol (1500) oo eray ama saddex bog. Ka dib, soddonkii bog inta aan daabacay (print-gareeyay) baan boorsadaydi

ku riday, maqaalkii macallimaddu ii dirtayna waxa aan ku beddalay mawduuc kale oo ku saabsanaa noloshii cusbayd ee aan Australia ka bilaabay.

Yeelkeed'e, maqaalkii aan ku dhigay xusuusihii xanuunka badnaa ee aan boorsada ku ritay waxa ay igu noqdeen nabar horay iigu taagnaa oo la igu sii liiliijiyay kaas oo hurdo iyo hoyaad ii diiday. Sidaas darteed, buuggaani waa natiijada xusuusihii xanuunka badnaa ee habeenno badan jiif iyo joogba ii diiday.

Ha se yeeshee, inta aanan werin xusuusaha baladii iyo baaskii dagaallada sokeeye dalkayga badeen, gaar ahaan caasimadda Muqdisho, waxa aan buugga qaybihiisa hore ku tebin doonaa xusuusaha noloshii miyiga ee aan ku soo barbaaray, aniga oo marka hore faallayn doonaa habnololeedka dhaqan-dhaqaale ee Soomaalida miyiga, gaar ahaan tii aan aqaannay ee Mudug. Waxa aan tooshka ku ifin doonaa dhimaallada ku jira habnololeedka abkasoogaarka ee xoolaraacatada Soomaalida aniga oo ku doodi doona in habkaasi yahay mid dhagaxoobay oo aan wax tadawur ah samayn muddo dheer, dhagaxoobiddaasi na ay sababtay dib u dhac dhaqaale iyo mid nololeed, iyo

musiibooyin soo noqnoqday sida abaar, baahi iyo horumar la'aanno kale oo baahsan.

Intaas dabadeed, waxa aan xusuusaha dib ugu celin doonaa waayahaygi noloshii miyiga laga bilaabo qoyskayaga oo dagaallo qabiileed ka qaxaya, aniga oo maqal raace ah, aniga oo bakadaha Mudug ido ku jira, aniga oo dugsiley noqday ka dib na xerow uga sii dallacay dabadeedna inta noloshii miyiga qawaday Muqdisho u fakaday. Dabadeedna, xusuustebyada noloshii Muqdisho ka dib waxa aan dhiganahan ku soo afmeeri doonaa aniga oo Kenya qaxooti ku ah oo dib u jelleecaya dadkaygi iyo dalkaygi aan ka soo dalaabay.

Ugu dambayn, waxa aan jecel ahay in aan xuso in dhiganahaani uusan ahayn taariikh nololeedkayga balse uu yahay xusuustebyo (memoir) aan ku tebinayo qaar ka mid ah xusuusaha noloshayda ee waqti kooban (1991 ilaa 2005). Waxa kale oo aan jecel ahay in aan sheego in erayga *"xusuustebyo"* aan ka soo ergaystay Shariif-Saalax Maxamed Cali Eebbe ha u naxariistee, buuggiisa "*Xusuustebyo Eldoret: Shirweynihii Nabadaynta Soomaaliya 2002-2003"* ayna i la qummanaatay in erayga

*“xusuustebyo”* u dhigmo erayga ingiriisiga ah ee *“memoir”*.

# BOHOSHII BALAATO

*"Dugsi iyo markii ay heleen, dab u iftiimaaya*

*Ugaadha iyo markii ay dabteen, deero iyo cawsha*

*Duunyada markii ay dhaqdeen, bahalihii duurka*

*Beeraha markii ay degeen, orodkii may dayne*

*Damac baa hoggaanka u qabtoo, door labaad raray."*

-Hadraawi

Daantan yar ee dunida waxa aad mooddaa in goorsheegtu ku istaagtay toban qarni ka hor cahdigii Xamuraabi.[2] Noloshu waa fudayd haddana adag. Waxa aan uga jeedaa ma jiraan hawlo tirabadan oo isku milqan oo qabashoodu u baahan tahay farsamo iyo aqoon, waayo badanna fasallo loogu kallaho, haddana inta yar ee maalinlaha loo qabtaa ma fududa. Habnololeedku wax horumar ah ma samayn

[2] Xamuraabi waxa uu ahaa Boqorkii Baabiloon iyo Cakaad (1792 ilaa 1750 CH). Waxaa lagu xusuustaa in uu ahaa Boqorkii ugu horreeyay ee xeerar qoran dawladdiisa u dejiyay. Xeerarkaas oo 282 xeer ahaa ilaa maanta qaarkood dunidu waa adeegsataa.

kumannaan sannadood. Sidii baa weli saddexda meesi: geela, ariga iyo lo'da aroortii loo foofiyaa cawaysinkiina loo soo hooyaa. Waa habkii iyo noloshii xoolaraacatadu door bideen markii walaalahood beeratabcashada u digarogteen,[3] waayo hore oo fogaan badan ka hor. Malaha xoogdaliignimo darteed ayay xoolaraacatadu ku diideen in ay beero fashaan sidii walaalahood yeeleen. Mise mayal'adayg darteed ayay xoolaraacnimada ugu sii dhageen oo isbeddalka ayay necbaayeen? Runtu tan dambe ayay u dhowdahay, waayo sida taariikhdu werinayso xoolaraacato, iyo xoogdaliignimo iyo wahsi hal habeen meel kuma wada hoyan, dadka deegaankanina waa kuwii Gerald Hanley yiri: *"there is no one alive as tough as the Somali. No one."*[4]

[3] Bini'aadamku xirfaddii ugu horraysay ee uu noloshiisa ku maareeyo waxa ahayd miragurasho uu sida shimbiraha iyo xoolaha dhirta u daaqo; iyo ugaarsiga. Xirfaddii labaad waxa ay ahayd xooladhaqashada, halka tan ku xigtay ahayd beeratabcashada oo noqotay xirfad isbeddal lixaad leh ku keentay habnololeedkii dadka.

[4] Gerald Hanley waxa uu ahaa qoraa Irish ah iyo askari ka qaybgalay dagaalkii labaad ee adduunka waxa uu na ka dagaallamay dalal Soomaaliya ka mid tahay. Khibraddii uu helay intii uu Soomaalida dhexjoogay waxa uu ka qoray buug la yiraahdo *Worriors: Life and Death Among the Somalis.*

Yeelkeed’e, qaabka degaankani xoolaha u dhaqdo ama u raacdo waxba iskama beddalin tan iyo bilowgii xoolo-rabbaayadaynta. Markaas waxa aan oran karaa deegaankan kama jirto wahsi iyo xoogdaliignimo jireed ee waxaa halakeeyay wahsi halabuurnimo iyo curin la’aan.

Dhulkan xoolaha la ma dhaqdee waa la raacaa. Haa, xoolaha lama dhaqdo ee ayaga ayaa la dhaqaa oo dharaartii dhalataba danta xoolaha uun baa laga fekerayaa, loogana fekerimaayo si danta dadka loogu qunsado ee xoolaha qudhooda ayaa dadku u qasban yihiin. Waxa aad mooddaaba in aabbaha dhulkaan deggan ay xooluhu uga qiime iyo mudnaan badan yihiin carruurtiisa iyo xaasaskiisa. Waxaa la arkaa oday shan tiro oo ari ah leh haddana ka masuugaya kabaha foodleyda yar ee tirooyinkaas har iyo habeen dabataagan. Waxaa dhacda in la arko dhawr kadin oo wiilka jiraa cagacad yahay.

Habka biyaha iyo baadka, dadka iyo xoolaha waxba iska ma beddalin. Mar waa aaran marna waa aq, hadba sida roobku u da’o ama u di’i waayo ayay ku xiran tahay.

Baahida ugu wayn ee dhulkan taallaa waa biyaha. Haddana marka roobku da'o biyihiisa lama kaydsado ee dhulka engagan baa marti looga noqdaa. Waraha iyo balliyadu biyaha ay qabtaan un baa toddobaadyo lagu moodaa, marka ay dhammaadaanna dhulka ayaa sabarad lagu faagaa si biyihii roobka ee uu laqay looga dabatago. Laguma fekero marka roobku da'ayo in biyaha badan ee badda ku qulqula ama kuwa dooxooyinku fuuqsanayaan la kaydiyo. Haddii roobku imaan waayo ama daaho dad iyo duunyaba halis baa la qurquriyaa.

Hawsha qofku waa aroortii kac, foofi, hargee, soo hoo, mayrac, seexo, kac, aroori, dhaami, ood, oodqaad iwm. Sidaas bay ahayd tan iyo inta la xusuusto. Wax isbeddal ah haba sheegin. Ma jirto aragti iyo farsamo cusub oo nolosha iyo hawsheeda fududeeya. Qof walba waxa uu sameeyaa ama u nool yahay sidii aabbihiis iyo awoowayaashiis u noolaayeen. Xataa gudinta geedaha lagu gooyo waa sidii ay ahayd qarniyo badan ka hor.
Ma jiro qof hal maalin ama hal daqiiqo u dhugyeeshay in gudinta qaabkeeda isbeddal lagu sameeyo ama la farsameeyo qalab kale oo ka hawl yar kase waxqabad

badan. Taasi, waa sababta dadyowgii ku mitidday xoolaraacashadu weli u dhaafi la'yihiin halkii ay uga tageen kuwii beerafalashada u digarogtay kumannaan sannadood ka hor halka asaaggood (beeraleydii) horseedeen horumarka iyo reer magaaloobidda la yaabka leh ee uunku gaaray. Meesha xoolaleydu xoolaha dabajoogeen ayaga oo harraadsan beeraleydu waxa ay hindisayeen farsamo hor leh iyo agab cusub oo u fududeeya hawlaha adduunyada tayada noloshoodana kor u qaada. Beeraleydu waxa ay dhiseen boqortooyooyin iyo Imbaraaddooriyado lala ashqaraaray halka xoolaleydu halgan joogto ah u gashay sidii ay u mooraduugi lahayd mood iyo maal waxii beeraleydii hodantay tabcadeen, taas oo beeraleydii ku qasabtay in ay dhisaan darbiyo dhaadheer oo ay isaga aadiyeen weerarradii kaga imaanayay xoolaleydii dhac doonka ahayd.

Laga bilaabo darbiyadii Ugaas Shulgigii reer Mesopotamia, ilaa Great Wall of China ilaa iyo Hadrian's Wall-ka ku meegaaran waqooyiga England iyo dhammaan waxii darbiyo dunida laga taagay, gebigood

waxaa loo dhisay si la isaga difaaco xoolaley bililiqodoon ahayd.[5]

Xataa xeeldheerayaasha sooyaallada iyo kuwa diimaha qaarkood waxa ay sheegaan in qolyihii Dulqarnayn darbiga ku awday (Ya’juuj iyo Ma’juuj) ay xoolaraacato ahaayeen.[6]

Xoolaleydu waxa ay burburiyeen Imbaraaddooriyado iyo xaddaarado waawaynaa oo dunida soo maray. Waxa ay jilbaha dhulka ugu dhufteen boqortooyooyin kibray oo xukunkoodu baahsanaa, laakiin xoolaleydu mar walba waxa ay hayaan ugu jireen ka mid noqoshaqada iyo ku milanka xaddaaradahaas iyo Imbaraaddooriyadahaas ay weligood iyo waqood gulufka ku hayeen.

---

[5] Shulgi waxa uu ahaa Ugaas ka talin jiray magaaladii Ur ee Mesobitaamiya 2000 oo sannadood CH. Fiiri buugga *Walls: A History of Civilization in Blood and Brick* ee u qoray David Frye.

[6] Culimada diinta iyo kuwa taariikhdu aad bay isugu khilaafsan yihiin sheekada Ya’juuj iyo Ma’juuj. Shiikh Cimraan Xuseen oo ka mid ah culimada arrintaan aadka u faaqidda waxa uu qabaa in Ya’juuj iyo Ma’juuj ahaayeen qabiil Turki ah oo degganaan jiray saxaraha bartamaha Eeshiya Boqorkii Radmiga (darbi bir ah) ah ku awday ee Qur’aanku Dulqarnayn ku sheegayna ahaa Sayraskii Waynaa (Cyrus the Great) oo ahaa Imbaraaddoorkii Beershiya intii u dhaxaysay 559 ilaa 530 CH. Fiiri buugga *An Islamic View of Gog and Magog in the Modern World* ee uu qoray Cimraan Xuseen.

Dhallinyaradii xoolaleyda ayaa ugu badnaa xoolaraacatadii magaalooyinka u yaacayay tan iyo waagii magaalooyinka la amaamuday, waayo, dhallinyarada xoolaleydu waxa ay arkayeen oo ka quusteen nolosha miyiga ee horumar la'aanta ah, isbeddal la'aanta ah, madadaallo la'aanta ah raaxaduna ku yar tahay ama ayan ka jirinba. Sidaas darteed, dhallinyarada xoolaleydu waa ku qasbanaayeen in ay degaannadoodi ka firxadaan oo magaalooyinka magansadaan. Waa ku qasbanaayeen in ay martiyaan dhaqannada magaalada ee xirxiran, haddana bartii-yaqaannimadu tif ka tahay. Sida qoraaga Soomaaliyeed, Ibraahin-Hawd ku qoray buuggiisa Noofalka ah ee *"Aanadii Negeeye"* noloshu marka ay hal meel ku dhagaxowdo oo wax isbeddel ah samayn waydo, kuwa noloshaas ku nooli waxa ay magan basar xun u noqdaan casriga markaas la joogo. Hawd oo taas si qurux badan u qeexayaana waxa uu yiri *"haddii marxalad nololeed lagu dhagaxoobo lagu dhiirran waayo geeddiga xiga waxaa abuurma dhaqan silloon oo casriga la joogo magan iyo marti u ah."*

Degaankan marka roobku da'o oo xooluhu cayilaan caanahana la lulo meel walba waxaa laga oogaa siyaarada wadaaddo qarniyo ka hor dhintay ama oday warasadiisi jilib iyo jujooyin badan noqdeen amase qabiil dhani maanta ku abtirsado.

Gurigeenna keliya waxaa sannad walba lagu dhigaa siyaarada awoowe Diini, siyaarada awoowe Samatar, siyaasada awoowe Nuur Cawl, siyaarada abkow Cawl Faarax, siyaarada ayeeyo Caasho Cawl, iyo hooyadeed abooto Dhuuxey. Waxa kale oo qoysku ka qayb qaataa siyaarada awoowe afraad Lugeey Xasan, siyaarada awoowe saddexaad Faarax Gureey (dhanka hooyo), siyaarada awoowe lixaad Cismaan Jibriil (dhanka hooyo), siyaarada Shiikh Cali Samatar, siyaarada Shiikh Cali Cilmi-yare iyo siyaarada Shiikh Cabdalla iyo Shiikh Cawarreerre.

Marka waayeelka iyo wadaaddadu ku mashquulsan yihiin siyaarooyinka iyo Alle-bariga dhallintuna waxa ay habeenkii u guureeyaan gaardiska dhaantada iyo ciyaaro-dhaqameedyada kale ayaga oo mar walba u tooghaya weerar culus oo kaga yimaada dhanka waalidka iyo

wadaaddada oo waayihii dambe oo dhan waday guluf ka dhan ah kulamada abkasoogaarka ah ee dhallintu habeenkii isugu tagaan.
Marka nurku dhabarka jeediyo jiilaalkuna soo labalixaadsado noloshu kakanaanteedi ayay mar kale la soo kalabaxdaa. Waa halgan joogto ah, harraad iyo hantaaqo, hawl iyo hayaan abadi ah.

Nolosha miyiga, geerida iyo nolosha dhexdooda waxaa ah giraan (circle) yar oo u wareegaysa sida qorraxdu dhulka ugu wareegto oo kale (sida deegaanka laga aamminsanaa: in qorraxdu dhulka ku wareegto) joogisteeduna rabto jihaad joogto ah. Waa meel aadan arkayn oo urinayn wax isbeddal ah. Dharaar walba waxii shalay aad samaysay ayaad samaynaysaa waxii aad aragtayna waad arkaysaa. Wax dheeraad ah haba sheegin. Ma jiraan buugaag aqallada yaalla, maktabado iyo wargeysyana ha sheegin, telafishinno ayagana warkood daa. Koronto, farantijeer iyo qaboojiye ama kululeeye dhaguhu ma maqal dhaayuhuna ma arag. Baabuur iyo mootooyin dhulkaan laga ma yaqaan. Haa, arki maysid aqal gaari horyaallo ama oday baabuur wata oo carruurtiisi iskool u wada.

Iskool qudhiisa ayaanba laga aqoon degaankan kuwa magaalooyinka dhow laga sheegayna wadaaddadu waa ka dayriyeen. Ma arkaysid hooyo baabuur luudinaysa kursiga dambana afar carruur ahi u saaran yihiin. Qof walbaa lugtiisa ayuu maalaa. Waa kadeed iyo rafaad miiran asii lagu wada qanacsanyahay. Haa, waa run, sidaas baa lagu qanacsan yahay. Oo ma iyagaaba arkay wax sidaa dhaama. Yaaba dhankaa ugu faalalay oo u sahan tagayba.

Waddooyinka dhulkani waa shaagag taayarada baabuurta magaalooyinka ka yimaadaa jeexeen iyo rastooyin ay faleen Maraykan macdan baarayay seben hore ase aad u malaynaysid in ay ku faleen cagafyo aan isteerin lahayn, sida ay dawaali u yihiin darteed.
Haddii Boqor Darius[7] qabriga ka soo bixi lahaa waxa uu ku dhaaran lahaa in aan hal taako lagu darin intii uu uga tagay jidadka. Roomaaankii horena waxa ay ku xilafuri

[7] Darius-kii Koowaad ama Darius-kii Waynaa waxa uu ahaa Imbaraaddoor ka talin jiray Imbaraaddooriyaddii Beershiya (Achaemenian Empire) intii u dhaxaysay 522 ilaa 486 CH. Darius waxa uu dhisay waddooyin magaalooyinka Imbaraaddooriyaddiisa u kala goosha oo ay ugu caansanayd waddadii Boqortooyada (Royal Road). Fiiri: https://www.britannica.com/topic/Persian-Royal-Road.
Accessed on July 12, 2022.

lahaayeen in jidadkii ay dhiseen dhagxaantii laga fagtay.[8] Ku darso oo halkaan laga ma yaqaan dukaamo cayn-cayn iibiya iyo moolal saxmad badan.

Isbitaalka wax kale ayaa laga aamminsan yahay degaankan. Marka la bukoodo ama roob la waayo waxa loo cararaa dhanka wadaaddada ayada oo laga rejaynayo in uu Eebbe ayaga madaxooda ku diirnaxi doono.

Warka wadaaddadu waa waxyi samada ka soo degay oo kale, maal iyo muruq waxii ay dalbadaanna waa loola degdegaa. Markaa ayay qaar wadaaddada ka mid ahi awooddaan diiniga ah iyo dhaganuglaanta bulshada ganac ka dhex abuureen bulshadiina ka raarideen in wadaad ergeeya la'aantiis mooyee aan Alle agtiisa qof na galaas biyo ah ka kabban doonin. Waxa ayba ku dhawaadeen in tabtii wadaaddadii Fatikaanka ay dambidhaafka Alle tafaariiq ku iibiyaan.

---

[8] Roomaankii mar ahaan jiray awoodda dunidu ayaga oo tixraacaya farsamooyinkii Darius the Great waxa ay dhiseen waddooyin cajiib ah oo ilaa maanta dunida laga adeegsado. Fiiri *buugga A History of Roman Roads: From Ancient Times to The Motor Age* ee uu qoray Herbert Reinhold Jacobson.

Haddii tahliisha wadaaddadu wax tari waydo ama waxtarmaadkeeda la daahsado waxaa sharad lala galaa duulal qarsoon oo awood badan lagu malaynayo.
Haddii qof bukoodo waxaa lagu yiraahdaa “haddii aad idinkii tihiin iska sii daaya miskiinka, markii roob da’o ayaa waxiinni la idinka siinayaaye.”
Haddii gabar gashaanti ahi waalato waxaa duulasha qarsoon la ballamiyaa marka la guursado. Awliyadii geeriyootay iyo culimadii iyo awoowayaashii beryo hore godka galay ayaga qudhooda lagama maarmo oo xoolo badan baa dartood loo gawracaa si karaamadooda barwaaqo iyo baraare loogu helo.

Aniga oo aan degaankayga wax uga qorayn sidii Joseph Conrad iyo jaallayaashiisi reer Yurub[9] haddana waxa aan filayaa in aanan gefsanayn haddii aan xaalka degaankan

---

[9] Joseph Conrad oo ahaa qoraa Polish-British ah bugaagtiisa na uu ugu caansan yahay Noofalkiisa *Heart of Darkness*; iyo badanka qorayaashii reer Yurub waxaa caado u ahayd in ay dadka Afrikaanka ah cagta hoosteeda geliyaan ilaa ay gaareen heer ay Afrikaanka ka dhigaan dad aan hadlin, yacni aan af lahayn oo duunyada waxba dhaamin.

ku mataalo *Bohoshii Balaato*[10] ama tolwaynihii reer *Umuofia*[11] ee uu Chinua Achebe ku dhaleeceeyay oddoros iyo saadaalin la'aanta saadambe.

[10] Bohoshii Balaato (Plato's Cave) sidaa oo kale na loo yaqaan *The Allegory of the Cave* waa sarbeeb falsafadaysan oo laga reebay Filasuufkii reer Giriig ee Socrates waxaa na buuggiisa *the Republic* ku soo guuriyay ardaygii Socrates ee Plato. Sheekadu waa wadasheekaysi dhexmaraya Socrates iyo Glaukon oo ahaa Plato walaalkiis. Sheekada dulucdeeduna waa sidaan: carruur yaryar oo aan garasho yeelan baa lagu xabbisay bohol. Carruurtu ma istaagi karaan, dhinacyada iyo gadaalna ma fiirin kaaraan. Sidaas bay ku waawaynaadeen. Ragga xabbisan hortooda waxaa ah darbi wayn oo ay ka muuqanayaan sawirro ama hummaagyo dhaqdhaqaaqaya oo codad (hadal) samaynaya. Ragga xabbisani codadka ay maqlayaan bay xaqiiq ama dhab u haystaan ama u qabaan. Dhabarka dambe ee maxaabiista waxaa ah darbi, darbiga waxaa ka dambeeya wadiiqo (footbath) ay dad badani qulqulayaan. Dadku waxa ay xammaalayaan alaabo kala duwan. Waxaa ka sii dambeeya oo meel sare ah ka baxaya dab qaxmaya. Holaca dabka falcelinta ka imaanaysa ayaa ku dhacaysa darbiga maxaabiista hortooda ah. Taas oo macneheedu yahay hummaagyada ay maxaabiistu arkayaan waa alaabaha ay xammaalayaan dadka wadiiqada qulqulaya. Dabadeed nin maxaabiistii ka mid ah ayaa silsiladdii ka go'day waxaa na u suurtagashay in uu bohoshii bannaanka uga baxo taas oo uu ku ogaaday waxii bannaanka bohosha ka dhacayay. Ka dib bohoshii ayuu ku soo noqday asaga oo saaxiibbadiis u sheegay in hummaagyada ay arkayaan aysan xaqiiqo ahayn. Balse saaxiibbadiis waxa ay u arkeen nin waalan markii uu hadalkii ka badiyayna waxa ay ugu hanjabeen in ay dili doonaan.

[11] Chinua Achebe waxa uu buuggiisa Noofalka ah ee *Things Fall Apart* ku dhaleeceeyay tolwaynihii ee reer Umuofia ee uu ka dhashay Okonkwo oo ahaa shakhsiyadda (Character) sheekada buugga atooraha ka ah. Achebe waxa uu tolkaas ku eedeeyay in yihiin dad aan mustaqbalka oddorosi karin isbeddallada waayahana aan la jaanqaadi Karin.

## BIRTA BUUBTA

Sidii Sidney Poitier[12], degaankaas omaska iyo oomanaha ahaa ee aan ku noolaa si walba oo uu dib ugu dhacay, si walba oo uu weli u taagan yahay meel dhawr kun oo sannadood dunidu ka hayaantay, haddana aniga waxa uu ii ahaa dunida keliya ee aan aqaannay, noloshiisuna waxa ay ii ahayd tan ugu heer sarraysa carra'edag oo idil. U ma ba malayn jirin in uu jiro degaan ka horreeya midka aan ku noolahay nabdigaygana kuma jirin in ay jirto nolol ka tayo sarreysa tan aan ku noolaa. Marnaba isma aan oran nolosha qoyskeenna ayaa wax ka dhimman yihiin. Oo maxaa naga maqnaan karay? Qoyskeennu waxa uu lahaa saddexda meesi ee degaanka la dhaqdo, inkasta oo geelii qoyskeenna col qaaday markii aan garasho yeeshay.

---

[12] Sidney Poitier oo ka mid ahaa jilayaashii ugu magaca dheer Hollywood mar uu cabbirayay noloshii magaalada Nassau ee dalka Bahamas oo ahayd halka uu ku koray waxa uu yiri: *"It may have been rustic in those days to some, but at that point in my worldview, Nassau was the height of Civilization".* Xigasho: buugga *Sidney Poitier: Life Beyond Measure.*

Ma moodi jirin in uu jiro gaadiid ka wanaagsan awrta koromada ah ee qoyskeennu dhaansado kuna guuro. Balse waxaa waydiimo cusub igu dhasheen habeen uu aqalkeenna yimid baabuur u yimid in uu Gaalkacyo u qaado aabbe oo aad u xanuunsanaa. Habeenkaasi waxa uu ahaa markii ugu horraysay ee aan baabuur arko, arko keliya ma ahan'e aan oogadiisa taabto. Aad baan ula yaabay samayskiisa, indhihiisa iftiinka dheer iyo guuxiisa la yaabka leh. Habeenkaas laga bilaabo waxa aan jacayl u qaaday birta guuxda iyo midda oradda oo dhan. Waxa aan ogaaday in birta guuxda ee oradka badani tahay gaadiid ka wanaagsan koromadeenna. Aniga oo la yaabi jiray birta guuxda ee oradka badan oo dhan, haddana waxa aad iiga sii yaabiyay birta riinka dheer ee hawada sare buubta. Haddana waxaa yaab-ka-yaabkiisa igu sii noqday markii la yiri "keligeed iskama buubayso ee dad baa ku dhex jira oo weliba duulinaya oo guuxa aad maqlaysid wiilal baa kaga cabaajinaya."

Miyaysan ahayn mucjiso mud soo tiri oo lala fajaco? Anigu uguma horrayn ugumana dambayn doono xoolaley la amakaagta birtaas anfariirka leh.

Xoolaleydii birtaas duulaysaa ka yaabisay waxaa ka mid ahaa nin la oran jiray Maxamuud Cali Beenaley. Maxamuud waxa uu ahaa xoolaraacde ku dhaqan xudduud-beenaadka gumaysigu ku kala ooday Soomaalida ku dhaqan Mudug iyo Wardheer. Bilowgii 1930yadii ayaa Maxamuud oo xoolihiisi foofsanayaa arkay diyaaradihii dagaalka ee Talyaaniga oo guluf weerar ku ah ciidamadii Xabashida ee aaggaas joogay. Maxamuud waxa uu tiriyay maanso uu ku tilmaamayo tilamaamaha yaabka leh ee bahashaas iyo wacdaraha ay ka dhigtay faltankii u dhexeeyay Mussolini iyo Xayle Selaase. Waxa uu yiri:

*Cirka waxaan sallaanku u sudhnayn, sida sayaariinta*
*Oon saraca hoosiyo arlada, cagaha saaraynin*
*Oo siifaduu kaga hanqarin, haadku sare joogsan*
*Oo laga salsaliyoon lahayn, siigo iyo leexo*
*Oon lagu salaaxayn haddaad, Sumuc ku liishaanto*
*Belaayada qalbiga suurisaye, samada xiimaysa*
*Oo sool dhexeetiyo hawada, sulunsulxaynaysa*
*Oo gaal sameeyoon Ilaah, nolol u suuraynin*
*Baa sebenka Ciid looga tegay, sabashadeediiye*

*Oo sanada dayrtiyo arlada, loogu suudalaye.*

*Dhulka wixii socdaa laga holaa, samay colaadeede*
*Xagga sare wax kaa dilahayoo, sun iyo baaruud leh*
*Oo aan dagaal lagu sardamay, kaga sed qaadaynin*
*Inaad samirto mooyee ma jiro, waxaad samaysaaye.*

*Sarsar awdan saamo iyo aqal, siibad iyo daaro*
*Siraad iyo bannaan soohdiniyo, sud iyo meel hawda*
*Socod iyo negaanshiyo fadhi, seexad iyo rooris*
*Sina waxaanad kaga maag helayn, na lagu soo saarye*
*Saddex boqol haddaad sii dhaxdiyo, saayid iyo maalmo*
*Salaaddii dillaacdaba Iblays, dhalada kaa saaran*
*Oo Eebbhahay kugu salliday, saancad kama weyna!!*

*Sanca lala fajacaalow ninkii, bahashan soo saaray*
*Sixir lagu tusyaa iyo farsamo, waxuu sameeyaaba*
*Alleylehe ninkaaasaa sanciyo, saayiqnimo sheegtay!*

*Wax sawaabka haadeed leh baa, saabtay dunidiiye*
*Sintuu dhigay Amxaarkii lahaa, seerahaan jebine*

*Kolka adigu Soomaaliyeey, qaado samirkaaga*
*Oo dhaha "Sinyoorow" na daa, waannu soo geliye*[13]

Markii dhawr goor indhahaygu qabteen birtaas sida shimbiraha u duusha ayaan aad u rabooday.
Waxa aan jeclaaday in aan duuliye noqdo. Waxa aan u buseelay in aan maalin diyaarad duuliyo oo hawada sare dhexmushaaxo kuwa sidayda oo kale guuxa diyaaradaha jecelna ugu raaxayn doono riinka diyaaradda aan shirkeeda fadhin doono shukaantana u hayn doono.

Inkasta oo aanan diyaarad raacin cagna dhigin garoon diyaaradeed ilaa aan da' qaangaarnimo gaaray haddana marka aan dugsiga Qur'aanka u socdo ama idaha qoyskeenna ku raacayo bananka Mudug waxa aan arki jiray diyaarad hawada sare duulaysa ama guuxeeda ayaan maqli jiray markaas baan cirka eegi jiray. Aad baan u jeclaa guuxa dayuuradaha waana aan daawan jiray ilaa ay ka libidho. Wax aragti ah habayaraato'e kama aanan

---

[13] *Maansadaan markii ugu horraysay waxa aan ka maqlay barnaamij uu VOA Somali ka daadihinayay Axmed Faarax Cali (Idaajaa), maansada oo qoraal ah na waxa aan ka helay Bilaal Aw-Fiqi oo ka mid ah asxaabta aan Facebook iska barannay.*

haysan sida diyaarad loo sameeyo, yaa sameeya? Iyo maxaa laga sanceeyaa? Xataa ma garanayo goorta aan ogaaday in diyaaradda uu duuliye duuliyo waxase aan qiyaasayaa in aan ka ogaaday sheeko aan hooyaday iyo aabbahay habeen ka maqlay ayaga oo sheekaysanaya.
Ka dib markii ay hawada sare ka arkeen biligta dayuurad dheelmanaysa ayaa hooyo soo gocatay sheeko ay horay u maqashay oo ahayd: nin reer miyi ah oo darin loo dhigay ardaaga reerkiisi oo nabad ku soo uruuray dabadeedna goon idaad loo keenay baa asaga oo goonkii feenanaya caadka sare ka arkay biligta diyaarad guuraynaysa, markaa buu yiri "*bal xilliga uu dheelminayo day? Ilaahow waxa aad badday ha na badin.*" Hooyo iyo aabbe qosol bay isu jiibiyeen ayaga oo la yaabban ninka goonka idaad ku dul feenanaya darinta tifantay ee Alle ka magangelaya in uusan badin waxa uu baday duuliyaha caadka dushiisa diyaaradda ku mushaaxaya habeen gudcur ah.

Waxa aan u bogi jiray guuxa matoorkeeda, ilaa iyo maantana sidii ayaan u jecel ahay guuxa iyo riinka matoorka diyaaradaha oo saacado aan tiro lahayn baan Youtube-ka ka daawaday dayuuradaha dagaalka ee

Maraykanka iyo Ruushku sameeyaan. Tanse aan ugu jecel ahay waa dayuuraddii *Concorde* ee Ingiriiska iyo Faransiisku sanceeyeen ee ku dhawaad labaatan sannadood ka hor hawlgabka laga dhigay. Alle maxay qurux iyo qaayo lahayd, maxay joog iyo jamaal lahayd! *Concorde*, waxa ay ahayd mucjiso ka soo burqatay maanka aqoonyahannada Ingiriiska iyo Faransiiska.

Daawashadii diyaaradihii hawada Mudug dulmushaaxi jiray waxa ay igu beereen riyada iyo hammiga aan sadarradii hore ku soo sheegay. Waxa ay uurkayga ku beereen iniin yar oo inta bikaacday sidii laan ubax leh u bulaashay taas oo noloshayda xakamaha u qaban doonta sanooyinka soo aaddan. Iniintaas yar ee dayuuradihii i dulmarayay uurkayga ku aaseen waxa ay iigu dhex kori doontaa sida ilmuhu uurka hooyada ugu koraan.

## SEBAN COLAADEED

Hayeeshee, gu'yaal dambe dabadood baan ogaan doonaa in diyaaraddu tahay tii dishay abtigay Dhimbil Nuur, bilowgii 1980aadkii.

Dharaar cad bay dayuuradihii dagaalka ee Mengistu Xaylemaryam weerarro cirka ah ku qaadeen Mudug oo uu ku yaallay garoonka saddexaad ee ugu wayn Soomaaliya, hoyna u ahaa raxan ka mid ah dayuuradihii dagaalka ee Ciidankii Cirka Soomaaliyeed. Mudug keli kuma ahayn weerarrada dayuuradihii Mengistu ee isla waayahaas magaalooyin iyo gobollo badan oo Soomaaliyeed baa dhibbane u noqday dayuuradihii Soofiyeetku ku hubeeyay ciidankii Mengistu. Boorama ayaa ka mid ahayd magaalooyinkii ay duqeeyeen ee dhibaatada ka gaysteen. Ku dhawaad 40 arday oo dhiganayay iskool Boorama ku yaallay, macallimiin iyo hooyooyin uur lahaa ayay dayuuradihii Mengistu Boorama ku xasuuqeen sannadkii

1984. [14] Marka dayuuradaha Mengistu duqaynayeen magaalooyinka Soomaaliyeed ciidankii Soomaaliyeed waxa ay ku foognaayeen dilka iyo dhaca shacabkii ay qalabka u sideen. Inkasta oo xukuumaddii xilligaas ku faani jirtay dhismaha ciidan xoog leh oo ay u bixiyeen libaaxyada Afrika ilaa maantana Soomaalida qaarkood ku faanaan, haddana, nasiibdarro waa ay tahli waayeen in ay dayuuradihii Mengistu ka difaacaan magaalooyinkii Soomaaliyeed. In dayuuradaha Mengistu har cad duqeeyaan Mudug oo bartamaha Soomaaliya ku taal waxa ay qayb ka ahayd bilowga guuldarrooyin iyo ayaandarrooyin badan oo soo garaacay irdaha qaranka Soomaaliyeed.

Dhawr iyo labaatan sannadood dilkii abtigay ka dib na waxa aan marqaati ka noqon doonaa taangiyada ninkii Mengistu ka la wareegay xukunka Itoobiya oo dhexmushaaxaya bartamaha caasimaddii Soomaaliweyn ee Muqdisho. 28kii bishii Dhiseembar sannadii 2006dii

---

[14] Xigasho: Somalitalk.com accessed on July 12, 2022.
http://www.somalitalk.com/2007/sept/07sep207.html.

waxa ay isirka Soomaaliyeed u ahayd maalin madow, maalin murugo iyo niyadjab. Maalin sooyaalka Soomaaliyeed baalmadow uga qoran. Maalintii ciidanka Itoobiya qabsadeen Muqdisho. Waxa ay maalintaasi ii ahayd maalin aan dareemay murugo iyo ciil la mid ah tii ay dareemeen barbaartii Faransiisku 28kii Janaayo 1871, markii ciidankii Jarmalku ay Paris qabsadeen.[15] In ciidankii Jarmalka oo aan markaas ka hor qaran midaysan lahayni qabsadaan caasimaddii Boqortooyadii guunka ahayd ee Faransiisku waxa ay ahayd wax aysan marnaba hummaagsan maskaxda barbaartii Faransiiska ee qarankoodu boqollaalka dabshid ku hor kaadshayay qaaradda Yurub. Waxa ay dadka Faransiiska u ahayd maalin aysan weligood suuraysan - in Jarmalkii ay boqollaalka gu' ka soomiyeen yeelashada dawladnimo iyo qaran midaysan ay dharaar cad Paris qabsadaan. *Watilkal ayaamu nudaawiluhaa bayna-naasi.*

Maalintii ciidanka Itoobiya Muqdisho qabsadeen waxa aan niyadda iska iri "Allahayow maxay Muqdisho u

[15] Fiiri buugga *The Communards of Paris,* 1871 oo uu tifaftiray Stewart Edwards.

noqon wayday Berlin-tii Bismarck[16] Addis Ababana u noqon wayday Paris-tii Napoleon-kii saddexaad?”[17] Waayo, sidaas bay ku qummanayd oo Soomaaliya iyo Jarmalka ayaa si isugu ekaa halka Faransiiska iyo Itoobiyana si isu shabbahayeen.

Yeelkeede, in taangiyada Xabashidu Muqdisho dhex gurguurtaan waxa ay ahayd dhacdo la sugayay in ay maalin uun imaan doonto, iyo miraha geed-qaraarkii ay hoggaamiyayaashii Soomaalidu u abuureen jiilasha aan ka midka ahayd. Waa kobtii uu Danjire Maxamed Cusmaan Cumar ku tilmaamay buuggiisa “*The Road to Zero: Somalia’s Self-Destruction”.*

Markii aan daawanayay diyaaradihii hawada Mudug dulmushaaxayay, sidii aanan u ogayn dilkii diyaaradaha Mengistu dileen abtigay baan uga war iyo wacaal la'aa burburka iyo baaba'a uu dalkaygu maquurtay. War iyo wacaal toona uma aanan hayn boqollaalka kun ee

---

[16] Otto von Bismarck, Ra’isul Wasaarihii (Chancellor) ee Jarmalka intii u dhaxaysay 1871 ilaa 1890 ahaana ninkii Jarmalka mideeyay.

[17] Nepoleon the Third, Madaxweynihii Faransiiska (1848 – 1852) iyo Imbaraaddoorkii Faransiiska (1852 – 1870).

Soomaaliyeed ee xeryaha qaxootiga looga ooday dalalka dariska iyo boqollaalka kun ee macluusha iyo cudurradu ku gumaadayeen gobollada koofureed ee dalkayga.
Waxa kale oo aan ka war la'aa muuqaalladii hororka iyo argagaxa miiran ahaa ee warbaahinta dunidu ka soo tebinaysay dalkayga, iyo ba'ii iyo hooggii uu George Alagiah ka soo tebiyay Goofgaduud gu'yaal ka dib na uu qalinka ku suureeyay gudaha baalasha buuggiisa *"A Passage to Africa."* Waxa aanan hilmaami doonin hooyadii Soomaaliyeed ee lugteedi macluushu feenatay ee uu George Alagiah ku mataalay *Boomerang*-kii Aburijinaalka Australia. George qudhiisa ayaa yiri *"ma hilmaami doono hooyadaas."* Sidee ayaan ku hilmaami aniga oo ku isir iyo ku dal ah hooyadaas?

Wax kale iskadhaafe, waxa aanan ogayn aqoonsigayga iyo qofka aan ahaa. Keliya waxa aan aqaannay qolada aan ahaa iyo jufa-hoosaadka aan ka sii ahaa taas oo caadiyan ahayd aqoonsiga keliya ee reer miyiga Soomaalidu yaqaanneen. Xaqiiqo ahaan in aan Soomaali ahay kuna noolahay dal Soomaaliya la yiraahdo waxa aan ku baraarugay waa dambe oo aan agfarfariistay odayaal

dhagaysanaya BBC Somali iyo idaacado kale kuwaas oo aan sidaa oo kale ka bartay magacyada qaar ka mid ah gobollada iyo magaalooyinka Soomaaliya, iyo dalal iyo magaalooyin caalamka ah sida Maraykan, Ruush, Shiine, Ingiriis, Jabbaan, Yuguslaafiya, Ciraaq, New York, Jimciyadda Quruumaha ka dhaxaysa, London, Moosko, iyo kuwo kale oo badan.

Intii aanan ogaan in aan Soomaali ahay waxa aan ogaaday in aan Muslim ahay diintayduna Islaam tahay oo aan caabudo hal Ilaah oo awood badane ah kaas oo farriinta hoggaansamidda iigu soo dhiibay Nebi Muxammad (csw) oo dhalashadiisu Carab ahayd kana sii ahaa Quraysh oo uu ka sii ahaa reer Banii Haashim. Waxa aan bartay abtirsiinta Nebi Muxammad ilaa labaatan oday, laga bilaabo aabbihiis Cabdullaahi ilaa Bin Cadnaan. Si taas la mid ah ayaan u bartay abtirsiintayda ilaa laga gaarayo Sacad Saciid oo la sheego in uu ahaa ninkii beesha aan ku abtirsado ka soo uskuntay. Balse sida aan u bartay in Nebi Muxammad ahaa nin Carbeed uma aanan baran in aan ahay wiil Soomaaliyeed ama la iima barin. Aqoonsiga

Soomaalinimaduba waxa uu ahaa wax aan dib ka ogaaday, markii aan magaalada imid.

Muddo dheer waxaa maankayga ku legdamayay labada aqoonsi, kan qabiilka iyo kan Soomaalinimada, faham durugsanna uma aan lahayn xiriirka ka dhexeeya labadooda. Waxa aan ku jaahwareeray midkii aan qaadan lahaa labadan aqoonsi. Ma midka qabiilka ee aan ku soo ababay mise kan cusub ee Soomaalinimada? Xaqiiqo ahaanse sebenka aan adduunka imid xaaladda dalkaygu ku sugnaa aqoonsiga aan sitay iyo dallada aan ku hoos noolaa waxa ay ahaayeen tan qabiilka, waayo, dhib iyo dheefba kan aan u ciirsanayay asaga ayuu ahaa. Kan kale ee Soomaalinimadu magac ahaan un buu u jiray ma ahane waxa kale iiguma toorrayn.

Inta sooyaalka la ogyahay, dadka aan ka dhashay sidaas bay u soo noolaayeen oo qabiilka ayaa ahaa saldhigga noloshooda. Gobolka aan ku dhashay ee Mudugna inta la ogyahay weligiis si buuxda hannaan dawladnimo ugama hirgelin taas oo sababtay in gobolku noqdo mid ka mid ah gobollada ugu liita horumarrada dhaqaale iyo kuwa

bulsho dalka oo dhan. Inkasta oo gobolku siyaasadda dalka Soomaaliya saamayn ballaaran ku lahaa ilaa maantana ku leeyahay soona saaray inta badan hoggaamiyayaashii dalka laga soo bilaabo 1950yadii haddana taasi Mudug wax la taaban karo uma tarin oo weli Mudug waa mid ka arradan kaabayaasha dhaqaale iyo adeegyada dadweynaha. Dhammaan maamulladii Soomaaliya soo maray laga soo bilaabo kii gumaysiga Talyaaniga (1900-1941), kii millateriga Ingiriiska (1941-1950), kii Wasaayada Qaramada Midoobay (1950-1960), iyo maamullada qaranimadii 1960kii ka dib midkoodna caloosha uma gelin gobolka mana samayn maamul daadejin gaarta reer miyiga ku dhaqan dhulka ballaaran ee gobolka. Kulli maamulladaasi waxa ay ka sinnaayeen in xukunkooda ku ekaa magaalooyinka yar yar ee gobolka. Xataa maamulkii Saldanaddii Ajuuraan ee Mudug xukumayay qarnigii 13aad ilaa qarnigii 17aad waxaa taliskoodu fadhiyi jiray ceelasha biyaha ee ay ka qodeen gobolka kuwaas oo reer miyiga waraabdoonka ahi ku qasbanaayeen u hoggaasanaanta xukunka Saldanadda oo

canshuur bixintu fure u ahayd haddii kale aq bay u la'an lahaayeen.[18]

Mudug waa ubucda dabciga iyo hab nololeedka xoolaraacatada Soomaalida ee qallafsan ee nolosha adag ee xxooaraacatanimadu qaabaysay. Dirirta joogtada ah ee u dhaxaysa qabiillada badan ee dega, xoolo kala dhaca, abaarta iyo biyo la'aantu waxa ay ka mid ahaayeen nololmaalmeelka reer Mudugga. Balse Mudugta aan ku dhashay ma ahayn Mudugtii Ajuuraanku ceelasha biyaha u fadhiyeen iyo Mudugtii askarta Talyaanigu darfaha ka fadhiyeen. Ma ahayn Mudugtii qabiilladu ku dagaallami jireen warmaha, leebka iyo qaansada. Mudugta aan ku dhashay iyo xilliga aan dhashay labadaba, Mudug waxa ay ahayd mid ka duwan Mudugtii hore. Mudug dadkeedu ka tirabadan yahay Mudugtii hore. Mudug qabiilladu ku dagaallamayaan qoryaha darandoorriga u dhaca iyo madaafiicda culus ee Soofiyeetkii iyo Maraykanku ku soo hurgufeen Soomaaliya sannadihii toddobaatanaadkii iyo

[18] Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan hannaankii maamul ee Saldanaddii Ajuuraan fiiri buugga *The Shaping of Somali Society: Reconstructing the History of a Pastoral People 1600-1900* ee uu qoray Dr. lee V. Cassanelli

siddeetanaadkii. Mudug gulufyada dagaal ee beelaha dhexmarayaa aysan hoggaaminayn dagaalyahanno fardafuul ahi, laakiin ay hoggaaminayeen Jenaraallo iyo Kornayllo ka soo baxay kulliyadaha dagaalka ee Ruushka iyo Talyaaniga. Mudug diriraha qabiileed aysan hoggaaminayn horjoogayaal beeleed oo aan wax akhrin waxna qorin, balse ay horkacayaan saraakiil millateri oo heer jaamacadeed ah. Mudugta aan ku dhashay ma ahayn Mudug ay ka oogan yihiin dagaallo qabiil oo ka kacay geel la kala qaaday ama ceelbiyood, balse waxa ay ahayd Mudug ay ka oogan tahay colaad ka kacday kursi madaxnimo oo yaalla guri ku yaalla meel Mudug u jirta in ka badan 700km. Waxa ay ahayd Mudug ay ka shidan tahay colaad aysan kaabbaqabiilladeeda iyo nabaddoonnadeedu garanayn si loo xalliyo, waayo, waxa ay yaqaanneen sida loo damiyo colaadaha ka dhasha geel kalaqaadka, ceelbiyoodyada, aanada iyo wixii la mid ah, balse ma aysan aqoon sida loo xalliyo colaad ka kacday kursi madaxtooyo oo yaalla magaalo aysan weligood tegin, mana aysan aqoon sida loola xaalo dirir ka oogantay gacan-ku-haynta xukun dawladeed oo aysan ab iyo isir u lahayn. Sidaas darteed, colaadda ka oognayd Mudugta

aan ku dhashay waa ay ka baaba' iyo burbur badnayd kana dabadheerayd colaadihii hore, maadaama hubka lagu dagaallamayay ka baas iyo halaag badnaa hubkii waayihii hore lagu dagaallami jiray, sababta colaadduna ahayd mid ka geddisan sababihii hore la isugu dagaali jiray ayna ahayd colaad meel kale laga soo xawilay oo lagu dirirayo xaajo aan xeerarkeeda la aqoon.

Mudug waxa ay ahayd gobolkii ugu horreeyay ee loo soo xawilay dagaalladii kursiga Filla Soomaaliya yaallaa sababta u ahaa, balse dagaal qabiileed loo dhalanrogay muddo sannado ah na Muqdisho lagu karkarinayay.

Sannadkii 1978 saraakiil sarsare oo ka tirsanaa Ciidankii Xoogga Dalka ayaa waxa ay abaabuleen afgambi ay xukunka kaga tuurayaan nidaamkii kelitaliska ahaa ee qudhiisu xukunka afgambiga ku yimid sagaal sannadood ka hor. Markii la fashiliyay qorshohoodi afgambiga, ayagiina waa la laayay, intii la qabtay, intii aan la qabanna dalalka deriska ah ayay u baxsadeen. Mudug oo hoggaamiyayaasha afgambigu ka fashilay ka soo jeedeenna guluf ciidan baa taliskii millateriga ee dalka

xukumayay ku kiciyay. Gaboodfallo baahsan oo bini'aadannimada ka baxsan baa lagu la kacay qabiilkii ay ka dhasheen saraakiishii afgambigu ka fashilmay, ayada oo dambi looga dhigay keliya in saraakiishaasi ka dhasheen. Xasuuq, kufsi, dhac, xabbis iyo burburin hantiyeed oo aan loo aabayeelin baa lagu la kacay dadkaas Soomaaliyeed ee dambiga looga dhigay in ay ka dhasheen saraakiil afgambi isku dayday. Sida aan ka soo xigtay waraysi cinwaankiisu ahaa *"The African wars from within"* oo lala yeeshay Professor Mohmood Mamdani, Afrika waxaa laga raacay *"reeraynta khilaafyada siyaasadeed iyo siyaasadaynta khilaafyada reeraha.*[19]*"* Yacni haddii mid kugu reer ah ay dawladda isqabtaan adiga iyo reerka aad ka dhalatayba waxa aad tihiin cadowga qaranka waxaana idinku waajibay ciqaab-wadareed (collective punishment). Si taas la mid ah haddii aad ku reer tahay ninka awoodda qaranka dadka ku dulminaya waxa aad tahay dambile asaga la mid ah oo ay tahay in laga aargoosto, waa sida xeerarka qabyaaladdu qabtee.

[19] Waraysiga Professor Mamdani waxa aan ka daawaday barta YouTube.

Kursi kala riixashadii Filla Soomaaliya, gacan-ka-hadalkii ka dhashay baa reero nabad ahaa lagu la hiigtay. Gulufkii degaannadaas lagu ekeeyay waxaa ka dhashay in kumannaan shacab ahi dalka ka qaxaan. Sidaa oo kale na jabhad hubaysan abuuranto taas oo saldhig ka samaysatay Itoobiya oo Mudug xudduud la leh. Afgambigaas fashilmay waa midka qoraagii waynaa ee Soomaaliyeed Cabdulqaadir Aroma ku tilmaamay *“furihii fidnada dagaallada sokeeye ka soo farcameen”.*

Gulufkii ciidan ee taliskii millaterigu ku beegsanayay qabiilka raggii afgambiga isku dayay iyo weerarradii jabhaddu ka soo qaadaysay xudduudda Itoobiya waxa ay Mudug u rogeen goob dagaal oo xaaladdeedu cirka ku laalan tahay. Waxa kale oo taliskii millaterigu abuuray isku dhacyo qabiil oo ka dhan ah qabiilkii saraakiishii afgambigu ka fashilmay. Waxa kale oo Mudug bartilmaameed u noqotay taliskii Mengistu ee kaalmaynayay jabhadda dalkiisa ka soo duulaysay.

Inkasta oo Mudug caan ku ahayd dirirta iyo colaadaha, dagaallada qabiilladu na ahaayeen kuwo sooyaalka Mudug ku xardhan, haddana waxaa odayaal xog'ogaal ahaa ii sheegeen in dirirta qabiilladu Mudug ku yaraatay tan iyo yagleeliddii Jamhuuriyadda sannadkii 1960kii ilaa dabayaaqadii 1980yadiina aysan ka dhicin dagaallo qabiil oo waawayn. Balse taasi wax ay isbeddashay dhammaadkii siddeetameeyadii markaas oo Mudug martigelisay bilowga isku dhacyo iyo isqoonsiyo qabiileed oo Muqdisho lagu soo falkiyay ujeeddadoodu na ahayd xukun dheeraysi iyo kursi difaacasho. Waxa kale oo abuurmay jabhado kale oo ay hoggaamiyeen rag gobolka u dhashay kuwaas oo lid ku ah taliskii millateriga. Hub farabadan oo laga soo bixiyay xeryihii ciidanka ayaa reer miyigii gacanta u galay. Waxa kale oo asna gacanta reer miyiga galay hub ay la soo noqdeen reer miyigii Mudug laga qafaalay intii uu socday dagaalkii 77 ee dhexmaray Soomaaliya iyo Itoobiya raggaas oo markii ciidankii Soomaalidu soo jabeen ayaga oo hubkoodi sita miyigii laga qafaalay ku guryo noqday.

Durbaankii colaadeed ee laga garaacayay Filla Soomaaliya iyo reerayntii siyaasaddu ugu dambayn waxa ay iridda gurigeenna soo garaaceen gu'gii aan dhashay (1986). Aabbahay iyo hooyaday Eebbe labadoodaba ha u naxariistee, ayaa igula kaftami jiray in aan biti xumahay, waayo, habeenkii aan dhashay baa kobtii aan ku dhashay dirir qabiil ka oogantay taas oo galaafatay dad iyo duunyo farabadan, ilaa maantadan aan buuggan qorayana colaaddaasi ma damin oo si teelteel ah ayay weli waqooyiga iyo galbeedka Mudug uga shidan tahay. Waa mahad Eebbe haddii aysan *"Colaad"* igu naynaaysin.

Dirirtaas dhalashadaydi la kowsatay waxa ay ka bilaabatay tuulada Ballibusle oo ka tirsan degmada Jarriiban ee waqooyiga Mudug oo muddo dheer ay si nabad ah u wada degganaayeen labada qabiil ee Sacad (Habargidir) iyo Cumar Maxamuud (Majeerteen). Inkasta oo labadaan reer ahaayeen kuwa ay dhexmari jireen colaadihii Mudug ka dhici jiray kuwii ugu adkaa, haddana sida aan horay u soo sheegay in muddo ah wax colaad ah oo wayni ma dhexmarin taasina waxa ay sababtay in ay isdhexdegaan oo baadka iyo biyahaba wadaagaan

labadaas beelood. Balse, durbaankii colaadeed ee shaydaanku tumayay in muddo ah ayuu ka dhex dananayay beelahan walaalaha ah. Sida aabbahay iisheegay waxaa in muddo ah jiray dareen iyo isqoonsi, isnac iyo kala shaki. Waxaa abuurmay shaf garaac iyo tookh qabiileed. Waxaa batay adeegsiga hadallo ay ka buuxaan *ma aniga oo Daarood ah iyo ma aniga oo Hawiye ah* ugu dambaynna gaaray in gacanta la isku qaado oo reer miyigii ceelasha biyaha ku dagaallamaan ayaga oo u kala safan Hawiye iyo Daarood, inkasta oo aan Hawiye iyo Daarood kale meesha joogin ee Cumar Maxamuud iyo Sacad Saciid keliyihi isla joogeen. Balse, sidii aan horay u sheegay waxa ay raggii beelahani ku heesayeen hees shaydaan ku soo laxameeyay muusiggana ugu soo tumay xafiisyada taliskii millatariga ee dalka xukumayay. Ugu dambayn, waxaa goor habeen ah asaga oo hurdaya la miray oo la dilay Caabbi Dibbood Diini oo uu dhalay adeerkay aabbahay la dhashay, dabadeedna aargoosi afar nin lagu dilay baa laga ga jawaabay.

Balaayadaas habeenkaas bilaabatay markii aan garasho iyo xusuus yeeshay waxa ay maraysay oo isu rogtay

dagaal umulo doox ah iyo kala qax. Labo gu' ka hor xilligaasna (1984) waatii Habarjeclo iyo Dhulbahante “birta iska asleen” - haddaan adeegsado erayadii Gaarriye- colaad loo soo xawilay darteed. Waatii Gaarriye lahaa:

*Habbisada dadkayga la saaray*
*Haan-haanta loo kala soocay*
*Mahuraanka la isku lisaayo*
*Hurdankiyo gabaarogurdayska*
*Halaq baa ku raadgadanaaya.*

*Isagaa hubka isugu dhiiba*
*Hanaddada sidaa ku shidhaysta*
*Dabadeed hamuunta ku reeba.*
*Isagaa habeen iyo maalin*
*Godobtiisa reer huwinaaya*
*Hadba shaadh qabiil u tolaaya.*

*Wadhi wadhi hoheey cukuyeey hoh!*
*Qoriyahaw hubsiino la'aanta*
*Qoriyahaw hawaawi-dhacaaga*

*Qoriyahaw hinnaase la-boodku*
*Jugtu waa waxaan la hagaasay.*

*...Hammiga iyo sidaan u tol beelay*
*Hiqdu waa anoo ladi waayey*
*Haybtaydi baa is cunaysa*
*Garabkaygi baa is wadaheeray*
*Maradaydi baa igu huraysa.*
*Kugu dhimay oo kaa dhimay waa huq*
*Rati heeryadiisa cunaaya*
*Hungo waa sidaan ahay maanta*
*Dhanna heedhe iima fayooba.*

*Anigaa colaadda ku hoobtay*
*Wiil iyo walaalba ka hoogay*
*Anigaa huggaygu i diiday.*[20]

Markii aan garasho yeeshay reerkeennu ma degganayn Ballisbusle iyo meel u dhow, Gaalkacyana goor hore ayaa lagu kala yaacay oo waxaa ka socday weerar iyo weerar

[20] Xigasho: buugga *Hagarlaawe* ee uu qoray Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) oo 2007 la daabacay.

rogaal celis ah. Balaayadii habeenkaas bilaabatay markii aan caqliyaystay Mudug inta ay ka gudubtay bay ilaa Kismaayo gaartay. Waxa aan ku indhadillaacsaday qoyskeenna oo qaxaya geerida iyo tacsiduna gurigeenna yaallaan. Waxa aan xusuustaa welina iga hormuuqda walaalkay Cabdicasiis Maxamed Diini subaxii asaga oo qori AK47 garabka u suran yahay uu dhanka galbeed naga ga dhaqaaqay. Waxa aan xusuustaa in asaga iyo aayadii (hooyaday) cabbaar wada hadleen ka hor inta uusan galbeed aadin, laakiin ma xusuusto waxii ay ka wada hadleen, balse, socodkiisi iyo timihiisi afrada ahaa ee aad moodaysay in xinne (cillaan) gaduudan la mariyay baa weli iga hor muuqda. Ayaamo ka dib waxaa aabbahay loo keenay qorigii walaalkay jeeniqaarnaa subaxdii iigu dambaysay. Keliya aabbahay qoriga looma keenine waxaa ayagana qoryihii wiilashoodi oo dhiig leh loo keenay labo adeerraday ah. Dhimashadii walaalkay Cabdicasiis iyo ilmo adeerraday ma ahayn xubnihii ugu horreeyay iyo kuwii ugu dambeeyay ee qoyskeenna ee ay galaafatay colaaddii durbaankeeda shaydaanku tumay. Abtiyaal, awoowayaal adeeryaal, ilmo adeerro iyo sokeeye kale oo badanba waan ku waayay colaaddaas.

Ilaa maanta ma garan karo micnaha ay dadkaasi ku dhinteen iyo waxa kuwii dilay ka dheefeen; iyo waxa ay ayaga iyo kuwii dilay ku dagaallamayeen.
Waxa aan xusuustaa hooyaday oo marka ay guriga naga ga tagayso nagu la dardaaranta in haddii rag hubaysan noo yimaadaan oo qabiilkeenna na warsadaan in aan u sheeganno qabiil kale oo aan gadaal ka ogaaday in ay ahaayeen qabiil aan ayagu markaas ku jirin dirirhii qabiillada ee Mudug ka oognaa.

Mudug waxa ay noqotay gego colaadeed oo la isku riiqmay. Waxa aan ku garaadsaday ayada oo isku dhufashadii qabiillada ee Filla Soomaaliya falkinaysay tan iyo dhammaadkii 1970aadkii - si xukunka loo sii cimridheeraysto - isu rogtay dirir-qabiileed umulo-doox ah. Dagaallada sokeeye waxa ay si toos ah dalka uga bilowdeen 1988dii,  dib markii jabhaddii Dhaqdhaqaaqa Waddaniga Soomaaliyeed (SNM) guluf saddexgeesood ku qaadeen gobollada waqooyi, taliskii ciidanka ee dalka haystayna uga jawaabay si axmaqnimo ah asaga oo si aan kalasooc lahayn u xasuuqay kumannaan shacab ah, tobannaan kun oo kale na qixiyay. Si arxan la'aan iyo

cadownimo ah ayaa talisku hub culus ugu garaacay magaalooyinkii waawaynaa ee waqooyiga dalka. Waxa uu diyaarado ku duqeeyay bartamaha Hargeysa ee dadka shacabka ah degganaayeen. Jarriimooyinkii taliskaasi u gaystay shacabkii reer waqooyigu waxa ay noqdeen seeftii qudha looga goyn lahaa taliska oo uu gacantiisa ku sii soofaystay.

Maalmihii koowaad ee bishii Janaayo 1991dii waxaa caasimaddii Muqdisho soo galay xoogagggii jabhadaha, wax ka yar dhawr iyo labaatan maalmoodna waxa ay soo afjareen cimrigii taliskii millatariga ee dalka xukumayay in ka badan labaatan sannadood. Wax ku bilowday dagaal u dhexeeyay xukuumad kelitalis ah iyo xoogag mucaarad ah oo aad u kala daadsan baa isu beddalay dagaal-qabiileed aad u foolxun. Soomaalidu waxa ay si garaad xumo ah isugu adeegsadeen hub culus oo tirabeel ahaa, kaas oo Midowgii Soofiyeeti iyo Maraykanku ku soo daldaleen Soomaaliya sannadihii 1970yadii iyo bilowgii 1980yadii. Ku dhawaad toban sannadood ka hor afgambigii Maxamed Siyaad Barre xukunka ku yimid, Soomaaliya waxa ay ahayd dalka keliya ee dimoqraaddi

ah qaaradda Afrika oo dhan. Soomaaliya waxa ay soo saartay madaxweynihii ugu horreeyay ee Afrikaan ah oo xukunka ka dega ka dib markii doorashado laga ga adkaaday xukunkana ku wareejiya madaxweyne kale. Awoodda xukunku waxa ay u kala qaybsanayd saddexda laamood ee haykalka dawladnimada: Baarlamaan, Fulin iyo Garsoor. Balse, waxaas oo dhani waxa ay huleleen markii ciidankii xooggu afgambiyay xukuumaddii dadweynuhu soo doortay Soomaaliya na ay gacanta u gashay xukun kelitalis ah oo gacan bir ah ku maamulayay ilaa Janaayo 1991dii markaas oo ay afka ciidda u dareen jabhado kala daadsan oo aan dhishibiliin lahayn una diyaarsanayn in ay dal xukumaan, kuwaas oo ayagu hubkii ay kelitaliska ku ridayeen iskula guryanoqday dalkiina gobollo iyo magaalo-magaalo u kala ootay.

Reer walba waxa uu foodda daray reerkii deriska la ahaa. Jabhad walbaa waxa ay u xusulduubtay sidii uu ay Filla Soomaaliya ku geli lahayd ka dib na sidii Siyaad Barre loogu mashxaradi lahaa, mid walba oo hhoggaamiyy jabhadna waxa u muuqday hummaag asaga oo tabtii Siyaad Barre loogu sujuudayo, waase malahahabawsanaayeen.

Soomaaliya oo sidaas u taal baan ku garaadsaday. Waxa aan garaadsaday ayada oo ay bislaadeen mirahaas qadhaadh ee hogggaamiyayaashii Soomaalidu u abuureen jiilkii aan ka midka ahaa. Waxa aan indhaha kala qaaday ayada oo qoyskeennu ku jiro geeddiga qax ay ka soo bilaabeen waqooyiga Mudug kaas oo lagu furay bariga Mudug iyo xeebaha badwaynta Hindiya. Dhimashada, dhaawaca iyo baroortuna guri walba saldhigatay. Macluusha iyo gaajaduna dad iyo duunyaba cuskadeen.

Ka hor qarixii dagaallada sokeeye qoyskeennu waxa ay lahaayeen geel labo kadin kor u dhaafay iyo ari dhawr tiro ah. Sida la ii sheegay geelii faraha badnaa ee qoyskeennu lahaa qayb awoowgey Diini Samatar Lugeey baa ka dhaxlay aabbihiis Samatar Lugey oo uu u ahaa yaraanka afar rag ahaa oo uu dunida uga tagay, qaybta kalena Diini qudhiisa ayaa tabcaday.
Sooyaalka inta la ogyahayba qoyskeennu geelley aad u geel jecel oo Mudug geeloodu caan ka yahay buu ahaa, waxaana la sheegaa in geela qoyskeennu ahaa midkii ay ka kacday colaad dabadheeraatay oo dhammaadkii

qarnigii 19aad Mudug ka qaraxday. Markaanse geelii qoyskeenna waxaa lagu qaaday (dhacay) colaad ka bilaabatay dilka ina adeerkay Caabbi Dibbood Diini. Mooradduuggii geelu geeri kale, iyo murugo iyo ciil bay aabbahay ku noqdeen waxa ayna dani badday in uu u dalaabo Hobyo oo mucaawino lagu qaybinayay uu saf u galo. Waxa ayna ahayd markii ugu horraysay ee aabbahay gacanhoorsado oo galley iyo saliid caddeey Kalifoorniya laga keenay uu saf u galo. Waa sawir fool xun, niyadjab iyo murugo tusaale u ahaa balada iyo baaska dagaallada sokeeye dhaxalsiiyeen dadkii Soomaaliyeed. Laakiin xaaladda aabbahay ku sugnaa maalintaas iqarso ayay ahayd marka la barbardhigo middii ay ku sugnaayeen dadkii beeraleyda ahaa ee koofurta dalka ku noolaa kuwaas oo markii beerahoodi baaba'een tarabtarab macluul ugu dhammaaday, waayo, ayagu ma ay lahayn xoolo markii ay habeenno dibjiraan neef qashaan. Waxa aan xusuustaa ayada oo hooyaday neef qasho ka dib na toddobaad dhan lafihii neefkas habeen walba biyo lagu karkariyo dabadeedna biyahaas kulul hooyo na siiso.

Mucaawinadii Hobyo laga soo dajiyay ee aabbe u dalaabay waxa ay noqotay mid lagu diirsaday oo

kumannaan iyo kumannaan Soomaali ah oo god qarka u saarnaa badbaadisay. Waxa ay qayb ka ahayd gurmadkii adduunwaynuhu dadka Soomaaliyeed u fidiyay markii uu shaashadaha warbaahinta ka arkay muqaalladii argagaxa lahaa. Waa gurmadkii loogu magacdaray Hawlgalkii Rejo Soo Celinta ee dawladda Maraykanka iyo Qaramada Midoobay garwadeenka ka ahaayeen.

Mucaawinadii dunida ka timid iyo heshiiskii loogu magacdaray *"Wixii Dhacay Heedhe Dhace"* [21] ee sannadkii 1993 ay wadagaareen Jenaraal Maxamed Faarax Caydiid iyo Kornayl Cabdullaahi Yuusuf Axmed ee magaalada Gaalkacyo dib loogu wadadegay waxa ay hoos u dhigeen colaaddii iyo macluushii Mudug ka oognayd. Waxa kale oo da'ay roobab reer miyigu kaga doogeen waxyeelladii dagaallada iyo macluushii baahsanayd. Balse marnaba si toos ah uma ay istaagin

---

[21] Xigasho: ilo kala duwan, sida waraysiyo iyo qormooyin lagu faafiyay mareegaha Soomaalida sida tan lixgaxan: http://hayenews.com/maxaad-ka-taqaan-galkacyo-iyo-heshiiskii-wixii-dhacay-heedhe-dhece-ee-1993/. Accessed on May 15, 2022.

dagaalladii qabiillada u dhaxeeyay ee waxaa sii socday dagaallo teelteeel ah iyo dooxato ilaa maanta miyiga Mudug ka socdaan.

## DUGSI QUR'AANKII

Markii dirirtii Mudug ka oognayd gabaabsi noqotay, macluushiina dhammaatay baa aabbahay Eebbe ha u naxariistee aniga iyo labo wiil oo walaalahay ah, mid iga wayn iyo mid iga yar, nagu daray dugsi Qur’aan oo sannad un ka hor uu amaamuday macallinkayga Muxyiddiin Axmed Cilmi (Shiikh Muxyiddiin Garre) Eebbe ha barakeeyee. Inta aan dugsiga Qur’aanka la igu darin shaqadaydu waxa ay ahayd raacista idaha qoyskeenna iyo dhaaminta dhaanka. Maadaama geelii qoyskeenna goor hore la dhacay sidaas ayaanan weligay geeljire u noqon.

Go’aankii aabbe dugsiga Qur’aanka igu geeyay waxa uu ahaa mid aan u aayay. Aabbahay iyo hooyaday oo aabbe ku tartarsiisay in uu dugsiga igu daro abaal mug leh ayaan uga hayaa. Eebbe wayne sidii aad iigu hiilliseen aakhiro ha idinkugu hiilliyo abaalkiinana janno iyo berrin san ha ka yeelo. Waxa uu ahaa go'aan iga hayaamiyay dunidii jahliga iyo mugdiga iina bixiyay tii aqoonta iyo iftiinka. Waxa uu ahaa go'aan iga badbaadiyay jid halaag ahaa oo boholo iyo bahallo badnaa. Ma garan karo noloshaydu sida ay u ekaan lahayd haddii aan waalidkay dugsiga Qur’aanka igu dari lahayn, waxse aan qiyaasayaa in aan ka mid noqon lahaa tobannaanka kun ee ila ayniga ahaa ee noqday *Maliibaanayaasha lagu liibaanay* [22] ee hoggaamiye-kooxeedyadu xaabada ka dhigteen.

Foog hore, markii xoolihii dhacanta laga rogay baa aabbahay aniga iyo walaalahay oo uu mid walbaa u shakaalan yahay loox inoo horkacay waab ka dhakoola

[22] Qabqablayaashii dagaalka iyo jeebwayntii Muqdisho waxaa caado u ahayd in ay magaalada ku wataan Cabdibilayaal iyo Qooqanno (Toyota Hilux) muukayfyo (air conditioner) leh halka dusha sare ee baabuurka ay saaran yihiin dhallinyaro qoryo jeeniqaaran oo aan mushaar qaadan sidaa oo kale na aan lahayn gabbaad ay roobka iyo qorraxda ka galaan. Dhallintaas bay reer Muqdisho u bixeen *Maliibaanayaasha lagu liibaanay.*

meel aqalkeenna u jirta wax aan hal kiilo mitir dhammayn. Waxa aan u tagnay nin haybadi ka muuqato, wejigiisuna iftiimayo oo ay ku meegaaran yihiin kontameeyo wiil oo isugu jira kuwa iga wayn, kuwo ila fil ah iyo kuwo iga yar oo mid walba loox dhabta u saaran yahay, sawaxanka iyo qalaadkoodana laga soo maqlayo boqollaal mitir. Ardaydu waxa ay isugu jiraan kuwa far iyo higgaad bartay oo macallinku aayadaha dusha uga yeerinayo iyo kuwa aan weli higgaad baran oo alifkii baranaya. Waxba kama sheegi karo dareenka walaalahay ee subaxaas, balse aniga baqdin iyo farxad isku lammaan baa laabtayda ku lagdamayay. Horay baan u maqlay in ardayda dugsileyda ah macallinku dhangadeeyo, waana sababta aan bawdyaha uga jaraynayay, inkasta oo aan ku dedaalay in aan aabbe iga dareemin baqdinta, waxase aan ku farsaxsanaa in aanan mar dambe dhaan dhaammin doonin, awrta qoyskana soo hoyn doonin idahana bananka cawska badan ee geed la'aanta ah ku raaci doonin. Sidii caadadu ahayd markii aabbe magacyadeenna macallinkii baray, annaguna aan magacii macallinka barannay ayuu aabbe inta uu macallinkii ku yiri "*ludkooda adigaa leh lafahoodana aniga"* iska dhaqaaqay. Markii aan arkay in

aabbe jaqaafsaday ayaa baqdin tii hore ka badani igu soo kedisay, niyaddana waxa aan dhawr goor iska iri “tolow ma carartaa oo aabbe ma ka dabatagtaa.”

Isla subaxdaasba waxaa Macallin Muxyiddiin looxii iigu xarriiqay dhawr xaraf oo “Alifku ugu horreeyo,” ilaa “Shiin" kor ku saddexle in uu ii xarriiqay baan u malaynayaa. Barashada alifka waxaa laga ga danleeyahay in aad xifdisid qoraalka iyo dhawaqa xarfaha Af Carbeedka ee Qur’aanku ku qoran yahay. Dib baan ka ogaaday in alif-ba’du Qur’aanka ka mid ahayn ee ay tahay hannaan uu Soomaalida aan Af Carbeedka aqoon u dejiyay Shiikh Yuusuf Al-Kawnayn (Aw Barqadle). Alla muxuu indheergarad ahaa!

Muddo gaaban baan dhigaalkii iyo dhawaqii xarfaha Af Carbeedka ku xifdiyay, dabadeedna waxaa ii bilaabmay hawshii rasmiga ahayd ee aan Alifbeetada Carabiga u bartay. Suuratu Qul Acuudu bi-Rabbi Naas (Suuratu an-Naas) ayay iiga bilaabatay tijaabada farbarashadii aan alifka ku soo bartay. Mahad Eebbe, subaxdii afraad Suuratu Naas ka dib waxa aan si xarrago leh u yeersaday

oo u qoray Suuratu Tabbad (Lahab) ayada oo aan macallin iyo kabiir midkoodna i caawin. Subaxaas ka dibna gadaal ma aanan fiirin ilaa sannad ka dib aan qalinka ku duljabiyay: *Laa yukallifullaahu nafsan illaa wuscahaa*[23]… ilaa dhammaadka aayadda

Inkasta oo subaxii aabbe dugsiga ikeenay aan baqdin bawdyaha ka jaraynayay, haddana sannadkaas aan qur’aanka baranayay labo jeer oo keliya ayaa Macallin Muxyiddiin oogadayda dhanged ku dhuftay, labadaas jeerna sababtu ma ahayn Qur’aan aan ka bixiwaayay ee waxa ay ahayd mar aayad macallinku gefay oo si khalad ah iigu yeeriyay ka dib na aan ku iri “macallin adiga ayaa aayadda gefay." Weligaa macallinkaaga ha ku oran waad qaldantay. Marka kalena waxa ay ahayd mar aan is dagaalnay arday dhib badnaa. Faanba ha iga ahaatee, waxa aan ahaa mid ka mid ah ardayda kuwa ugu fahmo badan weligayna cashar kama soo bixi waayin. Inkasta oo aan ka mid ahaa ardaydii ugu dambaysay ee dugsiga

[23] Aayadda ugu dambaysa Suuratu Baqara.

timid, haddana labo arday oo sannad ku dhawaad dugsiga iiga soo horreeyay, midkoodna uu horay Qur'aanka u soo dhigtay oo meel fiican uga gaaray, kan kale na faro ciddiyo leh iiga baxsaday baa Qur'aanka iga hor dhammeeyay. Sida caadada u ahayd ardayda looxa Qur'aanka ku dhigata, ardaygu Qur'aanka waa uu yeersan jiray, yacni subaxdii marka aad dugsiga timaaddid waxa aad soo diyaarsanaysaa khaddii aad Qur'aanka ku qoran lahayd (caano iyo dhuxul la isku qasay) iyo qalin aad adigu sakiin ku soo qoratay. Ka dib looxii ayaad ka mayraysaa dhinacii uu ku qornaa qur'aankii aad dorraad subax ku qoratay dorraad galabna aad ka baxday oo macallinku kaa dhagaystay. Dabadeed looxii oo aan waxba ku qornayn ayaad intaad dhabta saaratid khaddiina hortaada dhigatid ayaad macallinka horfariisanaysaa. Dabadeed casharkii aad shalay qaadatay aayaddii ugu dambaysay baad cod dheer oo macallinku maqlayo ku akhrinaysaa, markaas baa macallinku kuu yeerinayaa (asaga oo cod sare ku akhrinaya) aayadda ku xigta tii aad akhrisay ee casharkii shalay u dambaysay. Marka aad aayaddaas qortid ayaad macallinka u yeerinaysaa, haddii aad si sax ah u yeerisay, macallinku aayadda xigta ayuu

kuu yeerinayaa haddii se aad khaladday mar kale ayuu kuugu celinayaa. Mar saddexaad haddaad khaladdid waxa aad filataa waa dhanged (ul). Sidaas baad ku wadaysaa ilaa looxu buuxsamo. Ardayga fahmadda badani far aad u yar yar oo isku dhow ayuu wax ku qoraa si uu aayado badan maalintaas u barto, midkase damiinka ahi farta ayuu balballaariyaa oo kala fogeeyaa si uu aayado kooban maalintaas u qaato. Waxaa kale oo dhici jirtay in ardayga fahmadda badani uu looxa labada dhinac mayro (casharkii dorraad iyo kii shalayba) ka dibna uu labada dhinac ee looxaba hal maalin buuxsado. Sida badan macallinku kitaab ma haysto oo qur'aanka oo dhan dusha ayuu ka yaqaan, macallin Muxyiddiinna waxa uu ahaa nin ku sheeggan aqoonta qur'aanka oo waxa uu awood u lahaa in uu 50 arday oo midba heer qur'aanka ka marayo uu isku mar qur'aanka u yeeriyo asaga oo aan kitaab haysan. Marka yeerisku dhammaado ardaydu waxa ay bilaabi jireen in ay kor u akhriyaan aayadihii ay looxa ku qorteen, si macallinku maqlayo ilaa lix saac oo maalinnimo (12ka duhurnimo) laga gaaro. Ka dib guryaha ayaa la kala aadaa. Dabadeed salaadda casir ka hor ayaa dugsiga lagu soo noqdaa, akhriskiina dib loo bilaabaa. Dabadeed mid mid

ayaa macallinka loo dulistaagaa oo inta looxa dhinaca casharkii saaka ku qornaa dhanka macallinka loo jeediyo ayaa qur'aanka laga baxaa, arday walbana waxaa qasab ku ahayd in uu casharka gef la'aan ka baxo, haddii kale dhangeddii ayaa sugaysa. Marka ardaydu casharrada ka wada baxaan ayaa subac ilaa maqribkii soconaya la bilaabi jiray. Subaca caadi ahaan waxaa laga bilaabi jiray juska ugu hooseeya (Jus Camma) Qur'aanka arday walbana waxa uu kaga hari jiray halka uu marayo. Tusaale ahaan: haddii aad juska 5aad maraysid, subaca waa aad ka haraysaa marka uu juska 5aad dhaafo. Subacu waxa uu ahaa hannaanka ardaydu Qur'aanka ku xifdiyaan. Ardaydu qaybaha Qur'aanka ee ay soo dhaafeen kitaab ayay ka muraajacayn jireen, balse ardayda badankoodu kitaabbo ma haysan ee kuwa haysta ayay ka ammaahan jireen.

Markii aan dhawrka jus ee Qur'aanka ugu horreeya dhammeeyay ayaan aabbe ka codsaday in loox wayn oo ballac wayn ii soo gado, waayo waxa aan dareemay in looxii aan dugsiga ku bilaabay igu yar yahay, markaas ayaa aabbe loox wayn oo iga dheer ii soo iibiyay. Ma

garanayo in sababtu ahayd cabsi aan macallinka ka cabsanayo iyo inkale e, waxa aan ahaa arday fahmadiisa iyo xifdigiisu dugsiga oo dhan ka tilmaaman yihiin. Ciyaarta iyo hadalbadnida ardayda inta uusan macallinku imaan subaxdii iyo galabkiiba anigu qayb kama ahaan jirin, inta badan akhris ayaan ku foognaan jiray, taasi na waxa aan filayaa in ay sababtay in aanan cashar iyo subac midkoodna gefi jirin. Inkasta oo dugsiga goor dambe la igu daray, haddana muddo yar ka dib waxa aan ahaa ninka ardayda oo dhan ugu sarreeya, marka laga reebo labadii aan kor ku soo sheegay. Taasina waxa ay dhalisay in waalidkay iyo macallinku go'aansadaan in xirsi (qardhaas) la ii jaro oo qoorta la ii suro, si isha iyo xasadka la iiga xijaabo. Xirsigu waa warqad aayado qur’aan ah iyo ducooyin lagu qoro ka dibna inta qaab afar gees (square) loo laalaabo ayaa cad yar oo boorso ama dalow laga soo gooyay oo biyaha iska caabbin kara (water resistant) dusha looga dahaaraa oo lagu tolaa. Dabadeedna xarig yar oo dhagaati ah ayaa intii laba gees laga suro qofka qoorta loo geliyaa. Laakiin, anigu waan diiday in qoorta la ii suro aniga oo ka shiixaya in ardaydu igu caydo, waxa aanan doortay in suunka aan dhexda ku xirto la iigu tolo. Sidaas

ayaa aabbe sameeyay oo suunka ayuu iigu tolay. Beri dambe ayaan go'aansaday in aan xirsiga furfuro oo akhriyo waxa ku qoran. Dabadeed inta aan suunkii ka gooyay oo dahaarkii ka fiiqay baa aan warqaddii kalafidiyay oo akhriyay waxii ku qornaa. Waxa aan ka xusuustaa in ay ku qornaayen Aayatu Kursi, Qulhuwalle iyo ducooyin aanan hadda xusuusan. Ka dib inta aan warqaddii jeexjeexay baan hooyo iyo aabbe been u sheegay oo ku iri “xirsigii waa iga lumay.”

Fahmo badnidaydi iyo sidii degdegga ahayd ee aan ku noqday horaadka dugsigu, waxa ay ii noqotay mid aan tixgalin wayn uga helay waalidkay iyo macallinkaygiba. Mar walba oo jus Qur'aanka ka mid ah dhammeeyo farxad iyo raalli ahaansho ayaa aan wajiyada waalidkay ka dareemi jiray, waxa ayna iila hadli jireen iilana dhaqmi jireen sidii in aan nin wayn ahay oo kale. Sidaa oo kale marka aan jus dhammeeyaba aabbe shaah iyo caano ayuu ardayda u keeni jiray, mark aan subac (afar jus) dhammeeyana neef ama labo ayuu soo qali jiray oo ardayda, macallinka iyo odayaasha qoysaska dugsileyda ah maalintaas waa la hilbayn jiray. Caado ayay ahayd in

waalidku xoolo soo qalo marka cunuggiisu subac Qur'aanka ka mid ah dhammeeyo. Marka ardaydgu qur'aanka dhammeeyana qaalin geel ah oo aan curan ayaa macallinka la siin jiray.

## SHIRQOOLIDDII MACALLINKA

Inkasta oo dhangedayntu ahayd hab Macallin Muxyiddiin ardayda ku tarbiyeeyo ugana dhigo kuwa dhishibiliin leh, haddana runtii ma uusan ahayn axmaq xanaaq badan oo naxariis la'aan ardayda u garaaca, sabab la'aanna ardayda uma uusan dili jirin, haddii uu dhangedeeyana nabar muuqda iyo mid halis ah midna ku ma uu dhufan jirin. Dhangedayntana kuma badin jirin ee mar ama labo mar un buu ku dhufan jiray.

Macallin Muxyiddiin ma ahayn sida badanka macallimiinta dugsiyada Qur'aanka Soomaalida ee arxan la'aanta iyo garashaxumadu isugu darmeen ee sida bahalnimada ah ubadka u dila dhaawacyada culusna gaarsiiya, mid jireed iyo mid maskaxeedba.

Macallin Muxyiddiin waxa uu ahaa mas'uul garasho iyo edab isku darsaday ardaydana aan ku xadgudbin, balse sida ubadkiisa u ilaaliya. Waxa uu ahaa macallin aqoon

baahsan u leh Qur'aanka iyo aqoonta kale ee Islaamkaba. Aqoontiisa Qur'aanku waxa ay ahayd mid la majeerto, ilaa haddana waan la yaabaa marka aan xasuusto sidii uu 50 arday oo Qur'aanka meelo kala duwan ka jooga uu Qur'aanka ugu yeerin jiray, asaga oo aan hal marna gefin. Aqoontii Macallin Muxyiddiin waxa aan tebay markii uu xanuunsaday ee Muqdisho loo qaaday dugsigiina Siihaye looga dhigay Macallin Bashiir Salaad. Bashiir waxa uu ahaa nin aan Qur'aanka aqoon oo marka ardaydu subcinayso kitaab ayuu soo qaadan jiray. Waxa kale oo uu ahaa nin dhirif badan oo aad u dulqaad yar ardaydana bilaa sabab u dhangedeeya. Waxa kale oo uu ahaa nin aan kala aqoon ardayga edabta leh iyo kan edabta daran; siduu u joogo ayuu inta soo istaago ardayda ul saf kala mari jiray, mid fahmo badan iyo mid fahmo daran, mid edab leh iyo mid edab daran, mid gefay iyo mid aan gefin ma uusan kala saari jiray. Waxa uu ahaa macallin aysan ardaydu jeclayn. Taasina dib ayay ka caddaatay markii koox ardayda ka mid ahi abaabuleen qorshe ay ku garaacayaan (dilayaan) Macallin Bashiir.

Koox arday ah oo ay hoggaaminayeen Ciid Dhagaf Shidane, Xiddig Saciid Aadan, Maxamed-Sahal Saciid

Salaad iyo kuwa kale ayaa abaabulay hawlgal ay Macallin Bashiir oo ay gefaf badan ka tirsanayeen uga aargudanayaan, waxa ayna qorshohooda ku aadiyeen galab subac loo ballansanaa. Hawlgalka Macallin Bashiir lala beegsanayo waxaa loo qorsheeyay sidan: Galabta hawlgalka la fulinayo nin walbaa waxa uu la imaanayaa ul adag oo si fiican loo soo qoray. Dabadeed nin walbaa waxa uu calaamadsanayaa booskii uu fariisan lahaa, marka subaca la bilaabayo ka dibna inta uu ciidda faagfaago ayuu ku xabaalayaa ushii Macallin Bashiir lagu edbin laha. Tani waa sahlanayd, waayo macallinku hal boos un buu fariisan jiray ardayduna asaga ayay si saf ah uga soo horjeesan jireen. Markii ay intaas qorsheeyeen ayay iswaydiiyeen “haddaba sidee ku helaynaa marmarsiinyo aan macallinka ku ulaynno?” Markii ay talo rogrogeen waxaa u soo baxday in sida ugu fiicani tahay in galabtaas ciyaar iyo or dugsiga laga oogo, si marka macallinku yimaado uu u xanaaqo marka uu arko waxa lagu dhiiqsaday. Dabadeed labo ayay mid noqon: in uu yiraahdo “soo duubta” ama in uu yiraahdo “subac u soo fariista” maadaama uu ogyahay in galabta oo dhan la ciyaarayay oo aan juskii lagu subcin lahaa la akhrin.

Labada xaaladoodba waa loo sii diyaargaroobay oo haddii la duubto oo dhangedayn loo diyaargaroobo nin walba waa yaqaan halka dhamastiisi ku xabaalan tahay, haddii subac la aadana waa la mid. Intaas ka dib waxaa la go'aamiyay in marka si saf ah loo fariisto uu nin wal baa dhamastii u xabaalnayd la soo baxo, ka dibna Macallin Bashiir cashar lama illaawaan ah loo dhigo ilaa gurigiisana la eryado haddii uu cararo.

Beryahaasi waxa ay ahaayeen mar aan Qur'aanka dhammeeyay oo dugsiga aan subac iyo naqtiin u tago un, intaasna uma tageen ee hooyo iyo aabbe ayaa sidaas rabay. Xataa niyad, ahaan dugsiga dhan waa aan nacay tan iyo intii Macallin Muxyiddiin Muqdisho daryeelka caafimaad u aaday. Waxa kale oo ay ahayd waqti jiilaal ah oo dhaanka iyo aroorinta xooluhu hawl joogto ah ahaayeen, sidaas darteed waxaa dhici jirtay in aanan maalmo badan dugsiga tagin oo ama dhaan dhaamiyo ama ari arooriyo. Yeelkeed'e, galabta la qorsheeyay in Macallin Bashiir la weeraro maalintii ka horraysay subaxdeedi ayaa aan dugsigii tagay, dabadeed waxa aan maqlay nuxnux hoose iyo wax la qarinayo, ka dib aniga oo aan qofna wax waydiin baa waxaa ii yimid Ciid,

Xiddig, iyo Maxamed-Sahal oo dhammaantood ahaa rag aan aad isugu dhawayn, isku loodna ahayn. Waxa ay ii sheegeen shirqoolka ay Macallin Bashiir u dhigeen. Waxa kale oo ay i waydiiyeen in aan qorshaha kala qaybgalayo iyo inkale. Aniga oo niyadda ku haya in maalinta berri ah oo shirqoolka la fulinayo aan aryaha reeraha aroorinayo oo aanan dugsiga imaan doonin, si dhab ahna aan u rumaysan warka ay ii sheegeen in uu ka dhab yahay iyo inkale ayaa aan ku iri "haa, waan ku jiraa" aniga oo sii raaciyay dhawr eray oo aan Macallin Bashiir wax uga sheegayo. Inkasta oo aanan rumaysan warkood oo aan u qaatay iska riyo ama dheeldheel, haddana runtii doqonnimo ayay ii ahayd in aan shirqoolkaa halista ahaa qayb ka noqdo ama aanba dhayalsado runnimadiisa.

Maalintii xigtay habeenkeedi markii aan guriga imid ayaa qan u imid hooyo oo caro la cartamaysa, aadna u niyadjabsan. Waxa ay rumaysan wayday in aan qorshe macallinka lagu waxyeelaynayo qayb ka noqday, weliba wax ka abaabulay, sida loogu sheegay. Hooyo waxa ay ii sheegtay in galabta macallinkii la dili gaaray oo xataa qori AK47 ah loo soo qaatay. Yaab, naxdin iyo amakaag baa

iga soo haray. Qori aa! Qori aa!  “Haa qori Aake ah ayaa loo cabbaystay,” ayay hooyo igu tiri. “Adiga ayaana wax ka abaabulay shirqoolkaas,” ayay sii dabadhigtay. Murugta iyo niyadjabka ay ka qaadday warkaas foolkeeda ayay ku yaalleen. Runtii hooyo aad bay iigu hanwaynayd, waxa ayna filaysay in marka aan da’deeda gaaro aan noqon doono Shiikh Cabdullaahi Cali Bootaan (Macallin Muxyiddiin Shiikhiisa) oo kale ama ugu yaraan noqon doono macallin dugsi Qur’aan dhiga. Balse, warka ay galabta maqashay ee ah in aan wax ka abaabulay waxyeellaynta macallinkaygu ma ahayn mid ay marnaba iga filaysay. Yeelkeed’e, waxa aan haystay hal qodob oo aan ku xoojin karayay dooddaydi ahayd in aanan waxba ka ogayn waxna ka abaabulin weerarka Macallin Bashiir; qodobkaas oo ah in aanan weligay ku kicin falfalxumo iyo edabdarro iskaba dhaaf in aan macallin shirqoolo’e. Hooyo, aabbe iyo macallimiintuba waa ii qirsanaayeen in aan ahaa nin uruursan oo afkiisa iyo addinkiisa laga nabadgalo, weligiisna aan qayb ka noqon falfalxumada iyo maqaafaadnimada ciyaalka ardada ahi ku kacaan. Maadaama hooyo taas ogayd ima aysan beensan imana aysan rumaysan markii aan ikiray abaabul iska dhaaf’e in

aanan maqal warna ka hayn balaayada dugsiga laga sheegay. Waxa aan hooyo ka dareemay in ay haysato xujo ay islaamaha kale ugu sheegi karto in aan wiilkeedu ka mid ahayn ardayda habaarqabayaasha ah ee Macallinka sigay. Waan ku qasbanaa in aan inkiro in aanan qorshaha macallinka lagu shirqoolayo maqal, waayo haddii aan oran lahaa abaabulka wax kama ogayn laakiin waa la ii sheegay in macallinka la weerari doono dambile ayaa aan noqon lahaa, aan waxba ka duwanayn kuwa shirqoolka abaabulay. Sidaas darteed waan ku adkaystay in aanan war iyo wacaal u ahayn falkaas shaydaan. Markii aan hooyo ka dhaadhiciyay in aanan ku jirin kooxda dambilayaasha ah, ayaa aan hooyo waydiiyay waxa ka dhacay dugsiga, balse si faahfaahsan iiguma sheegin sidii wax u dhaceen.

Aroortii ayaa aan dugsigii ku jarmaaday aniga oo u dheraraya ogaanshaha waxii shalay galab dhacay. Subaxaas saddexdii nin ee saaxiibbaday ahaa midkoona ma imaan, dib dambena uma aysan imaan dugsiga ilaa Macallin Muxyiddiin Muqdisho ka soo noqday. Yeelkeed’e, waxaa la ii sheegay sidii wax u dhaceen iyo

hawlgalkii si foolxun u fashilmay uuna fashiliyay walaalkay Cabdifitaax oo ahaa ninkii ugu yaraa saddexdeenni hal subax aabbe dugsiga geeyay.

Sidee ayuu u fashiliyay? Abaabulayaashu waxa ay iskudubbarideen qorshe halis ah oo aad u tifaftiran sidii aan horay u soo sheegay, laakiin waa ay ka badbadiyeen oo ciyaartii iyo is eryadkii waxa ay wadeen illaa macallinku dugsiga yimid. Waxa ay ka sii dareen, markii ay u jeedeen macallinkii oo soo socda ayay ciyaartii sii xoojiyeen oo ayaga oo labo-labo isku eryanaya dhankii macallinku ka soo socday isku cayrsadeen, taasina macallinkii ayay shaki wayn ku abuurtay. Asaga oo yaabban ayuu inta ardaydii isha la raacay ku yiri “galabta maxaa jira?” “Wax waaba jiraan’e, runta ma ii sheegayaa mise shaqo ayaa aan idinka qabtaa?” ayuu sii raaciyay. Halkaas macallinku gool ayuu uga dhaliyay abaabulayaashii shirqoolka, waayo waxa uu cabsi ku abuuray kuwii usha aad uga cabsan jiray, isla markaana waa uu u carrab laalaadiyay oo waxa uu ka shanqariyay in uu cafin doono ninkii runta u sheega. Intaas kuma uusan harin’e, asaga oo aan weli fariisan nuu inta ardaydii eegay kala soo baxay ninkii uu is lahaa waxa uu samaynayaa

wax walba oo uu dhangedda kaga badbaadi karo. Ninkaasi waa Cabdifitaax Maxamed Diini. Cabdifitaax markii loo duubay ayaa labo la kala dooransiiyay: in uu runta sheego oo macallinka u kala dhigdhigo waxa galabta dugsiga ka qaldan, una sheego ragga soo abaabulay, iyo in uu u diyaargaroobo dhanged xanuun badan oo aan shaati iyo funaanad midkoodna ka xigsanayn. Cabdifitaax si halhaleel ah ayuu macallinkii ugu sheegay qorshihii lagu dili lahaa, iyo ragga soo dharaandhiriyay. Waxa uu u sheegay in dhulka oo dhani dhamso ku miinaysan yahay, ardayduna u diyaargaroobeen in ay galabta macallinka washamsi ku qaadaan. Macallin Bashiir oo yaabay ayaa yiri “bal indhaduubka iska fur oo i tus halka uluhu ku xabaalan yihiin. Dabadeed inta oo ciidda qufay ayuu mid mid u doo faagay uluhii loo aasay in macallinka gacanta kulul lagu edbiyo. Marka waxaasi dhacayaan raggii qorshaha soo maleegay halkaas bay soo kuudkuudaan, balse far iyo suul bay ku taagan yihiin oo in ay baxsadaan bay rabaan haddii macallinku xaggooda u soo dhaqaaqo. Laakiin Macallin Bashiir macagagnimadii iyo talaxumadii lagu yaqiin buu markiiba u dhurtay; ardaydii ayuu ku amray in ay ku qamaamaan oo qabqabtaan raggii

shirqoolku ka fashilmay, ayaguna awalba far iyo suul bay ku taagnaayeen waa carareen, markii ay warkii macallinka maqleen, markaas baa ardaydii iyo macallinkiiba eryadeen. Saddexdii shirqoole, Ciid, Xiddig iyo Maxamed-Sahal siday u cararayeen bay galeen guri uu lahaa Maxamed-Sahal walaalkiis ka dib na waxa ay la soo baxeen qori AK47 ah oo guriga yaallay.

Macallin Bashiir iyo colkiisi markii ay arkeen raggii oo qori gacanta ku dhigay dabada ayay jeediyeen oo halkii waabkii dugsigu ka xigay bay u yaaceen. Nasiib wanaag saddexdii eedaysane ma aysan eryan xabbadna ma ridin ee halkii ayaa nin walbaa reerkoodi aaday qorigiina halkiisi ayay ku celiyeen. U malayn maayo in ay xataa yaqaanneen sida qori loo rido, inkasta oo 13 jir Mudug jooga wax walba laga filan karo.

## INKAARTII WADAADDADA

Waxa uu ahaa gu' barwaaqo ah, qoyskeennuna waxa uu yaallay meel aan ka fogayn tuulada Bitaale oo qiyaastii 50km dhan bari Gaalkacyo uga beegan. Hooyo Muqdisho ayay ku maqnayd, aabbena Gaalkacyo ayuu safar ugu maqnaa. Waxa reerka joogay aniga iyo afar walaalahay ah oo iga yaryar oo ay ugu wayn tahay da'dii igu xigtay Faadumo iyo saddex wiil, Axmed, Iidle iyo Jimcaale.

Inkasta oo ay ahayd xilli barwaaqo ah oo caanaha la daadiyo, haddana raashin la'aan ayaan ahayn oo aabbe ayaa Gaalkacyo u aaday in uu magaalada ka soo gado bariis, bur iyo sokor. Goor maqrib ah oo arigii soo hoyday maqashiina riyihii qoosha looga furay ayaa waxaa dhanka Bitaale ka soo baxay nin oday ah oo matoobbo cuskanaya. Salaan iyo nabdayn dabadeed, waxa aan darin u dhigay geed jeerin ah oo guriga dhabarkiisa ku yaallay, biyo weeso ahna waan u geeyay. Ka dib inta aan guriga ku noqday baan walaashay Faadumo waydiiyay bal in wax

sokor ahi hareen, ayaduna waxa ay ii sheegtay in ay taallo wax hal mar dabka la saaro.

Sokortii yarayd baan shaah uga karinnay odaygii noo soo martiyay, dabadeedna waxa aan ka fekeray wixii aan odayga ku soori lahayn, maadaama uusan badar oollin. Ugu dambayn markii aan Faadumo la tashaday waxa aan go'aansannay in aan wan yar oo baraar ah birta saarno. Inta aan idihii dhex tagay oo indhaha la raacraacay baan soo qabtay baraar shilis ah ka dib na inta aan legday oo qiblada u jeediyay baan gawracay. Inkasta oo aan horay neef u bireeyay, haddana habeenkaasi waxa uu ahaa markii ugu horraysay oo aan neef qalo: intaan haragga ka bixiyo ka dib na jarjaro. Hal saac ka dib waxa aan odaygii u geeyay xeero (baaquli) hilbo ka buuxaan iyo dhiil caano ah. Caadiyan haddii neef la qalayo iyo haddii kale waa awood aabbe iyo hooyo gaar u lahaayeen horayna uma dhicin ayaga oo aan ogayn in aan neef ariga ka mid ah qalno taas oo welwel igu haysay aniga oo ka welwelayay marka aan aabbe u sheegno in aan nin marti ah neef u qalnay. Inkasta oo in martida si wanaagsan loo sooro ay ahayd dhaqan soo jireen ah oo si wayn loo ilaaliyo

loogana taxaddaro haddana ma garan karin waxa aabbe oran doono marka uu arinta ogaado.

Ninkii odayga ahaa ee aan wanka u qalay aroor hore xilli aynaan weli hurdada ka toosin buu jarmaaday oo socdaalkiisi sii watay. Ninka odayga ah asagu waa uu na gartay, balse annagu ma aynaan aqoon. Socdaalkiisu waxa uu ku wajahnaaa Gaalkacyo, markii uu magaalada tagayna waxa uu la kulmay aabbe oo uu u sheegay waxii uu nagala kulmay. Aabbahay markii magaalada ka soo laabtay baan kula kulmay Bitaale oo aan dhaan u dhaamiyay dabadeedna aniga oo aan arrintii u sheegin buu asaga oo foolkiisa farxadi ka muuqato igu yiri “weligay waan ku ogaa in aad waxgarad tahay oo aad asaaggaa wax dheer tahay. Ninkii aad wanka u qashay baa magaalada iigu yimid oo ii sheegay sidii wanaagsanayd ee aad u soortay. Laakiin maxaad wadaaddadana u wanaajin wayday? Ayuu ii sii raaciyay. Arrinta wadaadada gadaal baan ku sheegi doonaaye, intaa markii aabbe igu yiri ayaa neefi iga fuqday waxa aanan dareemay in aan hadda ahay nin wayn oo talada qoyska go’aan ka gaari kara aniga oo aan waalidka ka baqayn.

Waxaa arrintan odagaasi i xusuusisay qiyaastii sannad ka hor, habeenka odagkaasi nagu soo hoyanayo, maalin aniga oo dugsiga Qur’aanka ka imid baan guriga ugu imid nin aan ilmo adeer nahay oo guriga hurda. Sida caadada ahayd marka aan dugsiga ka imaado waxa aan imaan jiray hooyo oo qadadii diyaarisay, bariis iyo caano ama bur Yahuud iyo shaah caddays ah, balse maalintaas hooyo ma joogin, ma ogi ma soofkii ariga ayaa la durkay. Markii aan arkay ina adeerkay oo quurinaya ayaan aniguna guriga dhinaca kale ka seexday aniga oo rejaynayay in hooyo imaan doonto. Dabadeed casarkii ayaan hurdadii ka toosay ayada oo ina adeerkay oo hurdadii ka toosay uu guriga hoos-galbeedkiisa fadhiyo. Inta aan salaamay baan dugsigii oo aan ka daahsanaa u degdegay.

Habeenkii markii aan guriga imid baa hooyo si daran i canaanatay ayada oo ka xanaaqsan sababta aan ninka martidada ah qado iska dhaaf’e, xataa shaah ugu karin waayay. Garasho xumadaydi maalintaas iyo canaantii hooyo ee ka dambaysay si daran bay ii taabteen, muddo dheerna mar walba oo aan xusuustana waa aan ka

qoomameeyaa, habeenka aan odayga wanka u qalayna arrintaas hore ayaan niyadda ku hayay.

Habeenkii aan odayga wanka u qalnay habeenkii ku xigay baa isla xilligii oo kale waxaa noo yimid shan nin oo wadaaddo ah oo ayaguna Gaalkacyo u socday. Isla jeerinkii ayaan gogol u dhigay, balse ayaga wan uma qalin, sokor aan shaah ugu kariyana ma oollin oo intii ugu dambaysay shalay galab baan dabka saarnay. Yeelkeede, inta aan labo dhiilood oo caano ah u geeyay baan ugu cudurdaartay in reerka waalidkii ka maqan yihiin raashin iyo sokorna aysan oollin. Balse waxaa la yaab igu noqotay markii wadaaddadii si caro leh iigu yiraahdeen “arigaan dhawrka tiro ah neef noo qal.” Aniguna waxa aan ka welwelsanaa wankii aan odayga u qalay mid kalena ku ma dhiirran karin. Sidaas darteed si cad baan ugu sheegay in aanan amar u qabin gawraca xoolaha. Wadaaddadii ayaga oo xanaaqsan bay inta go’yaashoodi jefjefteen waddada cagta saareen ayaga oo aan caanihii cabbin. Aniguna dhiilihii caanaha ahaa ayaan soo ceshaday.
Maalintii dambe aniga iyo walaashay Faadumo oo ariga la joogna ayaan dhulka ka qaaday wax aanan weligay

horay u arkin. Waa bir kuusan oo korkeeda daxali ka muuqato. Walaashay Faadumo judhii horeba birtaan kuusan cabsi ayay ka qaadday, mar aan u taagayna waa ay ka carartay. Markii aan cabbaar gacanta ku siday baan intaan iskalajiiday birtii kuusnayd ku tuuray meel horteenna ah oo u dhaxaysa annaga iyo dhawr riyood oo ariga ugu sokeeyay. Birtii kuusnayd markii ay dhulka ku dhacday waxa ay samaysay qarax aanan weligay asaga oo kale arkin. Xoogga jugteeda labada dhagood baa i damay oo aan wax ka maqli waayay, sidaa oo kale qiiq madow iyo dhimbilo dab ah ayaa dhawr mitir hawda isku shareeray. Xoogga jugtii dhacday aniga iyo Faadumo dhulka ayaan ku dhacnay. Daqiiqado ka dib waxa aan soo baraarugay Faadumo oo qaylinaysay oo dhahaysa “Alla ba’ayeey riyihii waa baaba’een!” “Adiga wax ma ku gaareen? Adigu ma nabadqabtaa?” ayaan ku iri. Markii ay ii caddaatay in gabadhu nabadqabto ayaan eegay dhankii riyaha mise ceesaan baa dhulka galgalanaysa. Markii aan dultagnay waxa aan aragnay in ceesaanta afartii addinba go’een. Riyihii kale ayaan eegnay, wax dhintay iyo wax addimadu go’een ma jirin. Markii aan arkay ceesaantu in aysan istaag dambe rejo ka qabin baan Faadumo ku iri

“orad guriga ku orad oo meddi ka keen aan ceesaanta biraynee inta aysan baqtin.” Balse Faadumo inta aysan guriga aaddin bay aragtay lugtayda bidix oo dhiig badani ka dareerayo ka dib na qaylo iyo oohin bay isku dartay ayada oo ii sheegaysa in dhiig iga hoorayo. Inkasta oo dhiig badan iga socday haddana wax xanuun ah ma dareemaynin. Faadumo garbsaarkeedi ayay inta kala dillaacisay iiga duubtay jilibkii dhaawacu iga gaaray. Ka dib na inta ay guriga ku orodday bay meddidii keentay dabadeedna ceesaantii ayaan gawrcay. Annaga oo ceesaantii luguhu go’een qalayna ayaa waxaa noo yimid dhawr nin oo adeerraday ku jiraan kuwaas oo jugta qaraxa ka maqlay tuulada Bitaale ka dib na arkay uuradeeda circa ku shareerantay. Markii aan u sheegnay sidii wax u dhaceen waxa ay noo sheegeen in birta kuusani ahayd miinada taangiyada lagu qarxiyo.

Tan iyo berigii dagaallada sokeeyo degaankan ka dhaceen miinooyinka dhulka lagu aasay iyo kuwa bannaanada yaalla waxa ay dileen dad iyo xoolo badan dad badanna lixaadka ayay tireen. Dad baa lugaha iyo gacmaha ku waayay halka kuwo kale ku indhabeeleen. Aniga iyo

walaashay Faadumo aad baan u nasiib badnayn maalintaas.

Aabbe oo Gaalkacyo joogay taar baa loo diray loogu sheegay waxii dhacay asaguna hooyo oo Muqdisho joogtay buu wacay oo u sheegay, ka dib na subaxdii dambe ayuu baabuur soo raacay. Subaxdii dambe ayaa aniga oo jilibka bidix aad ii bararsan yahay oo heetinaya waxa aan dhaan u dhaamiyay Bitaale oo aan aabbe kula kulmay. Markii aabbe iyo raggii tuulada joogay dhaawacayga eegeen waxa ay sheegeen in uusan halis ahayn. Kaniiniyo xanuun bi'iye iyo qallajiye ah bay i siiyeen. Kolkii aan sheegay waxii aniga iyo wadaaddadii na dhexmaray waxaa la aamminay in wadaaddadu i inkaareen. Waxa kale oo aan dib ka ogaaday in wadaaddadaasi ahaayeen rag koofur fog iyo Muqdisho ka yimid oo miyiga xoolo ka uruursan jiray beryo dambena la ogaaday in aysan wadaaddo ahayn ee ay yihiin muqayiliin xoolaha ay reer miyiga ka uruursadaan ku marqaama marka ay Muqdisho iyo koofur ku noqdaan.

Waagii dugsiga la igu darayay, dugsigu waxa uu ahaa mid miyiga ciddu deggan tahay ku yaal oo hadba halkii cidaha dugsileyda ahi u guuraan oo u naqraacaan naa dugsiguna ula naqraaci jiray, balse beri dambe ayaa Macallin Muxyiddiin go'aansaday in dugsigu mid negi noqdo kana haro cidaha hadba meel u naqraacaya.

Macallinku waxa uu go'aankaan gaaray mar uu ka soo noqday Muqdisho oo uu daryeel caafimaad u aaday oo uu muddo dheer ku maqnaa. Markii macallinku Muqdisho ka soo noqday waxa uu la soo noqday mashruuc ballaaran oo uu ugu horreeyay in dugsiga reer guuraaga laga reebo.

## BENDAR QAALI

Qorshaha macallinku Muqdisho kala soo noqday waxaa kow ka ahaa in uu degmo (magaalo yar) dhiso dugsiguna degmadaas saldhigto. Waxa uu degaanka degmada u doortay qarqoor yar (meel godon) oo hal ceel oo biyo dhanaani ka qodan yahay laguna magacaabo Qodaxtoolle. Waa meel konton kiilo mitir dhanka bariga uga beegan Gaalkacyo dhanka koofureedna ka dugaaleysa ceelka qaddiimka ah ee Bitaale kaas oo muddo dheer ahaa matoor-biyood reer miyiga degaankaasi ka cabbi jireen dhismayaal aan tirabadnaynna ku yaallaan.

Ugu horrayn macallinku waxa uu farriimo u kala diray waalidkii iyo ardaydii oo intii uu Muqdisho ku maqnaa kala yaacday ka dib markii Macallin Bashiir hoggaamin waayay. Waxa uuna Macallin Muxyiddiin ka dalbaday waalidkii iyo ardaydiiba in ay Qodaxtoolle iska soo xaadiriyaan. Waalidku amarkii waa qaateen, sidaas

darteed baa aabbe iyo aniga oo wadanna rati uu ku raran yahay raashinkii aan dhawr bilood ku noolaan lahaa Qodaxtoolle iska xaadirinnay. Labadii walaalahay ahaa ee isku subax dugsiga nala ku daray kii waynaa beri hore ayuu Muqdisho aaday oo macallinka ayay Muqdisho isla joogeen, weliba macallinku in uu soo celiyo oo Qodaxtoolle keeno ayuu rabay, balse waa uu ka diiday. Kii yaraana gadaal dambe ayaa asagana aabbe keenay Qodaxtoolle. Waxaa aniga iyo aabbe Qodaxtoolle nimid ayada oo ay sankuneefle ka joogaan labo arday iyo macallinkii. Maalmo ka dib markii ardaydii intii imaan kartay soo uruureen, shaqadii ugu horraysay ee aan qabannay waxa ay ahayd in aan waabno (dhisno) waabkii dugsigu saldhigan lahaa. Geed qurac ah ayaan dhinacyada tiirar ka gelinnay dabadeedna caws iyo nagaar ku dadnay. Dabadeed ardaydii intii saaxiibbo ahiba meel gaar ah bay waab ay ku hoydaan ka waabteen. Aniga iyo labo arday oo aan isku da' ahayn waab yar baan meel gees ah ka dhisannay dabadeedna halkaas baan cuntadii iyo weelashii aan ku karsan lahayn dhigannay. Halkaas baan subaxiina buryahuud inta ku hogaysanno shaah caddays ah ku dejinnaa habeenkiina bariis iyo digir saliid caddeey

lagu iidaamay ku cashaynnaa. Khibraddii aan halkaas ku soo bartay markii aan qurbaha imid bay miciin iyo nanuuro ii noqotay.

Macallinku asagu waxa uu Qodaxtoolle soo dagsaday mid ka mid ah labadiisi reer.
Waxa kale oo aan dhisnay dahar kutubaha aan ku raacanno kaas oo markii dambe masaajid loo rogay. Waxa kale oo aan samaynnay ama falnay beer wayn oo ay ka soo go'aan digirta, galleyda, masaggada iyo qaraha taas oo ka mid ahayd mashruucii uu macallinku Muqdisho kala yimid. Sidaa oo kale barkad baan qodnay maadaama biyo macaan loo baahnaa oo aan biyaha ceelka ee dhanaanka ah lagu noolaan karin. Deeqda Eebbe, markii aan barkaddii farta ka qaadnay baa roob barkaddii noo buuxiyay da'ay. Waxa kale oo aan qodnay ceel hore oo aasmay kaas oo aan ku rakibnay matoor yar oo macallinku deeq uga helay hay'ad samafal.
Markaa uu macallinku Qodaxtoolle saldhiganayo anigu Qur'aanka waan dhammeeyay, keliya waxa aan halkaan u imid Qur’aan nakhtiimin iyo kutubbo raacasho.

Macallin Muxyiddiin intaas kuma ekaan'e, waxa uu keenay nin injineer ah oo dhulka tuulada cabbira ka dib na kala xadeeya. Waxa kale oo uu falay waddo baabuurta tuulada imaanaysaa maraan taas oo uu ka soo leexiyay waddada Gaalkacyo aadda oo tuulada u jirta soddon (30) kiilo mitir. Cagafcagaf uu Gaalkacyo ka soo kireeyay baa waddada fashay. Intaas markii uu sameeyay buu macallinku bilaabay in uu boosaskii tuulada ee injineerku cabbiray u qaybiyo dad guryo ka dhisan kara kuwaas oo isugu jiray ganacsato Gaalkacyo iyo degaanka joogtay, iyo kuwa Muqdisho iyo Nairobi deggan oo deegaanka u dhashay iyo qurbajoogtii degaanka, waxa uuna qof walba u qabtay muddo lix bilood ah in uu dhulka ku dhisto, haddii kale waa laga ceshanayaa oo qof kale oo dhisanaya ayaa la siinayaa. Taasina waxa ay sababtay in muddo gaaban qarqoortii cidlada ahayd ku noqoto magaalo yar oo cammiran, boqollaal guri oo fillooyin ahina ku yaallaan. Intaas kuma uusan hakan’e, Macallin Muxyiddiin waxa uu Qodaxtoolle ka qotomiyay ceel-biyood biyo macaan oo durdur ah asaga oo gacan ka helay hay'ado samafal. Ugu dambayn Macallin Muxyiddiin

waxa uu magaaladii cusbayd ka beddalay magacii hore asaga oo u bixiyay Bendar Qaali.

Bendar Qaali, maanta waa magaalo yar oo cammiran, leh na waddooyin iyo dhismayaal si qurux badan loo naqshadeeyay. Waxa kale oo ay leedahay dugsi hoose-dhexe, isbitaal, farmashi, dhawr dugsi Qur'aan, masaajid, saldhig boliis, iskool boodhin ah oo ubadka agoomaha ahi wax ku bartaan, iyo guri wayn oo maamulka degmadu ku shaqeeyo. Waxa kale oo Bendar Qaali ku yaal maqaayado laga cunteeyo iyo goobo laga dukaamaysto.[24]

Hase ahaato'e, anigu Bendar Qaali kuma sii negaan oo ayada oo aan weli magaaloobin baan Muqdisho aaday, maya, ma aadin ee waa aan u dhuuntay. Haa, waa aan dhuuntay, ayada oo aan waalidkay iyo macallinkii midkoodna i ogayn baan si dhuumasho ah ugu safray Muqdisho, safar aanan ka soo noqon muddo dheer.

---

[24] https://www.radiomuqdisho.net/mashaariic-horumarineed-oo-laga-hirgeliyay-deegaanka-bandarqaali-sawirro/. Accessed on May 2, 2022



*Shiikh Muxyiddiin Garre*



*Hooyaday Nuuro Nuur Cawl (1960-2018)*



*Aabbahay Maxamed Diini Samatar (1939?-2018)*



*Bendar Qaali*

# U DHUUMASHADII MUQDISHO

Waalidkay iyo Macallin Muxyiddiin wax bay ii qorsheeyeen, wax bay sawirteen, hummaag baa u muuqday ay ka dhex arkeen qofka aan noqon doono mustaqbalka, markaa ayay ayaga oo aan hummaagsigooda ka shakin halka mustaqbalkaygu ku dambayn doono iyo qofka aan noqon doono meel ku guntadeen.

Goor horeba waxaa iga soo bidhaamay tilmaamo ka mid ah kuwii ay hummaagga ku arkeen. Waxa aan u labbistay si ka duwan sidii caammadu u labbisan jirtay. Go’ wayn oo cad, shaati gacmadheere ah iyo hoosgunti cad oo sabarhindi ah ayaan ku labbistay gacanta midigna tusbax baan ku kalwiyay kolkosha bidixna mar walba waxaa iigu jira kitaab yar oo Af Carbeedka ku qoran oo aanan duxdiisa garasho badan u lahayn.

Calaamadihii arday dugsiley ah mar hore ayaa aan ka gudbay, astaamihii dariiqada iyo kuwii Awliyada ayaa si tartiib-tartiib ah iiga soo daahiray. Waxaa waalidkay iyo macallinkiiba u sawirmay aniga oo xer horfadhiya oo ay cilmi iga baranayaan ama ugu yaraan dugsi Qur’aan macallin ka ah oo mawliidka, burdaha iyo munaaqibka na la ii jiibinayo. Gaban aan weli qaangaarin in astaamihii Awliyada iyo ifafaalihii culimadu ka soo muuqdaan waa astaan muujinaysa in aan waxbaristiisi lagu hungoobin, kutubaxoornimana looga baqayn.

Dabcan, waalidka iyo macallinkuba waxa ay jeclaayeen kuna rejo waynaayeen in aan jaranjarada dariiqada Awaysiyada-Qaaddiriyada kor u fanani doono ilaa meelaha ugu sarreeya aan gaaro kana mid noqon doono jiilka dhaxli doona culimada dariiqada ee maanta degaanka hormuudka u ah, waayo, ifafaaleheeda ayaa iga muuqday. Waa sidii waalidkay iyo macallinku sawirteen'e. Balse, haddii ay laabtayda waynayso ku eegi lahaayeen wax kale ayay arki lahaayeen. Waxa ay arki lahaayeen in waxa ay qorsheeyeen iyo hummaagsigoodu yihiin wax ayaga un ku kooban. Ugu yaraan waxa ay

ogaan lahaayeen in aanan Mudug ka noqon doonin wadaad Suufi ah meel kale ba yeelkeed'e. Waxa ay ogaan lahaayeen in aan mari doono halkii ay mareen kumannaan iyo kumannaan barbaartii Mudug ah ee koofur u qulqulayay jeer iyo bilowgii qarnigaan dabajdaeediyay.
Waxa ay ogaan lahaayeen kacdoonka aan ka qaaday daawashadii birta sida shimbiraha samada buubta.

Muddo badan baan naawilayay in aan miyiga ka huleelo oo meel Muqdisho ugu sokeyso ka soo jeesto. Tan iyo maalintii walaashay Farxiya Daarasalaam, Tanzania loo wadayba waxa aan iswaydiinayay “maxaa adigana laguu wadi waayay?” Tan iyo maalintii walaashay Maryan ay habaryar Ardo Muqdisho u wadatay, aniguna in aan ka dabatago ayaan hamminayay, tan iyo maalintii walaalkay Bile oo hal subax dugsiga nala geeyay Muqdisho u dhaqaaqay in aan ka dabatago ayaan naawilayay.
Mar walba oo aan arko wiil Xamar ka yimid oo si qurux badan u labbisan waa aan salkici jiray. Mar walba oo Ciid Dhagaf oo aan dugsiga isla dhigan jirnay isku waab na Bendar Qaali ka degganayn iiga sheekeeyo beri uu

Benaadir degganaa (asaga oo carruur ah) waxa aan go'aan ku gaari jiray in aan Bendar Qaali ka tago oo Xamar aado.

Hooyaday iyo aabbahayna kama qarsoonayn taasi oo aniga ayaaba dhawr jeer ka codsaday in aan Xamar aado balse mar walba waxa ay igu oran jireen “annagu waxba kama qabno ee macallinkaaga ka fasax qaado.” Waxase aan ogaa in Macallin Muxyiddiin uusan sinnaba ku oggolaan doonin taas. Sidaas darteed baan guntaday in aan Muqdisho aado aniga oo aan waalid iyo macallin midna ogaysiin. In aan sidaas yeelana waa ii sahlanayd, waayo, dhawrkii biloodba mar baan aadi jiray habaryarahay Astur Nuur iyo Xaawo Nuur oo Gaalkacyo degganaa ganacsina ku haystay oo aan ka soo qaadan jiray raashin iyo lacag aan ku noolaado. Habaryarahay aad bay ii jeclaayeen mar walbana taageero ayaay ila garabtaagnaayeen intii aan Bendar Qaali xerowga ku ahaa oo dhan. Keligay ma ahan ee qoyskeenna oo dhan noloshiisa kaalin wayn bay ugu jireen oo tan iyo maalintii aan garaad yeeshay waxaa si joogto habaryaro noogu soo diri jireen quud iyo marashi, maalmaha ciiduhuna kuma sii jirin oo safar dhan oo dhar iyo raashin ah baa habaryaro

inoo soo dhiibi jireen. Mar walba oo aan magaalada ugu imaadana aniga oo labbis qurux badan xiran baan ka soo laaban jiray. Waxa aan xusuustaa mar habaryar Astur i siisay kitaab Qur’aan ah oo Af Soomaali iyo Af Carbeed ku qoran. Inkasta oo aanan Af Soomaaliga akhrin karin haddana kitaabkaasi waxa uu sabab u noqday in aan si wayn u daneeyo Af Soomaaliga, intii aan haystayna aniga iyo qaar ardayda ka mid ah waxa aan bowsannay sida loo akhriyo ama loo kiciyo dhawr eray oo Af Soomaali ah. Waxaa jiray labo arday oo sida Af Soomaaliga loo akhriyo loona qoro Muqdisho ku soo bartay, waa Ciid Dhagaf Shidane iyo Daahir Fiigaal Eebbe ha u naxariistee. Balse Macallin Muxyiddiin baa kitaabkaas qoonsaday asaga oo ku eedeeyay bidcanimo waxa uuna iga mamnuucay in aan kitaabkaas dugsiga keeno. Waxa uuba igu amray in inta aan god qodo kitaabka ku xabaalo waana aan sameeyay. Wacnaan lahaydaa haddii aan maanta aqoon lahaa halkii aan kitaabkaas ku xabaalay. Daahir Fiigaal Af Soomaaliga keliya ma uusan akhrin karin’e waxa uu sidaa oo kale kicin jiray Af Ingiriiska oo waxa uu noo akhrin jiray farta ku qoran kabaheenna iyo hoosguntiyadeenna sida *“Made in Indonesia, Made in Thailand.”* Anigu

xaqiiq ahaan ma aqoon waxa Indonesia iyo Thailand yihiin.

Maalin aan muddo dheer sugayay baa soo dhawaatay. Waxaa gebagebo maraya baalkii ugu dambeeyay baalashii noloshayda ee Mudug.
Waxa aan fasax maalmo kooban ah u aaday qoyskeenna oo yaallay meel aan ka dheerayn Bendar Qaali ballanku na waa in aan maalmo gudahood ku soo noqdo si aan u xaadiro kitaabka Minhaajka oo shiikhu masaajidka ka bilaabi doono. Balse aniga qorshe kale ayaa meel ii yaallay: in aan Gaalkacyo aado dabadeed aan baabuur Xamar u socda gurada u fariisto. Tabtii geeljirihii reer Mudug ee asaga oo geeliisi waraabinaya xusuustay hebel iyo hebel uu garanayay oo barqo cad geelashoodi ka dhaqaaqay koofurna u dalaabay tuldihiisna xusuusinaya biti badnidooda ugu heesay:

*Haddaan baabuur*
*Bartanka u galo*
*Yaa ku shubinoo*
*Yaa ku shawshabin?*

Baan laabta ka iri:

*Markaan Xamar iyo*
*Meel ka sii dheer*
*Maryaha u xidho*
*Yaa Minhaajow*
*Yaa ku meersanoo*
*Yaa ku daalacan?*

Waxase aan ka welwelsanaa sida ay taasi iigu suurtagalayso. Tan ugu horraysaa waa sida aan Xamar u aadi karo ayada oo aan waalidkay ogayn taas oo igu adkayd. Tan labaadna waa kharashkii aan baabuurka ku raaci lahaa oo waxa aan ka welwelayaa in habaryaro raashin iyo dhar i soo siiyaan, balse aysan lacag caddaan ah i siin sidaasna aan ku waayo lacag aan Xamar baabuur ugu raaco. Aniga oo welwelkaas qaba ayaan qoyskeenni tegay. Biti badnaantayda, aan tegayba waxa aan u tegay hooyo oo safar Gaalkacyo ah u xirxiran oo ari jar ah magaalada in ay ka soo gaddo u diyaarsan. Habeen dhax ka dib aniga iyo hooyo jarkii ayaan Gaalkacyo u kaxaynay. Hooyo waaba u baahnayd qof jarka la kaxeeya. Gaalkacyo sidaas inoogama fogayne galabnimadiiba

waan gaarnay. Saddex maalmood ka dib hooyo waxa ay raacday gaari Bendar Qaali u baxayay anigana waxa ay igula ballantay in aan afar maalmood ka dib Bendar Qaali iska xaadiriyo. Hooyo waxa ay i siisay lacag konton kun oo Shilin Soomaali ah si aan markaan Bendar Qaali ku noqdo maalmaha Jimcooyinka magaalo joog uga dhigto.

Mar kale ayaa welwel iyo walbahaar i la soo darseen. Hooyo uma sheegi karo qorshahayga oo waxa aan ka baqayaa in ay iga diiddo ama waqti kale igu ballamiso taas oo aanan diidi karin. Habaryarana lacag ma waydiin karo oo waxa ay ogaayeen in hooyo konton kun i siisay.

Aniga oo si aan waxyeelo garan la' kuna dhow in aan baabuurka Bendar Qaali u baxaya raaco ayaan jidka astaan Golol isaga soo horbaxnay saaxiibkay Ciid Dhagaf oo qoyskoodi miyiga ka yimid loona soo jiscimay wareeg kale oo diin barasho ah oo Bendar Qaali ka bilaabanaya. Isxaalwaraysigeenni ka dib, Ciid waxa uu ii sheegay in uusan jeclayn in uu Bendar Qaali ku noqdo haddana uusan qorshe kale hayn. “Ma doonayo in aan dib dambe u arko Qodaxtoolle iyo ciiddiisi gaduudnayd,” buu yiri. Filanwaa

iguma noqon in Ciid ka cagajiido ku laabashada Qodaxtoolle, waayo, waxa uu ahaa maqaafaad hadal iyo durduro miiran ah oo weligiiba waxbarashada ku liitay, inkasta oo uu ahaa nin caqli badan oo aan damiin ahayn, haddana baxaalli ahaan ma ahayn nin waxbrashada himmad u haya. Waxa aan u sheegay in qudhaydu aanan doonayn ku noqoshada Qodaxtoolle qorshahayguna yahay in aan Xamar aado, balse lacag dhan aan konton kun ka hayo. Ciid aad buu u la dhacay qorshahayga Xamar aadka waxa uuna ii sheegay in uu i raacayo. Waxa kale oo uu ii sheegay in uu lacag boqol kun ah sito. Dabadeed waxa aan go'aansannay in aan aadno boosteejada baabuurta Muqdisho ka baxaan soona oggaanno qiimaha tigidka (ticket). Boosteejadii aan tagnayba waxa aan la kulannay baabuur inataree (Fiat N3) oo berri galab casarkii dhaqaaqaya tigidkuna waa konton kun qofkiiba. Dabadeed aniga iyo Ciid waxa aan ku heshiinnay in boqolka kun ee uu hayo aan tigidka ku goosanno, kontonka kun ee aan hayana jidmar ka dhiganno. Ma xusuusto in heshiiskeenna ay ku jirtay in aan Ciid lacagta u celiyo markaan Muqdisho tagno iyo in aan u celiyay iyo inkale. Yeelkeed’e, abaal mug leh ayaan saaxiibkay uga

hayaa deeqsinimadiisi. Ma garanayo sida aan ku dambayn lahaa iyo in aan miyi iyo Bendar Qaali ba ka soo tegi lahaa haddii aanan Ciid kula kulmin bartamaha Astaan Golol. Markii aan Muqdisho tagnay ka dib saaxiibkay Ciid hal mar baan is aragnay, laakiin sannado ka dib waxaa la iisheegay in uu miyi ku noqday oo ku guursaday.

Inta aanan u tallaabin tebinta socdaalkaygi Gaalkacyo iyo Muqdisho, aan in yar ku dul hakado dhacdo iga yaabisay oo i qabsatay maalin aan joogay tuulo lagu magacaabo Dhuurre.

Maalin baan aaday tuulada Dhuurre oo markaas qoysku soo agdegay, waa ka hor intii aan dugsiga Bandar Qaali laga qotomin. Waxa ay ahayd maalin Jimce ah waqtigu na ahaa gu’ barwaaqo oo biyuhu meel walba ceegaagaan, ciirtana la daadiyo. Aniga oo keligay ah baan u tamashle tagay tuulada Dhuurre. Ma ahayn markii iigu horraysay ee aan Dhuurre imaado, markaas ka hor baan maalin sidaan oo kale Jimce u imid aniga oo la socda Ciid Dhagaf, Xiddig Saciid iyo Maxamed-Sahal Saciid. Berigaas meel cabbaar ka durugsan Dhuurre ayaan

degganayn. Nin walba oo naga mid ahi maalintaas waxa uu jeebka ku sitay lacag hooyadii soo siisay oo maalin-joog tuulo ka badan. Balse tuulada waxaa degganaa Ciid Dhagaf awoowgiis hooyadii dhalay asaga ayaana si fiican noo soo dhaweeyay qado tiro badan oo macaanna nagu sooray. Maalintaan dambe keligay baan ahaa ma xusuusto meel saaxiibbaday jireen.

Marka Jimcaysiga laga reebo, waxa ugu wayn ee aan Dhuurre u soo aaday waxa ay ahayd in aan dhaqdo dharkayga. Inta aan saabbuun soo gatay baan dharkii ku dhaqday dacalka ceel durdur ah. Markii aan dharkii dhaqday oo is iri tuulada aad oo ka soo qadee ayaan waayay kabo cusub oo maalmahaas habo Astur Gaalkacyo iiga soo dhiibtay. Anigii dhammaa hal mar baan dhalaalay oo niyadjabay wax aan sameeyana garan waayay. Waxa aan ogaa in kabuhu ahaayeen kabo cusub oo noocooda dhallinyaradu wada jecel yihiin, haddana ay yar yihiin inta heli karaysa. Waxa kale oo aan ogaa in aysan macquul ahayn in kabo lagaa xaday aad il dambe saarto. In aan cagacaddaan aqalkeenni u lugeeyo waxaa iiga kurbo badan kabihii aan jeclaa ee weliba cusbaa ee

sida dhibka yar la iiga xaday. Dhawr iyo labaatan jeer baan isaga daba noqday meeshii aan dharka ku dhaqday iyo maqaayadaha. Dabadeed waxa aan bilaabay in Ilaahay ka baryo in uu awooddiisa adeegsado oo iigu gargaaro miskiinkaygan yar ee dugsileyda ah ee kabihii laga boojeeyay. Inta aan istaagay meel u dhaxaysa ceelkii aan dharka ku mayrtay iyo maqaayaddii aan ka qadayn lahaa ayaan bilaabay Alle tuugid iyo Qur'aan akhris. *"Ilaahow adigaa Wayn oo Waaxid ah, Yaa Samiic Yaa Basiir! Adigaa arkayay oo ogaa tuugga kabahaygi qaatay. Ilaahow waan ku baryahayaa ee tuuggaas kabahaygi iiga soo celi. Yaa Cadiim Yaa Casiis!* ***Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Qul Acuuthu bi Rabbi Naas..., Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Qulhuwallaahu Axad, Allaahu Samad..., Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Camma yatasaa aluuna. Caninama il Cadiimi...."*** Alle tuugista iyo Qur'aan akhrisku runtii waxa ay ahaayeen kuwo si buuxda oo aan shaki iyo waswaas lahayn niyaddayda uga soo go'ay. Ruuxdayda oo dhani waxa ay u go'day oo u gaar u noqotay cabashada Eebbe. Waxa aan la mid ahaa sidii nin tijaabinaya jiritaanka iyo awoodda Alle oo oranaya *"Ilaahow haddii aad mid jira oo run ah tahay*

*maanta i tus awooddaada iyo caddaaladdaada."* Aniga oo weli Alle tuugistii iyo Qur'aan akhriskii afka ku haya si tabar la'aan ahna ugu luudaya meeshii kabaha lagu xaday baa hal mar indhahaygu qabteen wax aan la yaabay. Ma run baa, ma riyaa? Waxaa indhahaygu qabteen qof dumar ah oo madow maduxuna u bannaan yahay oo timihu u sii daysan yihiin oo bartii kabahayga lagu xaday taagan fartana iigu fiiqaysa labadaydi kabood oo dhulka yaalla. Dhawr jeer bay inta faraha ku fiiqday kabihii dhulka yaallay ayada oo gacmaha kala rogaysa sidii qof si wax ka yihiin bay u dhaqaaqday dhanka galbeed ee tuulada oo ah dalcad bacaad ah oo dhawr waab ka dhakoolaan.

Aniga oo yaabban oo gaataxtamaya ayaa aan kabihii soo dul istaagay, weli shaki ayaa iiga jira in ay kabahaygi yihiin ilaa aan soo qabtay oo si mug leh u fiiriyay. Markii aan hubsaday in ay kabahaygi yihiin baan eegay dhankii ay u dhaqaaqday qoftii kabaha ii keentay mise wax sii socda iyo wax soo socda ma leh. Tolow maxay ahayd qofta timaha dheer ee madow ee kabaha ii keentay? Maxayse ahayd naagta madaxu u faydan yahay oo har cad

Dhuurre dhex lugaynaysa? Aaway wadaadkii Qur'aan Ka'adag ahaa ee magaalada xukunka degdegga ah ku maamulayay? Sidee ayuu ku oggolaaday in gashaanti gambo la'aan ahi tuulada dhex laafyooto? Waa wax aan dhici karin? Ma Malaa'ig Alle ii soo diray baa oo tuuggii kabahayga xaday bay asaga oo maahsan kabihii ka soo boojaysay? Mise waa Malaa'ig amar Eebbe ku so socotee asaga oo kabahaygi ku jookaysan bay inta labada lugood isugu dhufatay kabihii ka soo siibatay? Mise waaba tuuggii laftiisi oo musiibo uu wax ku qaatay qabsatay? Wax ay ahaydba aad bay iiga farxisay qoftaas timaha dheeri. Eebbow mahaddaa.

Intaan kabahaygi illaday baan u dhaqaaqay dhankii waababka tuulada si aan uga soo qadeeyo aniga oo xoogaa dareemaya in aan ahay Awliyo yar oo aan lagu soo degdegi karin laguna gardarroon karin.

Dhacdadani waxa ay i xusuusiyay hadal maalin hooyaday igu tiri. Ma xusuusto wax aan bi'iyay'e maalin baa hooyo dharbaaxo igu dhufatay. Daqiiqado ka dib markii ay i dharbaaxday bay hooyo si xun u turaanturrootay waxaana

suulka ka gaaray jug xanuujisay. Dabadeed hooyo oo muusoonaysa si na xanuun u dareemaysa ayaa inta i soo fiirisay igu tiri “*Alle waxu il kululaa illaa toddoba-ku-dhalay buu ahaa?”* Haa, hooyo runteed bay ahayd. Waxa aan ku dhashay toddoba bilood. Hooyo oo aan sinnaba ku filayn fool baa habeen si dareen la’aan ah u seexatay ka dib na saqdhexe ayay la soo boodday xanuunka fool kediso ah wax yar ka dib na waxa ay dhashay aniga, ayada oo aan kalkaaliso iyo ummuliso midkoodna caawin.

Soomaalida qaarkood waxa ay rumaysan yihiin in qofka toddobada bilood ku dhashaa leeyahay il kulul oo haddii la gardarraysto ama lagu aabyoodo falcelin degdeg ahi dhanka Eebbe ka imaanayso.

Laakiin anigu aad baan u necbaa in sifadaas la igu tilmaamo cuqdadna waan ka qaadi jiray haddii la igu dhaho. Xataa waxa aan necbaa in aan toddobo bilood ku dhashay.

## GAALKACYO ILAA MUQDISHO

Waxaa la gaaray galabkii inatareegu dhaqaaqi lahaa. Aniga oo dhinacyada iska eegaya wadnuhuna i gariirayo ayaa aan inatareegii soo hoos istaagay wax yar ka dib na Ciid baa yimid, dabadeedna inta aan inatareegii tafnay baan bagaaliyaha hore fariisannay. Hoosgunti sabarhindi ah, shaati cad oo funaanad garan ahi ka hoosayso, cimaamad iyo kabo sookal ah ma ahan'e shay kale ma wato. Bac dhawr maro oo go'ii caddaa ka mid yahay iigu jireen waxa aan kaga imid qolkii aan guriga habaryar Astur ka seexan jiray oo haddii aan soo qaadan lahaa waxa aan ka baqay in gabdhaha guriga joogaa i ogaadaan, ka dib na habaryar oo dukaankeedi joogta u qaylageeyaan dabadeedna qorshahayga oo dhani fashilmo.

Intii gaarigu taagnaa annaguna aan dul dhakoolnay welwel iyo feejignaan baan ku jirnay, mar walba oo aan u jeedno qof na garanaya oo jidka lugaynayaba hoos baan isu gaabbinnaa annaga oo ka baqaynna in uu dhuumashadeenna fashiliyo. Ugu dambayn baabuurkii waa uu dhaqaaqay. Markii darawalkii sheellaraha ku istaagay oo dhawr marsho ku xareeyay oo guuxiisu tabtii inatareeyada lagu yaqaannay u dananay, dhagtuna ugu raaxaysanayso sida kabankii Salaax Qaasim baa neef wayn iga fuqday oo aan rumaystay in aan ugu dambayn ka miradhaliyay hawlgal aan muddo dheer qorshaynayay.

Gufaacada layrta macaan ee bari ka soo dhabanaysay iyo saxansaxada roob da'ay maalmo ka hor baan si xarrago leh u nuugnay. Saxansaxada ay shidaalinayeen rayska uu dhigay mahiigaan habeenno ka hor dhulka ku gurguurtay iyo geyre ka soo qaxayay habeenkii oo hujuum culus dhanka bariga uga soo waday; foorida ka yeeraysay iskaalamiitada inatareega, iyo kabanka Saalax Qaasim ee shirka ka dananayayba waxa ay sii bileen guusha mishinkii aan muddada dheer soo falkinayay. Waxase sillansugan ahayd meesha aan ka imid (dugsigii Macallin

Muxyiddiin iyo madarasadii Bendar Qaali) iyo muusigga oo idil xiriirkii ka dhexeeyay, iyo jacaylka iyo xiisaha ay igu hayeen kabanka iyo dhammaan codadka la laxameeyo.

Meesha aan ka imid ee aan ku soo barbaaray iyo kabanka xiriir cadowtooyo ayaa ka dhexeeyay weerarkana mar walba waxaa waday dugsiga aan ardayga ka ahaa. Qofka kaban ama muusig dhagaysta waxa uu ku tilmaannaa faasiq iyo faajir fongoran.

Aniga iyo muusiggu waxa aan xiriir yeellanay ka hor inta aan dugsiga la igu darin waxaana xiriirkeennu ka bilowday raadiyayaashii tuulooyinka yaallay oo dadka tuulooyinku ka dhagaysan jireen idaacadaha sida BBC Somali iyo Raadiyow Jabuuti. Gaar ahaan waxa aan anigu aad u jeclaa muusigga idaacadda BBC-du ku soo geli jirtay. Halkaas buu ka bilowday xiriirka aniga iyo kabanku. Waxa aan xusuustaa marka aan idaha la joogo aniga oo birqalax ama bir kale oo aan meelahaas ka helay garaaca, aniga oo isku dayaya in aan ka soo saaro codkii macaanaa ee aan raadiyaha ka maqli jiray oo kale. Markii

aan wax dhadhan leh ka heli waayo iduhuna iga didaan baan iska tuuri jiray.

Waxa kale oo aan xusuustaa galab aan isla carrownay nin sitay rikoodh wayn iyo cajalado badan oo heeso ku duubnaayeen oo uu hadba mid ku tuurayay. Fannaaniinta aan galabtaas bertay waxaa ka mid ahaa Gaayweroow, Maxamed Nuur Giriig, Axmed Mooge, Hanuuniye iyo Cumar Dhuule. Waxa kale oo aan xoogaa ka bowsaday dukaan cajaladaha duubi jiray oo ku yaallay jidka Astaan Golol, Gaalkacyo.

Imaamu Qasaali ayaa laga reebay:

*Whoever says that all music is prohibited, let him also claim that the songs of birds are prohibited.”*

Anigana kuwa kabanka iyo laxamadiisu aysan diirin intaan ha igala haraan: *Qofka aan laxanku laabtiisa xanxantayn, dareenkiisuna la danqan dananka kabanka, sida kuwa Hanuuniye, Saalax Qaasim iyo Jiim Shiikh Muumin waa qof qayb jirkiisa ka mid ahi maqan tahay.*

Furka hore ee inatareega aan bagaaliyihiisa fuushannahay iyo rimoorka uu jiidayaba waxaa ku rasaysan kiintaallo cusbo ah oo Xinlebi laga soo faagay. Dhawr qofood oo rag ah baa bagaaliyaha nala fuushan, halka gurada ay kiintaallada cusbada ahi ku rasaysan yihiinna ay fadhfadhiyaan tobaneeyo qof oo dumar waawaayn iyo rag isugu jira, marka laga reebo labo gabdhood oo dhanka bagaaliyaha soo xiga fadhiya. Labada gabdhood oo labbiskoodu dirayay baaq sheegaya in aysan ahayn reer miyi aniga iyo Ciid oo kale waxa ay u ekaayeen kuwa aan socdaalka Muqdisho ku cusbayn. Midda dhankayga soo xigtay baan dhawr goor isha ku xaday aniga oo la ashqaraaray quruxdeeda, dhawr jeerna waxa aan damcay ama jeclaystay in aan bagaaliyaha ka dego oo halka labada gashaanti fadhiyaan boos ka ciriirsado, haddana fulaynimo iyo xishoodkii xerownimada mid ay ahaydba kuma aanan dhiirran.

Socodka baabuurku waa mid gaabis ah oo gurguuranaya culayska cusbada Xinlebi iyo da'diisa oo waynaatay dartood. Waxa kale ee socodkiisa gaabinayaa waa burburka, dayaca iyo gabowga jidka laamiga ah ku

goobtay oo inta ay dhinacyada ka galeen sidii ay feer iyo jilib ugu wadeen barbar ula tuuray. Inkasta oo jidku yahay kan keliya ee isku xira Muqdisho iyo gobollada waqooyi ee dalka, haddana toban sannadood oo dagaallo sokeeye dalka ka socdeen ma uusan helin dayactir iyo kabkabid toona. Waxaaba cimrigiisa sii dedejiyay madaafiicdii Soomaalidu isku ridaysay oo cuskatay dushiisana boholo iyo godad ka qoday. Waxa kale oo laamiga cardaadiqaha ka dhigay taangiyadii dushiisa ku xamaartay.

Waxa kale oo safarka sii daahinayaa waa isbaarooyinka laamiga daadsan iyo jidgooyooyinka malleyshiyaad hubaysan kuwaas oo lacago baad ah baabuurta jidka maraysa ka qaata. Wacnaan lahaydaa haddii malleyshiyaadka hubaysani ku ekaan lahaayeen qaadashada lacagaha baadda ah.

Dhaca iyo dilka dadka musaafirka ahiba waxa ay noqdeen wax caadi ka ah jidkaas dheer ee Muqdisho iyo Gaalkacyo isku xira. Maalintii timaaddaba tobaneeyo qof oo darawallo iyo rakaab ahi jidkaas naftooda waa ay ku waayi jireen. Marka Gaalkacyo laga baxo inta aan Dagaari

la gaarin waxaa taalla isbaaro baadda iyo arxan la'aanta ku caanbaxday oo lagu magacaabo Tuulaxaaraan. Waa goob saldhig u ah malleyshiyo hubaysan oo dad iyo duunyo waxii jidkaas maraya qaaq iyo kax kaga siiyay. Tiro ma leh dadka goobtaas aakhiro loogu diray iyo hantida lagu dhacay. Dadka ay malleyshiyaadkaasi dilaan haddii ay yihiin dad ka dhashay qabaa'ilka waawayn ee hubaysan waxaa magtooda bixiya qabiilka ay malleyshiyaadku ka dhasheen ama dad malleyshiyaadka ku qabiil ah baa aano ahaan loogu dilaa. Haddiise dadka ay dilaan yihiin kuwa aan qabiil hubaysan ka dhalan ama dad qabiilooyinkoodu gobollo fog deggan yihiin dhiiggooda labo Cali isma waydiiso.

Tuulaxaaraan marka la dhaafo ilaa koontaroolka Balcad ee Muqdisho dhankeeda waqooyi ku yaalla isbaarooyinku waa daadsan yihiin waase kala halis badan yihiin oo qaarkood marka gaarigu ku soo dhawaado rakaabka baabuurka saarani Alle tuugis iyo ashahaad bay ku waashaan. Waxa kale oo jiray jidgooyooyin reer miyi hubaysani habeenkii laamiga dhigtaan dadka iyo baabuurtana ku baartaan. Kuwani ma laha goob u cayiman ee goob walba oo laamiga ah baa laga filan karaa

waana ka halis badan yihiin isbaarooyinka goobaha cayiman ee la yaqaanno yaalla.

Habeenkii oo dhan gaarigu ma istaagin ee waa uu gurguuraynayay aniguna labada indhood isma saarin oo safarka oo aan xiise u hayay iyo magaalooyinka laamiga bilqan ee aanan maqalkooda maahan'e muunaddooda horay u arkin baa araggoodu xiise igu hayay. Balse koronto la'aanta iyo horumar la'aanta dagaallada sokeeye ee la degay baa ii oggolaan waayay in aan muuqaalkooda si wacan uga bogto. Gelinsoor, Godinlabe, Cadaado iyo Mareergur oo faynuuso ka iftiimayaan tabtii tuuladii Bendar Qaali ayaan guure ku marnay. Waaberigii hore na Dhuusamarreeb oo aan dareemayay in ay leedahay laamiyo ka badan kuwii magaalooyinkii aan aqaannay balse bololay baan ka dhex dusnay annaga oo aan hakan. Dhuusamarreebna sidii magaalooyinkii hore ayay mugdi u ahayd. Barqadii ayaan Guraceel ku hakannay oo ka quraacannay. Galabnimadiina waxa aan sii istaagnay Jiirta Qamnood oo rag hubaysan oo argagax ku riday dumarkii baabuurka saarnaa naga sii raaceen.

Ka sokow dhaca iyo dilka ay mooryaanta hubaysan ee jidgooyooyinka dhigataa dadka u geysan jireen, waxa ay kufsan jireen dumarka, waana sababtaas tan dumarku uga aragagexeen dableyda Jiirta Qamno naga sii raacday oo goor walba waxaa laga filan karay in ay baabuurka jidka ka leexsadaan ka dib na dumarka kufsadaan.

Laga bilaabo Jiirta Qamnood ilaa Muqdisho burburka laamigu aad buu uga sii liitay kan Gaalkacyo iyo Qamno, sidaas daraaddeed socodka baabuurku aad buu gaabis u sii noqday.

Si la mid ah habeenkii hore ayaan haddana guure ugu jiidnay. Habeenkii labaad aad baan u daalay una hurdooday. Daalka iyo hurdada waxaa iigu sii darsoomay dhaxan daran oo aanan haysan wax aan ka huwado iyo bagaaliyaha baabuurka oo aan meel gees ah ka saarnaa. Dhawr goor baan hurdo la lulmooday kuna sigtay in aan baabuurka ka faniino ama geedaha laamiga ku soo baxay ila haraan.

Run ahaantii kuma aanan baraarugsanayn halista aan habeenkaas galay, balse marka aan dib u xusuusto ayaa aan is iraahdaa “Alle dilaa dhinta” waayo, meesha aan baabuurka ka saarnaa iyo sida aan u hurdooday, iyo hadba dhinac u liicii baabuurka ay bohola waddada ka qodmay sababayeen aad bay u fududayd in aan bagaaliyaha ka faniino.

Noloshayda dhawr goor baan galay halis dhimasho sababi kartay: waa habeenkaas, maalintii miinadu nagu qaraxday, iyo habeen burcad hubaysani nagu xabbadaysay oo aan sigtay aniga oo saaran buubuur Baladweyne iyo Muqdisho aan ugu kala safrayay, iyo maalin aniga oo arday ah aan xoolo wax uga arooriyay ceel lagu magacaabo Dajimaale.

Dajimaale waa ceel la sheego in ay qodday saldanaddii Ajuuraanku qarniyo hore kana mid ah ceelasha ugu dhaadheer Mudug. 18 baac buu hoos u qodan yahay. Xagaagaas Dajimaale aad buu u biyo yareeyay waxaana looga cabbi karay oo keli ah in qof soo dhuro. Sidaas darteed baa aniga oo raggii ceelka joogay ugu yaraa la ii

riday si aan wadaanta u soo dhaamiyo. Dajimaale ma ahayn ceelkii ugu horreeyay ee aan soo dhuro, balse horay uma gelin mid sidiisa oo kale u dheer. Waa mataan aad u dhuuban oo qof dhuuban mooyee mid buuran aad ciriiri ugu ah. Qofka loo ridayana labo dawli wax ka yar lagu ma aamino. Qiyaastii 10 baac marka mataanta hoos loogu sii dhaadhaco waxaa lagu tagayaa hul wayn oo ilaa 3 baac ah, markaas buu haddana mataan dhudhub ah isu beddalaa. Sidaas darteed haddii aan qofka iyo wadaan loo ridayo ama laga soo bixanayo si taxaddar leh loo shubaalin waxaa dhacaysa in qofku gebiga madaxa ku dhufto ama wadaantu gebiyada hulka qabsato.

Labo dawli ayaa inta dhexda la iiga xiray la igu sii daayay. Caadiyan qofka ceelka dhurayaa marka uu wadaanta buuxiyo waa uu fooriyaa taas oo ah baaq ragga wadaanta shubayaa ku gartaan in wadaantu buuxdo markaas bay shubaaliyaan wadaanta. Balse, marka ceelku dheeryahay sida Dajimaale oo kale waa ay adag tahay in foorida la maqlo, markaas, qofka ceelka dhurayaa dawliga ayuu kilkilaa (ruxaa) taas oo ah baaq ah: wadaantii waa buuxdaa.

Markii aan dhawr wadaamood buuxiyay baa wadaan aan dhaaminayay dawligii ku xirnaa oo dhulka daadsan qoobka surtay taas oo raggii ceelka shubayay u qaateen baaq ah wadaantu waa buuxdaa. Markii dawligii qoobka iiga marmay raggii shubayayna si tartiib ah u jiideen (caadiyan ragga ceelasha shubaa marka hore dawliga si tartiib ah bay ayaga oo isfooxaarinaya dawliga u soo jiidaan ka dib na si isdabajoog bay u karaarqaataan). Isfooxaariskoodaas baa i siiyay kansho aan isaga furfuro xarigga lugta iiga marmay, balse waa aan ku guuldarraystay. Markii aan arkay in talo farakabaxday baan gacanta midig dawligii ku qabsaday si aniga oo maduxu i hooseeyo aan sidii wadaantii la ii shubaalin. Gacanta bidixna darbiga ayaan isaga ilaalinayay intii sida wadaantii la ii shubaalinayay. Raggii wadaanta ii maleeyay oo fudaydkayga la yaabbanaa ayaa hal mar naxdin wadnuhu la istaagi gaaray markii ay arkeen in waxa ay shubaalinayeen aysan wadaan ahayn. Hal mar bay aniga oo aan makaabka soo gaarin inta soo foorarsadeen gacmaha i qabteen ayaga oo naxdin indhuhu

la caddaadeen. Shilkaas ka dib waxa la go'aansaday in aan ceelka la igu celin oo qof kale loo rido.

# MIRTUUGO

Waxa ay ahayd markii saddexaad oo aan galay halis noloshayda galaafan kartay.

Waxa ay ahayd Nofeembar, 2003, goor barqo ah baan gaari caasi (hoomey) ah ka soo raacay boosteejada baabuurta Muqdisho u socdaahi ka baxaan ee ku taalla dhinaca koofureed ee Gaalkacyo. Lacagta aan tigidka ku goostay waxaa i siisay habaryartay oo aan markii hore Muqdisho iska raacnay ahaydna hooyada Muqdisho ee aan gurigeeda ku noolaa. Habaryar goor horeba ayadu Muqdisho ayay ku noqotay. Lacag boqol iyo konton kun ah oo labaatan kun oo ka mid ahi ay shan-shan boqol ahayd oo hooyaday i soo siisay iyo $35 Doollar oo aabbe i siiyay baan watay. Shanta boqol ee Shilin Soomaaligu beryahaas Muqdisho iyo guud ahaan koofurta lagama adeegsan jirin, sidaas daraaddeed Dhuusamarreeb baan ka beddashay; gabar dukaan ku lahayd baa kun kun iigu badashay.

Magaalooyin badan baan soo marnay, sida Cadaado oo aan ka shaahaynay, Dhuusamarreeb oo aan lacag ka beddashay, Guriceel oo aan ka qadaynay, Matabaan, iyo Baladwayne oo aan maqribkii nimid. Balse inta aynaan Baladwayne soo gaarin baan ka haray gaarigii aan la socday. Meel Ceelgaal u dhow markaan marayno ayaa waxaa naga dabayimid gaari Nissan Patrol ah oo uu wato wiil igaranayay; kaalin shidaal oo habaryar Muqdisho ku lahayd ayuu shidaal ka qaadan jiray. Markii uu i arkay ayuu igu yiri, "war maxaa halkaan ku keenay ma soo dhuntay? kaalay aniga i soo raac,” aniguna sidii baan ku raacay.

Habeenkii Baladwayne ayaan ku hoyannay. Waxa ay ahayd markii iigu horraysay iiguna dambaysay Baladwayne. Galabtii dambe casarkii ayaan Baladwayne ka dhaqaaqnay. Waxa aan nahay saddex ruux, darawalka, wiil la socda iyo aniga. Waa niman dhallinyaro ah, inkasta oo ay aniga da' ahaan iga waynaayeen. Intii aan isla soconnay ayaga ayaa wax walba iga bixinayay xataa habeenkii Baladwayne Loojka lacagtiisa ayaga ayaa iga

bixiyay. Waxa aan dareemay in ay iila dhaqmayaan sidii cunug yar oo ay cidlo ka soo heleen. Labadooduba waa ay qayilayeen, heeso midba nooc tahayna waa ay dhagaysanyeen. Anigu waxa aan fadhiyay kuraasta dambe keligay oo haddaan doono waan ku seexan karay. Heesaha dhagaysigooda kuma aanan badnayn labo sababood dartood:

1) carruurnimadaydi ilaa waqtigaas wax yar ka hor waxa aan joogay dugsi Qur'aan, masaajid ama meel diin lagu akhrinayo.
2) Guriga habaryartay iyo meel ay joogtaba hees kuma aanan dhagaysan karin oo hadda ka hor bay igu qabatay maalin aniga oo qolkaygi irid-bannanka ahaa ku jira oo qaadaya heesta *XAYAAT* ee Xasan Aadan Samatar qaado dadkuna u yaqaannaan *Hunguri-dhubuq*. Weliba aniga oo heesta ku celcelinaya si aan Samatar codkiisa oo kale u keeno; markii aan kor u qaadaba waxaa iga luma dhadhankeeda, laakiin marka aan niyadda ka qaadayo oo bushimaha uun nuuxnuuxinayo waxa aan ahay Samatar oo aan biyo is marin. Habo inta

ay sidaa ii firisay ayay tiri, "balo annagaa diin baraynnay."

Sidaas awgeed heesaha ay dhagaysanayaan intooda badani waa igu cusbaayeen. Waxa ay ahayd berigii Albumka *Hadab-la-mood* ee Cabdikariin Raas qaado uu cirkaa marayay, laakiin habeenkaas ka hor kansho uma helin aan ku dhagaysto. Waxa aan la ashqaraaray erayada iyo muusigga cajiibka ah ee heesta sidata magaca albubka ugu na horraysay albumka:

*Indhuhu daymadaa miyay ka daalaan?*
*Haddaanay daawan hurdo ma doonaan*
*Alla ha daayee dookhayga weeyaan.*
*Dahab la moodyeey dumar filkaagiyo*
*Adaa u door roon hablaha Deeqaay*.
*Dahab la moodyeey dalkeenni hooyiyo*
*Adaa ku wacan daaloo naftaad dawaysaa.*

*Markay daruuruhu dhibica daadshaan*
*Ee ay darrooraan dayaxna muuqan*
*Ayaad dhulkoo dama adigu daartaa.*

*Dahab la moodyeey dumar filkaagiyo*
*Adaa u doorroon hablaha Deeqaay...*

Iyo mid kale oo ay miraheeda ku jireen:

*Naftu qaali weeyaan*
*Qiimaha aduunkoo,*
*Qof inay jeclaatana*
*Qaadirkaa u uumee,*
*Haddaan qaran dhan oo wacan*
*kaa doortay qayrkaa*
*Oo aan ku qaayibay*
*Ila qabo dhankaagoo*
*Ila qaad jacaylkaa.*

Erayadaas iyo muusigga ku larani waxa ay igu sii liiliijiyeen waran markii horeba wadnaha igaga taagnaa. Inta ay i qaadeen bay igeeyeen magaaladii Muqdisho ee aan bil ka hor ka soo tegay, waxa ayna i hormariyeen dukaankii ay joogtay ee aan markasta hormari jiray.

Aniga oo aan dan ka lahayn baan hadba hor mari jiray si aan wejigeedi iyo muuqeedi wacnaa u arko. Waxa aan

naawilayay marka ay heesahaan maqasho in ay dareemi doonto jacaylka aan u qabo, misana waxa aan xusuustay in aysan ogaynba waxa niyaddayda ka guuxaya iyo waranka wadnaha igaga liqdaaran. Waa anigaa naftaydi canaantay; oo miyaad u sheegtay in aad jeceshahay? Maya, oo sidee ayay ku ogaanaysaa haddaas? Ma Malaa'ig baa? Mooji! Ma doqon baa ayadu? Ma ninkaan wayn baa maalin kasta macno la'aan horteeda ku marmari lahaa? Bal adba!

Beryo dambe ayaa kuwa aan ducaysnayni nuxnux iigu sheegeen in qoftaas la guursaday:

*Waa la guursadee,*

*La guursadee*

*Guriyaa la geystee,*

*Guulloow Ilaah baa*

*U gargaarayee."* – Hees, Axmed Naaji Sacad qaadi jiray.

Wax aan soconnaba waxa aan dhaafnay Buulobarde. Markii aan xoogaa dhaafnay Buulobarde ayay labadii nin go'aansadeen in ay waddada laamiga ah ka degaan si ay

isbaarooyinka jidka yaallay ugu gambiyaan. Waxa aan sii marnay Jalalaqsi ka dib na waan dhunnay (lunnay) oo darawalkii halkii laamiga laga fuuli lahaa waa uu garan waayay. Sidaan u soconnay baan nimid tuulo yar. “Walaal halkaani waa halkee?” Ayuu darawalkii waydiiyay wiilal goob maqaaxi ah hor fadhiyay. “Mirtuugo aa la dhahaa,” ayay noogu jawaabeen. Waa Mirtuugo, Shabeellaha Dhexe. “Jidka Jawhar aada noo tilmaama,” ayuu ku celiyay. Meel dhinaca bariga ah jid cadde ka bidhaamayay bay gacanta noogu fiiqeen. Markii aan xoogaa soconnay baan ku nimid war (haro) lo'du biyaha ka cabto jidkiina halkaas buu ku dhammaaday. Intii aan kala wareegaynnay baa gaari caasi ah oo dhanka tuulada ka yimid bareeg nagu ag qabtay. Wuxuu nagu yiri "waraa meesha waa la idinku dili rabaaye aniga isoo dabakac. Nimankii halkaan idiin soo diray waa ay idin khaldayeen haddana qoryo ayay soo qaateen oo jidka ayay idinku sugayaan.” Waan dabagalnay. Wax yar markii aan soconnayse waxaa nagu bilowday xabbad. Dhawaqa rasaasta iyo iftiinka tareesada ayaa isdhaafay. Kii kursiga hore fadhiyay qaylo iyo ashahaad buu afka qabsaday aniguna hoos baan u dhabbacday, laakiin darawalku gaariga ma istaajin oo kii

naga horreeyay buu daba orday. Daqiiqad ama wax ka yar gudohood baan uga dhex baxnay. Eebbe fadligiis waxba nama gaarin, waxaa se gaarigii aan wadannay ka burburay dhawr daaqadood tan kursiga aan ku fadhiyay ay ku jirto.

Sidii aan u cararaynay waxa aan nimid Mahaddaay, barqadiina Muqdisho. Ilaa hadda waxa aan isweydiiyaa sababta nimankaasi nagu maageen? Haddiise ay rabeen in ay na dhacaan maxay noo dilayaan si dhibyar bay hawshooda u fushan karaan'e? Maadaama aynnaan hubaysnayn. Waxa aan maqlay in tuuladaas Mirtuugo laga beddalay oo Mirtaqwo loo bixiyay.

## MUQDISHO

Aan dib ugu noqonno safarkaygi Muqdisho iyo inatareegii aan Gaalkacyo uga soo dhuuntay. Subaxdii labaad waxa aan ka quraacannay Buulobarde oo aan ku xusuusto birihii dhigaysnaa ee buundada Buulabarde taas oo aanan ayada oo kale hore u arag. Ka gadaal maalin dhan oo aan dhalandhoolaynnay habeenkii saddexaad Jawhar baan ku hoyannay barqadii xigtay na Muqdisho ayaan soo galnay. Maadaama aan dhuumasho ku soo baxay habaryartay Ardo Nuur iyo walaalahay oo Muqdisho degganaa waxba kalama ay socon imaanshahayga aniguna ma aqoon halka aqalladoodu ku yaallaan marka laga reebo in aan maqal ahaan ku ogaa in habaryar Baar ubax deggan tahay halka walaalo Benaadir degganaayeen, laakiin nasiib wanaag haweeney baabuur ila saarnayd oo aan wadasheekaysannay baa garatay eeddaday oo Wardhiigley deggan ayna deris yihiin, ayada ayaana aniga

iyo Ciid gurigii eeddo na gaysay. Eeddaday Nuuro Diini ayada oo yar bay Mudug ka dalaabtay dib dambe na uguma noqon. Hadda waa waayeel suuqa Bakaaraha ganacsi ku leh. Markii ay Mudug ka tagaysay aniga aabbahay iyo hooyaday isma qabin, sidaas darteed maqal ma ahan'e weligay ma arag eeddo Nuuro, balse indhaheeda buluugga ah, dubkeeda cad, sanqaroorkeeda iyo foolkeeduba waxa ay i xusuusiyeen aabbahay oo xanaaqsan oo matoobaddiisi soo dhawaysanaya si uu ugu halgaado qofka ka xanaajiyay. Haa, aabbe iyo eeddo Nuuro indhahoodu buluug bay ahaayeen sababtana ma ogi. Malaha qorraxdii Mudug baa midabdoorisay.

Gurigii eeddo habeen un baan dhaxay subaxdii xigtayna gurigii habaryar Ardo ayaa la i geeyay.

Ma aanan doonayn in aan joogo guri aan kan habaryartay ahayn, waayo, weligayba waxa aan aad ugu dhawaa una aqaannay reer hooyaday oo reer aabbahay sidaas uma aanan aqoon. Sidaas darteed markii aan Gaalkacyo ka soo

baxayayba socdaalkaygu guriga habaryartay Ardo ayuu ku foognaa.

Subaxdii ayaa waxaa i soo kaxaysay xaaska ina eeddaday oo ii keentay habaryar Ardo oo kaalinteedi shidaalka ee Baarubax ku taallay fadhida. Markii aan guriga eeddo ka soo baxnay ee aan soo lugaynaynay waxa aan ku labbisnaa dharkii aan Gaalkacyo inatareega uga soo raacay: shaati cagaaran oo holof ah, kabo sookal ah oo ciribta ka hoolmay, cimaamad cas iyo hoosgunti dhammaantood dambas u ekeeday boorka iyo siigadii jidka dartii. Intii aan soo lugaynaynay waxaa indhahaygu qabteen wiil shuluq ah oo fadhiya bannaanka hore ee fillo qurux badan iyo mid kale oo agtaagan. Shuluqu waxa uu ku labbisan yahay shaati cad oo ku dheghan, surweel jiinis ah iyo kabo kooyo ah oo aad u baalashan, madaxuna si qurux badan bu ugu jaran yahay. Shuluqa labbisani waxa uu kan kale u sheegayay in ka yimid Nairobi.
Markii aan eegay inanka buuran ee Nairobi ka yimid labbiskiisa haddana kayga eegay, yaraan iyo hoosayn baan dareemay. Sidii gashaanti soo gashay meel rag badan fadhiyaan oo markii indhihii raggu soo wada

fiiriyeen inta hoos u hogatay socodkii oo ka lumay tallaabada boobsiisay oo kale ayaan dareemay.

Markii habaryar Ardo oo aanan weligay arkin la ii keenay waxaa la joogay dumar badan oo qaarkood qaraabada ahaayeen. Habaryar Ardo waxa ay i soo xusuusiyay Habaryar Astur iyo Habaryar Xaawo oo mar walba oo aan imaado farxad iyo koolkoolin igu soo dhawayn jiray, la joogoodana aan farxad iyo jacayl ku dareemi jiray. Isla markiiba habaryar Ardo waxa ay ka xumaatay in aan weli labbisan ahay dharkii aan Bendar Qaali kala imid oo asaga oo awalba labbis miyi ahaa haddana ku sii muunad iyo muuq beelay safarkii dheeraa. Ayada oo wejigeeda caro ka muuqato ayay tiri “oo islaanta eeddada ahi maxay calallada kaaga soo beddali wayday?” isla markiiba inta ay i wadday bay i geysay dukaan laamiga qarkiisa kale saarnaa ninkii iibinayayna ku tiri “war wiilkaan ii sii macwis, funaanad, shaati iyo kabo.” “ma hadda ayuu kooyay?” buu yiri asaga oo isla markaa qiyaasaya cabbirka shaatigayga. “Ardooy ninka maad surweel u gelisid?” buu sii raaciyay. “war ninkani waa wadaad, surweel iyo afaarahaas ma yaqaane,” ayay ugu

warcelisay. Habaryar waa runteed meesha aan ka mid ninkii luungadheere (surweel) xirta waxa uu la mid yahay nin diinta ka saaqiday (kutubba-xoor). Habaryar Ardo oo malaha niyadda ku haysay kelitalisnimada wadaaddada Suufiyada Mudug iyo cunaqabataynta ay ku hayaan dhallinyarada ayaa i waydiisay in aan soo dhuuntay iyo in la i soo fasaxay. Si ka fiirsi la'aan ah ayaan ku iri "waa la i soo fasaxay." beentaas aan sheegay labo beri ka dib baa la soo qabtay markii habaryar Astur oo welwelsani ay habaryar Ardo soo wacday una sheegtay maqnaanshahayga. Aad baan uga qoomameeyay beentii aan habaryar u sheegay.

Bal imminkana aan wax yar faalleeyo waxii aan Muqdisho kala kulmay.

Inta aynnaan soo gaarin koontaroolka waqooyi ee magaalada laga ballaysimaba waxa aan dareemay isbeddal wayn oo aanan asaga oo kale horay u arag: tirada baabuurta iyo dadka laamiyada yaacaya ayaan la indhadaraandaray. Dhismayaasha faraha badan iyo dhirta badan ee magaalada ayaa ayaguna lama filaan igu noqday.

Wax walba oo aan subaxaas indhaha saaray la yaab bay igu noqdeen. Guryaha iyo dhismayaashu ka qurxoon kana dhaadheer oo ka fidsan kuwii aan arki jiray. Baabuurtu ka tirabadan kana qurux iyo noocyo badan kuwii aan arki jiray. Dadku ka dhalaal iyo labbis qurxoon kuwii aan arki jiray. Magaaladu ka baaxad wayn umana dhowa Gaalkacyadii aan aqaannay, Bendar Qaalina warkeedaba ha soo qaadin. Waa sidaas oo aanan weli arkin hal meel oo ka mid ah haddii Muqdisho labaatan qaybood loo dhigo. *Nin aan dhul marin dhaayo ma leh.*

Waxa kale oo aan la yaabay sida iyo qaabka dadku u hadlayaan. Ka duwan oo ka jilicsan kana qaylo iyo dhiillo yar sidii looga hadli jiray halkii aan ka imid. Durba waxaa ii muuqday jaadgoonimadii Muqdisho uga duwan tahay magaalooyinka kale ee Soomaalida. Habnololeedka dhaqan-dhaqaale ee Muqdisho iyo sida ay si dhib yar ugu qaabayso martideeda cusub waxaa si qurux badan buuggiisa *Mogadishu Memoir* ugu dhigay Xasan Abuukar. Asaga oo taas ka hadlaya Xasan Abuukar waxa uu yiri "*There is something magical about Mogadishu. The city has the capacity to shape its residents, regardless*

*of thier background. It molds them as time goes by and exposes their softer sides."*

Mindhaa taasi waa sababtii aan imaanshaheeda muddo dheer ugu hamminayay aniga oo jooga fogaan u jirta in ka badan 700km oo duulal qarsoon baa aniga oo Mudug jooga dhagta iigu sheegay Muqdisho iyo sheekadeeda la yaabka leh. Taasi aniga keligay iguma ahayn ee lixdankii sannadood ee u dambaysay kontonkii hore Soomaalidu meel walba oo ay geyiga Soomaaliyeed ka joogto indhahoodu Muqdisho ayay ku foognaayeen. Boqollaal kun baa halkan u soo hayaamay si ay nolol ka duwan middii ay ku noolaayeen uga sameeyaan. Degaanno dhan baa hayaankaas dartiis u haawaday. Qoysas badan baa habeen madow waayay wiilashii geela u raaci jiray iyo gabdhihii ariga u jiri jiray. Waana sababta ninkii reer Mudugga ahaa u yiri *ninkii Xamar tagay Xaj u ma laabnee, Xaawow aniguba Xaaji baan ahay.* Tuulooyin badan iyo magaalooyin dhan baa magaaladaan darteed u hagaasay. Balse, subaxaas Muqdisho xaqiiqada ay ku sugnayd iyo waxa ninkayga koytada ah u muuqday kaaf iyo kala dheeri ayay ahaayeen. Waxaa jirtay run iyo

xaqiiqo iga daahsoonayd oo indhahayga iyo garashadayda gaabani aysan arki karin, laakiin ay waqti aan dheerayn ku baraarugi doonaan.

Aad bay u kala fogaayeen Muqdishadii qarnigaan dabada jeediyay badankiisa ay darteed gobollo iyo magaalooyin badan oo Soomaaliyeed u faaruqeen iyo Muqdishada aan subaxaas inatareega uga degay. Iskadhaaf qof Muqdisho joogay maalmeheedi dahabiga ahaaye (1960, 1970, iyo 1980yadii) waxaa subaxaas haddii uu i arki lahaa igu qosli lahaa Ibnu Batuuta oo Muqdisho iga ga soo horreeyay in ku dhow 700 oo sannadood. La yaabse ma ahayn in aan la yaabo Muqdisho, waayo, sidaas aan ula yaabay buu Ibnu Batuutaba u la yaabay ilaa uu waynankeeda iyo fidsanaanteeda ku tilmaamay mid aan dhammad lahayn.

Waxa ii muuqday oo aan la indhadaraandaray waxa ay ahaayeen hambadii ka hartay Muqdishadii waynankeedu uusan dhammaadka lahayn cahdigii Ibnu Batuuta oo qarnigii labaatanaad inta sii labalixaadsatay maalmihii aan dhashay figta sare gaartay. Malaha, waxyaabaha Muqdisho ka sinnayd maalintii uu Ibnu Batuuta doonta ku

yimid iyo subaxii aan inatareega ku imid waa suuqii waynaa ee Ibnu Batuuta ugu yimid oo inta sii ballaartay noqday kan ugu wayn Bariga Afrika; iyo hilibkii, bariiskii iyo qudaartii tirada badnayd oo aniga iyo asaga ay isku si inoogu soortay. Waxa kale oo sii bulaalay xiriirradii ganacsi ee Muqdisho la lahayd Careebiya, Eeshiya iyo Afrika si malyuun jeer ka badan sidii uu Ibnu Batuuta ku ogaa. Inkasta oo dahabkii ay Muqdisho shubi (dhalaalin) jirtay waqtigii Ibnu Batuuta ay subaxii aan imid dibadda ka soo iibsan jirtay. Waxa kale oo xirnaa dekaddii Muqdisho ee Al Idiriisi ku tilmaamay "dekad wayn oo isku xirta ganacsiyada bariga iyo galbeedka Badweynta Hindiya.[25]

Waxase la yaabka lahaa waa in Muqdishadii dawladda ahayd ee Suldaan Abuu Bakar Ibnu Shiikh Cumar madaxda u ahaa 700 oo sannadood ka hor ay subaxaan u qaybsanayd tobaneeyo hoggaamiye-kooxeed iyo qabiillo midiba daan fadhiyo. Ciidankii halka talis lahaa ee

[25] Fiiri buugga *The invention of Somalia,* bogga 6aad.

salaanta iyo jaantana isla hayay maalmihii Ibnu Batuuta Suldaanka Muqdisho martida u ahaa waxaa beddalay malleyshiyo qabiil iyo burcad horor ah. Maxkamaddii iyo Qaaddigii garta goynayay ee Ibnu Batuuta hor fariistay waxaa beddalay qoriga AK47 ee Ruushku suubbiyo.

Hase ahaatee, miskiinkaygan yar ee koytada ah waxaas oo dhani uma muuqdaan. Indhahaygu ma arkaan waxa aan ahayn dhalaal, qurux iyo wanaag. Taasina ma ahan wax lagula yaabo gaban yimid kobtii keli ahayd ee muunad iyo muuq magaalo (the only cosmopolitan) lahayd dalkiisa oo dhan, inkasta oo waxa u muuqdaa yihiin hambadii iyo jabadkii ka haray magaaladaas, waayo, Muqdisho ayada oo sidaas u burburtay bay haddana dalka intiisa kale weli dhaantay oo maal iyo muunadba uga horraysay. Malahayga taasi waaba sababta ay dhibtu ugu raagtay.

Si walba ha ahaatee, muddo yar ka dib waxa aan ku baraarugay xaqiiqda dhabta ah iyo waayaha runta ah ee ay Muqdisho iyo dadkeedu dhexjibaaxayaan. Ogaaday oo arkay Muqdisho iyo muuqaalkeeda runta ah ee ay beryahaas ku sugnayd oo aan caad ismarin. Soo taabtay

salka xeeradii aan Mudug uga soo dalaabay. Dhadhamiyay miraha geed-qaraarkii hoggaamiyayaashii Soomaalidu ku beereen guriga buurta ka dhakoola ee dhanka bari iiga muuqda, ayaga oo dacar ka qaraar.

Noloshayda markii ugu horraysay indhaha saaray qof dhintay, dhintay keliya ma ahan'e hortayda ku qurbaxday ka dib markii tareeso leeftay. Fiiriyay, oo inta iri “Alla waa uu dhintay!” haddana iska sii watay fiiqsiga koobkii shaaha ahaa ee caanageelka lagu caddeeyay. Qabuuraha ku soo daray ruux saacado ka hor ila qoslayay. Aniga oo aan qiblayn iilna u qodin ciid ku soo rogay kana soo dhaqaaqay qof saacad ka hor xayi ahaa. Waa halkii Abwaan Abshir Bacadle ka lahaa:

*Dariiqyada waxaan kaga dusnaa, daa'imow magane*
*Nin waliba halkii dani dhigtaan, kaga dareernaaye*
*Sidii maydka loo duugi jiray, haatan laga daaye*
*Iilkii daboolna ma jiro, ama dahaarnaaye*
*Naf baa diidday luxudkoo god baan, dalaq ku siinaaye*
*Afkaan ciidda kaga daadinnaa, kana dareernaaye.*

Waxa aan xusuustaa oo aan weli dareenkayga ka tirmin Maxamed Dalabshaan oo ka mid ahaa darawallada baabuurta caasiyada ah ee jaadka ka soo qaadi jiray garoonnada nambar konton (kilometer 50) iyo Dayniile oo subax aroortii asaga oo faraxsan naga ga tegay garaashkii iyo kaalintii shidaalka ee habaryartay Ardo ku lahayd Baarubax saacado ka dib na maydkiisa oo Xaaji-Khamsiin saaran na loo keenay. Mooryaan marqaansan oo hubaysan baa iridda hore ee garoonka nambar konton sabab la'aan ugu toogtay. Maxamed waxa uu ahaa aroos beryahaas aqalgalay. Markii maydkiisa la geeyay guriga hooyadiis, waxaa weli ii muuqda Maxamed aabbihiis, Dalabshaan, murugtii foolkiisa ka muuqatay. Inkasta oo aabbahaas wejigiisa ay ka muuqatay murugta iyo caloolxumada uu ka qaaday geerida wiilkiisi curadka ahaa haddana waxa uu u muuqday nin bilaa shuruud ku aqbalay dhimashada taas oo uu kala mid ahaa qof walba oo maalintaas Muqdisho ku noolaa. Aniguna xaqiiqdaas oo subaxii aan Muqdisho imaanayay iga daboolnayd baan si tartiib-tartiib ah ayada oo qaraar u laqay.

Muqdishada aan imid waxaa xukumayay oo ay u kala xirnayd hoggaamiye-kooxeedyo waxa ayna ahayd meel jaantaarogan ah iyo meel bini'aadan ku noolaado tan ugu xun. Malleyshiyo beeleedyo hubaysan oo wata Cabdibilayaal qoryo ku rakiban yihiin baa jid walba jidkooyo iyo isbaaro u taallay. Malleyshiyaadkani waxa ay daacad u ahaayeen hoggaamiye-kooxeedyada magaaladu u kala qaybsanayd.

Waxaa caadi ahayd maqalka dhawaqa rasaasta iyo aartilleriga, iyo in aad aragto maydka qof dhintay oo jidka yaalla. Waxa aan xusuustaa galab aniga iyo koox aan isku iskool ahayn, annaga oo fadhinna maqaayad shaaha laga cabbo oo jidka soddonka ku taallay afkana ku hayna shaah caanageel lagu caddeeyay baan u jeednayd nin gacanna bastoolad ku haysta gacanta kale na hoosguntiga darafteeda ku haysta oo laamiga bartankiisa ordaya. Waxaa kulmay araggii aan ninka indhaha ku dhufannay iyo dhawaaqa xabbad dhacday, iyo ninkii oo dhulka ku dhacay. Ma sheegi karo in aan ka baqnay in nala toogto iyo in aynnaan kala jeclayn'e, u ma aynnaan dhaqaaqin ninkii xabbadda la kabbiyay, waxa se aan habeenkii

maqalnay in ninka ay toogteen saaxiibbadiis ay isku dagaaleen lacag leejo ah oo ay faashleyda jaadka laamiga ku iibiya ka qaateen.

Dhaca, isbaarada iyo dilkuba waxa ay Muqdisho ka ahaayeen wax iska caadi ah oo nafta iyo indhuhuba iska la qabsadeen dadku na aqbaleen oo qabatimeen.

Maalin kale waxa aan arkay nin mayd ah. Waxaa la ii sheegay in ninka dhintay uu bastoolad ku baaranayay (dhacayay) dadka suuqa Bakaaraha ka soo baxaya iyo kuwa gelaya, laakiin waxaa toogtay nin bastoolad ku hubaysnaa oo uu damcay in uu baarto. Miskiin! Maalintaas ma ahayn maalintiisi, qof khaldan buu ku aaday goor khaldan. Ka dib saacado badan oo maydkiisu laamiga yaallay, waxaa gaarigacan u qaaday nin kale mana ogi meel uu la aaday

Dhaca iyo dilalka magaalada ka dhacayay waxa ay ahaayeen kuwo xargaha goostay oo aan hal qoraal iyo xusuus lagu koobi karin. Yeelkeed'e, waxa aan isku dayayaa in aan sadarrada soo socda ku soo gudbiyo dhawr

dhacdo oo xusuustoodu aysan weli iga go'in kuwaas oo tusaalaynaya nabadgelyaxumadii magaaladu dhexmaquuranaysay. Dhacdooyinkaas qaarkood waa kuwo xanuun badan oo marag u ah naxariis la'aantii iyo bahalnimadii ka dhalatay dagaalladii sokeeye iyo dhaqankii dawlad la'aanta ee dalka ku baahay. Dirirtii sokeeyaha iyo dawlad la'aantii; macluushii iyo abaarihii baabi'iyay dhaqaalihii iyo waxsoosaarkii awalba iska yaraa ee dalku waxa ay dadkii u yeeleen dhaqan dugaagnimo. Dadka badankiisa waxaa ka guuray dareenkii dadnimo iyo naxariistii bini'aadanimo iyo tii islaanimo. Qoriga iyo madfaca ayaa amiirro ka noqday magaalada sida dalka badankiisuba ahaa. Qoriga ayaa noqday garsoore, dacwadooge, iyo boliis iyo millateriba. Xaalku waxa uu ahaa *ninkii xoog leh baa xaajo u toostaa.* Ninkii aan qori haysan iyo kii aan qabiil xoog leh ka dhalani waxa ay magan u noqdeen mooryaan marqaansan oo dacas gashan oo qori AK47 ah jeeniqaaran. Taas macneheedu ma ahan in dadka qabiillada hubaysan ka dhashay ay dilka iyo dhaca iyo musiibada dagaallada ka badbaadeen. Waxaaba la oran karaa ayaga ayaa dhimashada uga badnaa kuwa aan qabiillada hubaysan ka

dhalan, sababtoo ah, qabiillada hubaysan qudhooda ayaa ahaa kuwa dagaallamayay oo dhimashada ugu badani haleelaysay. Iskadhaaf wax kale'e kuwa qoryaha haysta qudhooda ayaan ka badbaadi karayn balaayadii magaalada ka oognayd. Qofkii Eebbe ka badbaadiyo mooryaanka marqaansan iyo jirrida hubaysan ee magaalada gabaarageddinaysay waxa uu halis ugu ku jiray madfac habaw ah iyo xabbad wiifto ah.

Foolxumadii dagaal-beeleedyadu magaalada badeen dib baan ugu soo noqon doonaaye bal aan isku dayo in aan qalin ku suureeyo dhacdooyin uurkutaallo lahaa oo aan marqaati ka noqday kuwaas oo ilaa hadda aan xusuustayda ka libdhin.

# QALASHADII MAXAMED-SAWIR

Waxa uu ahaa nin dheer oo xoog iyo lixaad leh da'diisuna qiyaastii ahayd dhammaadka da' labaatanaad ilaa bilowga da' soddonaad. Waxaa abti u ahaa nin ganacsade caan ahaa oo ka mid ahaa ganacsatada jaadka Kenya ka keenta, sidaa oo kale na lahaa xafiisyo tigidhada diyaaradaha laga goosto. Laakiin, dadku waxa ay ugu yeeri jireen ama ku xaman jireen in Maxamed-Sawir wacal (garac) ahaa. Kuma aysan xaman jirin keliya ee qaarkood baa si toos ah ugu sheegi jiray in uu wacal yahay. Intaas uga ma aysan harin’e waxa ay ugu yeeri jireen magacyo kale oo liidid iyo cunsuriyad ah waxaa na loo la dhaqmi jiray sidii in uu yahay qof “second class” ah. Ma hubo in Maxamed wacal ahaa iyo inkale, balse sida loola dhaqmi jiray, iyo sida uusan marnaba garab uga helin abtigiis iyo qaraabada kaleba waxa ay igu dhaliyeen in aan rumaysto in Maxamed aabbe-laawe ahaa, maadaama Soomaalidu sidaas gurracan ee naxariis la'aanta ah ula dhaqmi jireen

ubadka aabbe-laawayaasha (aabbayaashood la aqoon) ah. Carruurtaasi waxa ay ahaayeen looma-ooyaan magan u ah dhaqan gurracan oo cunsuriyadda iyo naxariis la'aantu biyadhigteen. Waxaa loo la dhaqmi jiray (ilaa haddana loola dhaqmaa) sidii in ubadkaasi dambilayaal yihiin oo kale dadkana waxa aad mooddaaba in ayba rumaysteen in carruurtaasi sino ku dhaceen. Haddii nin iyo naag meher la’aan isku tagaan dababadeedna faaxishadoodi ilmo ka abuurmaan, ma ninkaas iyo naagtaas baa dambilayaal ah mise ilmaha? Habdhaqanka Soomaalidu waxa uu u eg yahay mid naagta iyo ilmaha miskiinka ah dambilayaal u aqoonsan, halka ninku lamataabtaan yahay.

Maxamed waxa uu xammaali ka ahaa sharikad jaadka keeni jirtay oo abtigiis lahaa laakiin waxa uu u noolaa sidii qof darbijiif ah oo kale inkasta oo abtigiis iyo qaraabadiisu magaalada guryo waawayn ku lahaayeen. In badan baan arkay Maxamed oo seexanaya garaash baabuurta lagu xareeyo.

Waxa aan xusuustaa ammin aroor hore ahayd mar ciyaal darbijiifyo ahaa sidaa oo kalena koolladhuuqyo ahaa ay Maxamed-Sawir abtigiis u yimaadeen ayaga oo dacwo ka ah Maxamed-Sawir, waxa ayna u sheegeen in “xalay" Maxamed-Sawir dabaguray (sexual assault) wiil darbijiifyada ka mid ah. Wiilka sheegtay in Maxamed-Sawir dabaguray waxa uu ahaa aalkolayste caan ka ahaa aaggaas magaciisuna ahaa Boqoljirow. Boqoljirow waxa uu ahaa dagaalyahan fongoran, sidaa oo kalena ah madaxa kooxda darbijiifyada ah ee Maxamed-Sawir abtigiis u dacwoonayay. Maxamed-Sawir abtigiis si caro leh ayuu darbijiifyadii ugu yiri “waxba igama gelin, haddaad rabtaana dila.” Maxamed-Sawir ammintaas waxa uu agtaagnaa oo sugayay in uu fuulo (raaco) gaari caasi ah oo abtigiis lahaa kaas oo u socday garoonka diyaaradaha nambar konton. Boqoljirow iyo kooxdiisi oo ku hubaysan toorreeyo iyo sakiinno waxa ay weerar ku qaadeen Maxamed-Sawir oo inta ay ku goobteen dhulka dhigeen ka dib na waxa ay bilaabeen in jirkiisa gaar ahaan wejigiisa sakiin ku dildilaaciyaan. Waxa ay u qaleen sidii in ay yihiin dhakhaatiir inta qof bukaan ah sariirta saaray qalliin ku samaynaya. Cabaadka iyo oohinta Maxamed-

Sawir qof walba oo subaxaas halkaas joogay (abtigiisna ku jiro) waa maqlay, waxaase la yaab lahayd in aan qofna u dhaqaaqin oo isku dayin in uu aalkolaystayaasha ninka cunaya ka fujiyo ilaa abtigay Alle keenay kaas oo ka gaaray oo ka kiciyay. Malaha, haddii aan abtigay imaan lahayn Maxamed subaxaas waa Alleysan lahaa.

Maxamed dhaawacyo culus oo kuwo wejigu ugu darnaayeen baa gaaray, balse ma ahayn kuwa halis ku ah noloshiisa. WEjigiisa oo dhan dhiig baa qariyay. Abtigay ayaa geeyay farmashi (pharmacy) meesha ku yaallay, kaas oo faashado ku soo duubay. Ma jiro qof caddayn karayay runnimada eedaynta uu Boqoljirow ku soo oogay Maxamed mana jirin cid sii dabagashay xaqiijinta eedayntaas.

Bilooyin ka dib Maxamed wejigiisa waa ay ka sii muuqdeen haarihii weerarkii subaxaas. Dabadeed, dhawr bilood dhacdadaas ka dib, nin ka mid ahaa mooryaantii hubaysnayd ee aaggaas ka talin jirtay baa maalin ku dooday in Maxamed ka xaday maryo. Ninka mooryaanka ah oo qaraabo dhow la ahaa Maxamed abtigiis, kuna

qayili jiray balbalo (buush) meesha ku yaallay, marmarna garaashka baabuurta lagu xareeyo seexan jiray (waardiye ahaan) garaashkaas oo Maxamed qudhiisu habeennada qaarkood seexan jiray, waxa uu ku dooday in Maxamed dharkiisi xaday, xalay mar uu hurday. Mooryaankii oo aad u xanaaqsan qoriga AK47 ahina garabka u suran yahay, iyo saaxiibkiis maalintii oo dhan waxa ay daydayayeen Maxamed. Goor casarkii ah bay heleen Maxamed oo hortaagan dukaan laamiga qarkiisa saarnaa. Mooryaankii wax kaleba Maxamed ma uusan waydiin'e inta uu qoriga ammaankiisa furtay buu shan xabbo ku tiriyay, Maxamedna dhulka lama dhicin naf, halkii ayuu si deg deg ah ugu qurbaxay.

Miskiinkii Maxamed ahaa ee aabballaawaha lagu sheegi jiray halkaas buu aakhiro ugu hoyday. Waxa aan qiyaasayaa in uusan u darsan dunidii uu ku caddilnaa, sidaasna uu uga raystay naxariis la’aantii iyo cunsuriyadda kuwii dad ugu sokeeyay. Maxamed waxaa isla galabtiiba qabuuraha geeyay abtigiis mooryaankii dilayna maalintii xigtay waxa uu si dareen la'aan ah ugu qayilayay balbaladii.

Waxa ay ahayd dhacdo argagax iyo afkalaqaad leh, qof walba damiir dadnimo lehna habeenno badan hurdada u diidaysay. Ninkii la socday Mooryaankii Maxamed dilay oo aan garanayay, ahaana nin aan ka mid ahayn mooryaanta hubaysan baan mar waydiiyay “sababta uu qayb uga noqday dambigaas foosha xun”. Waxa uu ku dooday in uusan marnaba filayn in mooryaanku Maxamed dili doono, haddii uu sidaas ogaan lahaana uusan raaceen. Waxa kale oo uu ku dooday in uu aad uga naxay ugana qoomameeyay falkaas.

# FARUUROW FADUUL BAA LAGU DILAY

Waxa ay ahayd dhacdo xanuun badan, argagax leh, inkasta oo dhawr iyo toban sannadood ka soo wareegtayna weli aan qalbigayga ka go'in. Mar walba oo aan soo xusuusto waxa aan ka argagaxaa bahalnimadii kuwii Faruurow dilay iyo dullinimadii dadkii xaafadda degganaa.

Waa Muqdisho iyo horraantii 2002, xaafadda Baarubax meel dhawr boqol oo tallaabo u jirta masaajidka Nasruddiin. Qoys xaafadda degganaa ayaa gabaryar oo saddex jir ahi ka luntay. Meel kasta waa laga raadiyay, waa la waayay. Saddex maalmood markii la la'aa ayaa maalintii afaraad meydkeeda oo la ceejiyay laga helay gudaha guryo dumay oo xaafadda ku yaallay.
Dadku waxa ay ku sheekaysteen in gabadha yar la kufsaday xubno jirkeeda ka mid ahna lala baxay. Anigu se ma hubo in warkaasi run ahaa iyo inkale. Waxaase

xaqiiq ahayd meesha gabadha meydkeeda laga soo saaray in aysan ahayn meel ay fuuli/kori kartay ama geli kartay, sidaas darteed meydkeeda ayaa lagu tuuray meesha ama ayada oo naf yari ku hartay.

Ma ogi qofkii bilaabay'e waxaa xaafadda dhexqaaday oo la isla dhexmaray in gabadha uu dilay nin xaafadda alaabo wareejin jiray, waa kuwa beddal-beddalka loo yaqaan. Waxa uu ahaa nin dheer oo madow oo tin adag bushinta sarena uu ka muuqdo tolliinka dillaac (faruurnaan).

Dadku waxa ay qabiilkiisa ku sheegeen Jareeer mase hubo in uu Jareer ahaa. Maalintii gabadha meydkeeda la helay subaxdii ka dambaysay goor barqadii ah baa aniga iyo abtigay oo quraac cunaynaa maqalnay rasaas dhacday. Bannaanka haddii aan u soo baxnayba dadkii waxa ay ku sii yaacayaan meel halkeer ah. Dadkii ayaan ka daba orday. Markii aan jid caddaha horay ugu sii orodnay qiyaastii labo boqol oo mitir waxa aan tagnay meel dad badan dhooban yihiin.

Waan soo sheeko dhaafay’e, meesha dadku dhooban yahay konton mitir ka hor baa waxaa iiga horyimid nin qori AK47 GEESLAAB ah laalaadinaya. Ninka hoosguntigiisa waxaa ku firdhisan dhiig iyo walaxo cadcad oo aanan markii hore fahmin balse aan dib ka ogaaday in ay ahayd maskax bini'aadam oo qaraxday.

Ninka qoriga laalaadinaya waxa uu ka mid ahaa ciidan madani ah oo xaafadda loo qoray si ay tuugada uga ilaaliyaan. Waa aan dhaafay ninkii qoriga laalaadinayay oo waxa aan tagay meeshii dadku dhoobnaayeen mise waxaa dhulka yaalla nin garbaduub u xiran oo madaxiisa inta kore fuqday. Dib baan u soo noqday waayo indhaha ku ma sii hayn karin sida naxariis darrada ah ee madaxiisa rasaastu u burburisay.

Ninka meydka ah waxaa u soo baxbaxsanayay (fagfakanayay) oo laga celinayay nin da' ahaan aan ku qiyaasay 45-50 gu', waxa uu gacanta ku sitay xarig ama suun, ma xusuusto laakiin midkood un buu ahaa. Waxaa la ii sheegay in uu ahaa gabadhii yarayd aabbeheed.

Daqiiqo kadib habaryartay baa inta na canaanatay meeshii naga ceyrisay oo guriga ayaan dib ugu noqday.

Ma hubo cidda meydkii Faruurow soo aastay, balse galabtii mar aan meesha soo maray ma oollin qof kalena ma joogin. Layaabkuse waxa uu ahaa ninkii dilay Faruurow iyo saaxiibbadiis waxa ay galabtii fadhiyeen oo uu si buuq la'aan ah ugu qayilayeen bannaanka dukaankii xaafadda ku yaallay.

Ma arag cid ka hadlaysa dilkii foosha xumaa ee Faruurow iyo dambiga lagu dilay. Yaa soo caddeeyay in uu gabadha dilay? Yaa arkayay? Yaa marqaati ahaa? Haddii uu dilay xataa ma sax bay ahayd in sidaas foosha xun loo dilo? Aaway waxgaradkii xaafaddu? Maxay uga dhiidhin waayeen dulmiga xaafaddooda ka dhacay?
Waxa ay ahayd tusaale kale, foolxumadii iyo dulmigii baahay ee magaaladu la ciirciiraysay.

Dilkii Faruurow waxa uu ahaa fal waxuushnimo oo argagax iyo uurkutaallo miiran ah ilaa haddana mar walba oo aan xusuusto indhahayga illin baa ku soo joogsata.

Ninka Faruurow dilay waxa uu ahaa ruugcaddaa (veteran) ka mid ahaa dhaqdhaqaaqii jabhadaha ee dhawr iyo toban sannadood ka hor magaalada ka eryay kelitaliye Maxamed Siyaad Barre. Waxa uuna madax u ahaa tobaneeyo malleyshiyo hubaysa oo odayaasha iyo waxgaradka xaafaddu u shaqaalaysiiyeen in ay xaafadda nabadgelyadeeda sugaan ka dib dilal iyo dhac baahsan oo xaafadda ka dhacay. Malleyshiyadaas waxaa dadka xaafaddu ku magacaabi jireen *ciidanka madaniga ah.* Inkasta oo tan iyo markii la unkay ciidanka madaniga ay dilalkii iyo dambiyadii kale ee xaafadda ka dhacayay hoos u dhaceen, haddana, dhibaatadu waxa ay ahayd in ciidankaas badankiisu ahaayeen malleyshiyo aan anshax ciidan lahayn awooddooduna ahayd mid aan dabar iyo xakame celiya lahayn.

Subax kale waxa aan ku soo kacay cabaad iyo oohin aad u dheer. Markii aan qolkii irid-bannaanka ahaa dibadda uga soo baxay waxa aan indhaha ku dhuftay ciidankii madaniga, gaar ahaan ruugcaddaagii Faruurow dhakada fujiyay oo ul dheer ku garaacaya nin duruuf iyo diif ba'ani ka muuqato oo garbaduub u xiran (jeebbaysan). Ninku

waa nin maskaxda looga jiro oo darbijiif ah oo aan ku arki jiray asaga oo jidadka lugaynaya. Aniga oo yaabban xanaaqna kax ah ayaan ruugcaddaagii ku iri “miyaad waalan tahay? Maxaad sidaan ugu galaysaa miskiinkaan xanuunsan ee haddana darbijiifka ah? Sidee se ku garan waydeen ninkaan jidadka xaafadda caanka ka ah?” Ruugcaddaagii waxa uu ku dooday in ninkaani tuug yahay, balse, ugu dambayn waa uu iga aqbalay in uu garaacista ka daayo miskiinka xanuunsan garbaduubkana ka furo.

## BALLANTII SAMAARA

Sidii aan horay u soo sheegayba waxaa magaalada joogto ka ahaa oo nolol-maalmeedka ka mid noqday dhaca, isbaarada, dilalka iyo dagaallada u dhaxeeya mooryaanta haybta abtirsiinwadaaggoodu heer jufo iyo heer jilib u sii kala dhambalmay.

Marka laga soo tago isbaarooyinka daadsanaa dhammaan goobaha muhiimka ah ee magaalada iyo isgoysyada waawayn ee jidadka halbawlaha ahi isku dhaafaan, waxaa caadi ahayd in adiga oo suuqa iska maraya mooryaan hubaysani qori ama bastoolad kugu qabto ka dib na ku baarto.

Maalin baa habaryar Ardo igu dartay islaan dhanka hooyada ay habaryar (iyo dabcan hooyo) qaraabo ahaayeen derisna nala ahayd si aan suuqa Bakaaraha uga doonno adeeggii Ciidul Adxaa oo maalmo ka

dhimmanaayeen. Shaqadaydu waxa ay ahayd in aan lacag dhawr milyan oo Shilin Soomaali ah islaanta la qaado. Waayahaas qiimaha sarrifka Shilin Soomaaligu sagxadda ayuu joogay oo boqolkii ($100) doollar waxa uu u dhigmay saddex milyan (3 milyan) oo Soomaali ah.

Aniga iyo islaantii sagaal milyan baa qofkiiba afar milyan iyo bar isku miineeyay (isku miinayntu ma ahan suunkii qarxayay ee naftooda-halligayaasha ee waa qaab Shilin Soomaaliga oo labo-labo boqol isugu xiran qofku dharka uu gashan hoostiisa ugu qarin jiray maadaama aan jeebabka lagu qaadi karin, ama laga baqayay in haddii jeebabka laga geliyo ay indhaha tuugada soo jiidato).

Aan suuqii galnayba goor aan maraynno qaybta hilibka ee suuqa, waxaa dhacay wax aan ilaa hadda la yaabban ahay degdeggii ay ku dhaceen. Islaantii oo dhawr tallaabo iga horraysay baan hal mar arkay ayada oo gacmaha kor u taagaysa naxdinna la gariiraysa, isla markaas waxaa indhahaygu qabteen nin madow oo bidaar leh oo qori AK47 ah dhanka islaanta u soo fiiqaya isla markaana sii dibuguryaynaya wax yar ka dib na dadweynihii tirabadnaa ee suuqa dhex dillaamayay buu ku dhex lumay.

Markii ninkii ku dhexmilmay dadkii sida daadka suuqa u dhexdillaamayay baan ogaaday in ninku la tagay afartii milyan iyo barkii islaantu isku miinaysay. Waxa aan la yaabay sida dhibka yar ee shanqar la'aanta ah ee ninku maamada u furtay. Waxa aan ninkaas u qiray in uu ahaa mooryaan shaqadiisa si wacan u yaqaan oo furashada islaamaha shahaado sare ku qaatay.

Dhacdadani waxa ay i xusuusisay dhacdo kale oo sidaas shanqar la'aanta habo Ardo loogu furtay.
Waxa ay saarnayd bas ka mid ah basaska dadweynaha waxa ay na u socotay isbitaal markii uu nin soo fariistay kursigii ay fadhiday kan ku dhegganaa. Raacista basaska Muqdisho ma ahayn mid lagu raaxaysto waayahaas. Boholaha waddooyinka ka qodmay baa baska ka dhigayay mid hadba gees u liicaya, taasina waxa ay caadi ka dhigtay marka aad baska saaran tahay in dadka dhinacyada kaa xigaa hadba kugu soo liicaan oo isriixriixitaanka iyo isbuurashada rakaabka basasku waa aqbaleen wax dhib iyo dareen ahna ka ma qabin. Sidaas darteed, buu ninkii fadhiyay kursiga habo Ardo ku dheggani dhawr goor xaggeeda ugu soo liicay oo dhan u

buusay, balse, liicitaankani ma ahan kii dabiiciga ahaa ee godadka laamiga ka qodmay sababayeen, waxa se uu ahaa mid ku talagal ah oo siri ku hoos jirto. Habo Ardo oo aan wax dareen ah ka qaadin liicista ninka ayaa hal mar ku baraarugtay bastoolad bawdada looga hayo. Markii ay ogaatayna si tartiib ah ayuu ugu yiri “soo siib faraantiga" ayaduna si degdeg ah oo dhaganuglaan ah ayay ku siibtay faraantigeedi dahabka ahaa. Dabadeedna si shanqar la’aan ah oo aan xataa rakaabkii kale iyo darawalkii midkoona dareemin buu baskii fataq uga yiri.

Tuug faraanti kaa siibtay iyo mid dhawr milyan oo Shilin Soomaali ah kaa dhacayba i qarso ayay ahaayeen marka la barbardhigo balaayadii magaaladu dhexmaquuranaysay. Dhimashadu waxa ay ka mid ahayd nolol-maalmeedka dadka Muqdisho ku noolaa. Qabiil hubaysan ka dhalo ama mid aan hubaysnayn ka dhalo’e waxa aad mar walba qarka u saanayd in sabab la'i lagu gu dilo. Dilalka xeer la’aanta (extrajudicial killings) ahi wax caadi ah ayay ahaayeen. In madfac habaw ahi adiga oo jiifa, adiga iyo qoyskaagaba ku habsado ayaa ayana ahayd wax goor walba la filan karo. Haddii aad ka dhalatay

qabiillada aan hubaysnayn iyo dadka looma-ooyaanka loo bixiyayna waxaa kuu dheerayd in mooryaanta hubaysani hortaada ku kufsan karaan hooyadaa, walaashaa iyo gabdhahaaga weliba ay dil ugu daraan haddana aan cidina nabad ma sheegtay ku oran. Sababtu na waa in aan mooryaanta cidi xukumin oo xataa hoggaamiye-kooxeedyada ay magac ahaan iyo qabiil ahaan hoostagaani xukumin. Ku sii darsoo, mid walba oo mooryaanta hubaysan ka mid ahi gaarkiisa ayuu u madaxbannaanaa oo ayaga ayaan isxukumin. Waxaa taas la mid ahaa qabiillada oo jufo aysan jufada kale xukumin oo inkasta oo ay hal oday ku abtirsadaan haddana ayaga qudhooda ayaa cadow isku ahaa oo dagaallami jiray. Marka keliya ee ay midoobaadaan waa marka qabiil kale oo aan ku abtirsi ahayni la collaytamo. Sida uu Rashiid-Gadhweyne ku qoray buuggiisa *Qaran Iyo Qabiil Labo Aan Isqaban* sidani waa dhaqankii reerguuraaga xoolaraacatada ee qoys-qoyska iyo jufa-jufada ku dhisnaa oo magaaladii oo dawlad la'aan ah la keenay.

Diriraha qabiilladu waxa ay gaareen heer aad u xun. Qabiil walba asaga ayaa jilibyo iyo jufooyin u sii kala

soocmay ka dib na gawda iska saaray. Dhaqanka beelaysiga ku dhisan ee Soomaalidu waa mid yaab leh. Waa dhaqan abtirsiinwadaag (abtir) ah oo sida basasha u sii kala dhanbalma ilaa kuwa isu aabbaha ahi bah-bah u sii kala baxaan, dawlad la'aantii dalka ka dhacdayna waxa ay sii fududaysay in dhaqankaas abtirsiinwadaagga iyo reer hebelnimadu sii baaho. Waxa ay u ekayd in dadka magaalada ku nool oo dhan damiirkii dadnimo iyo kii Islaanimaba laga siibay, waayo, waxa dulmi iyo foolxumo magaalada ka dhacayay qofkii arkaa ma rumaysan karin in magaaladaan dad damiir dadnimo leh iskadhaaf'e dad caafimaad ahaan fiyoobi ku nool yihiin baa shaki kaa galayay. Wax walba indho qabiil intii la dhaafiyay baa indha jufo lagu eegayay. Dulmiyihii iyo dilaagii waxa ay dabada la galeen jufo difaacaysa. Waa halkii Abwaan Gaarriye maansadiisi *Dabataxan* ka lahaa:

*Dalka waxa ka soo dhacay*

*Duruustii la barayoo,*

*Daarihii burburay shalay*

*Waxa maanta kaga daran*

*Iimaan darnaantiyo*

*Nabaad-guurka diintiyo*

*Kaga dhacay damiirkoo*

*Dal waxaan ku noolahay*

*Saddexdii dalaaqood*

*Lagu furay dadnimadii.*

*Dal waxaan ku noolahay*

*Runtu arag darraysoo*

*Daaddihi la yidhi been.*

*Hadday dunida ceeb tahay*

*Dus-duskiyo khiyaamadu,*

*Noo dabeecad weeyaan.*

*Nin dillaala mooyee*

*Degmadaan ku noolahay*

*Nin daryeel yidhaahdaa,*

*Dulli buu ka qoran yahay.*

*Hebel laga ducaystiyo*

*Mana laha nin dooroo*

*Dayaxii u soo baxa*

*Daamur baa la mariyaa.*

*Mooralkaana laga dilay*

*Danabyadii u kici laa*

*Markii geela loo diray*
*Ninkii maqasha daayacay.*

*Ardayguna dedaalkiyo*

*Dugsigii hadduu gabay*

*Dilluu meel ka haystaa*

*Waxaan daah ka saarrayn*

*Isagoon diktoor noqon*

*Inuu derejo tolan karo*

*Oo doollar heli karo*

*Ama dayday noqon karo*
*Daballaab ku xoogsada.*

*Hadday dunidu ceeb tahay*

*Dulmi loo badheedhaa*

*Dalkayaga ma libiqsado*

*Nin kastoo dakano galay*

*Qoluu dabada geliyoo*

*Denbi dhacay mas'uul ma leh.*

*Markaad hebel duqaysaa*

*Reer hebel damqanayaan*

*Ninkii dood ka keenana*

*Dicaayado raqiis iyo*

*Waxaa lagu didsanayaa*

*Cid baa kaa dambaysoo*

*Ninkii dooxi kara boog*

*Looma waayo daabaqad*

*Iyo qaar la daba gala...*[26]

Maansada Gaarriye waxa ay tusaale mug leh ka bixinaysaa habdhaqankii gurracnaa ee berigaas Muqdisho iyo dalkaba ka jiray ilaa maantana baaqi sii ah. Waxa ay tusaale u tahay sida dadka Soomaaliyeed garaadkii iyo dadnimadii uga abaaroobeen u na garan waayeen haadaanta ay ku sii socdaan iyo sida aysanba u dareensanayn bohoshaas ay ku dhaceen, waayo, haddii ay dareensanaan lahaayeen inta ay bisinka qabsadaan oo shaydaanka iska naaraan bay kacdoon dadweyne samayn lahaayeen, iskana qaban lahaayeen hoggaamiye-kooxeedyada iyo mooryaanta dad iyo dalba halaagay. Liddigeeda ayaaba arrinku ahaa oo qofkii xumaanta farta ku fiiqa ayaa magacyo xun loo bixinayay halka dulmiwadihii garab iyo gaashaan loo noqonayay. Waxa ay u dhawaatay in macnihii saxdaa ahaa ee erayada "garaad, wanaag, samatalis, xalaal, iyo xishood" ay qaamuuskaba ka baxaan oo la kala garan waayo "xumaan

[26] Xigasho: *Hagarlaawe* (Gaarriye, 2007).

iyo samaan, gar iyo gardarro, xalaal iyo xaaraan, garaad iyo garaadxumo, nolol iyo geeri, dhimasho iyo dhalasho; madax iyo majo. Sidaa oo kale waxaa la kala garan waayay dulmane iyo dulmiye; iyo eedle iyo eedlaawe; hanad iyo habaarqabe. Waxa ay u muuqatay in la kala garan waayay run iyo been. Waxa ay u ekayd sidii George Orwell ku qoray Noofalkiisi *“1984”* in dagaalkii noqday nabad, xorriyaddii noqotay addoonimo, jaahilnimadiina ay xoog iyo dhiirranaan noqotay, in baahidii noqotay barwaaqo, tuugsiga iyo gacan-hoorsiga shisheeyuhuna noqdeen shaqo iyo sharaf. Xataa afkii in la beddalay bay u ekayd oo af cusub la sameeyay tabtii kelitaliskii *OCEANIA* ee uu George Orwell qalinkiisa ku suureeyay.

George Alagiah ayaa buuggiisa *“A Passage to Africa”* ku qoray “Who to Bless, who to blame” mar uu ka faalloonayay xasuuqii Rwanda ee dhacay 1994. Alagiah oo xilligaasi ahaa wartebiye u shaqeeya BBC World Service loo na diray soo tebinta xasaradihii ka oognaa Afrika gaar ahaan bartamaha Afrika ayaa markii uu tagay bariga Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga ah ee Koongo waxaa tarjubaan u noqday nin ka mid ahaa hal milyan oo

reer Rwanda ah kuwaas oo ka soo qaxay Rwanda ka dib na xeryo looga ooday bariga Koongo. Ninkaasi tarjubaanka ahaa waxa uu George Alagiah u sheegay in xaaskiisi ka mid noqotay 800,000 oo reer Rwanda ah oo boqol (100) maalmood lagu xasuuqay. Sida uu sheegay ninkaasi, sababta xaaskiisa loo dilay waxa ay ahayd in ay ka dhalatay qabiilka Tutsiga oo ahaa dadka la xasuuqay asaguna waxa uu ahaa Huutuuga wax xasuuqay. Balse, layaabka dhacay baa ahaa in ninkaasi ka mid noqday dadkii loo maxkamadeeday xasuuqii dhacay, weliba lagu eedeeyay in asagu uu gacantiisa ku dilay xaaskiisi, wiilkiisuna ka mid ahaa kooxdii *Interahamwe* ee xasuuqa gaysatay.

Sida Rwanda oo kale ayaa kuwii xasuuqa gaystay, kuwii dalka gubay, kuwii Soomaali ba’a iyo baaska baday qaarkood ku xaroodeen xeryihii qaxootiga ee laga ooday Kenya, Itoobiya iyo Yemen, qaar kale hantidii ay xadeen ula baxsadeen Yurub, Ameerika iyo Australia, halka qaar kale si dareen la’i ah u dhexmushaaxayeen Muqdisho iyo magaalooyinka kale ee dalka weliba ay sii wadeen

gaboodfalladii iyo dhidibtirka dhaawacyadii kuwii hore gaysteen. *Col ku dhac oo tuugo kuu ciidamisay.*

Haddii Soomaalidu 1969kii ridistii iyo afgambigii xukuumaddii talawadaagga ahayd kal iyo laab ku soo dhawaysay, xabbisiddii madaxdii xilligaasna aad ugu riyaaqday, askartii dalka qabsatayna ku soo dhaweeyeen:

*Intee baan sugaynnoo*
*Intee baan sugaynnoo*
*Isha uun ka dhawrnee,*
*Alla magane maantay*
*Allaa magane maantay*
*Sidaan rabay ahaatee.*
*Aan aqoonsanaynaa*
*Ururkeenna xooggee*
*Idilkeenba shicibkoow*
*Waa inaynnu iidnaa.*

*Waan aqoonsanaynnaa*
*Ururkeenna xooggoo,*
*Waxay nooga aareen*

*Uubatadii iyo yeydii ,*

*Agoonta iyo maantida*

*Ka idlaystay maalkii,*

*Idilkeenba shicibkoow*

*Waa inaynnu iidnaa.*[27]

Dhab ahaantii aad bay u marinhabowsanaayeen, kow iyo labaatan (21) sannadood ka dib na aad bay uga shallaayeen gefkii ay galeen Oktoobar 21, 1969. Mar labaad bay haddana Soomaalidu shallaay shinsadeen oo farta dhexda ka qaniineen markii jabhaddii Jaalle Siyaad eryay qoryaha iskula jeesteen oo ayagii huf iska dhigeen. Abwaan Abshir Nuur Faarax (Bacadle) ayaa Labada sadar ee hoose ku soo koobay nuxurka cidhibxumadii iyo dhaxalkii Soomaalidu ka dhaxashay halgankii hubaysnaa ee Siyaad Barre lagu riday:

*Dagaal aan dhammaan waxaa ka roon, dowlad jaa'ir ahe,*

---

[27] Heestaan waxaa allifay Maxamed Maxamuud (Abwaan Dheeg) waxaa na qaaday Maxamed Saleebaan (Tubaac) oo ka daba jiibinayeen fannaaniin kale.
(Xigasho: Somali National TV).

*Duqii doona ducana ugu dara, waadna dilateene.*

Waa halkii George Alagiah ka lahaa *"Who to bless, who to blame?"* kalmadahaas intaan Soomaaliyeyno aan dhahno *yaa dulmiye ah, yaa dulmane ah? Yaa eedaysan yaa se ammaanan? Yaa dhibay yaa se la dhibay? Yaa dilay yaa se la dilay? Yaa waalan yaa se fiyow? Yaa Soomaali baday ba'a iyo hoogga? Yaa qixiyay? Yaa isku diray oo kala didiyay oo kala dilay? Yaa dilay hammigii iyo higsigii Soomaaliweyn? Yaa dumiyay dawladnimadii aan dhaxalka ku helnay 1960kii? Yaa ii diiday in aan duuliye noqdo?*

Run ahaantii, waxa aad moodaysay in Soomaalida ay qabsatay wax lagu tilmaami karo *Ballantii Samaara*[28] oo

[28] *Ballantii Samaara* waa sheeko la sheego in ay ka dhacday magaalada Baqdaad cahdigii Dawladdii Cabbaasida. Waxaa la yiri ganacsade hodan ahaa ayaa nin shaqaale u ahaa suuqa adeeg uga dirsaday, daqiiqado ka dib waxaa gurigii ganacsadaha ku soo noqday ninkii shaqaalaha ahaa oo argagaxsan. Ganacsadihii ayaa shaqaalihii waydiiyay waxa ku dhacay, shaqaalihiina waxa uu yiri "markaan suuqa tagay waxa aan arkay haweeney gabowday oo aad u foolxun oo si dareen i galisay ii soo eegaysa markii aan waydiiyay waxa jira na waxa ay igu tiri "waxa aan ahay geeridii." Sidaas baan u soo cararay." Dabadeed ninkii shaqaalaha ahaa inta uu fariiskii ganacsadaha ku booday buu cararay orodkiina waxa uu ku tagay magaalada Samaara oo 125km Baqdaad u jirta. Ka dib ganacsadihii oo yaabban baa suuqii aaday si uu adeeg u soo gato. Dabadeed waxa uu la kulmay islaantii duqda ahayd dabadeedna inta uu islaantii

mar walba oo Soomaalidu ka gilgilato oo ka cararto musiibo ay bartanka uga dhacaysay/so musiibo kale oo ka sii xanuun badan tii hore. U fiirso, markii Soomaalidu ka gilgilatay gumaystayaashii reer Yurub ee dhulkooda kala qaybiyay, Soomaalida oo naawilaysa nolol gobonnimo leh waxa ay dalbadeen madaxbannaani iyo dawladnimo taas oo ay ugu dambayn 1960kii hantiyeen, balse, waxaa qabsatay *halkii caad laga sugayay baa ceeryaamo ka timid* ama *kud ka guur oo qanje u guur* baa xaal noqday. Waatii Qaasim na lahaa "*isma doorin gaalkaan diray iyo daarta kii galay'e."* Halka Afqallooc ka yiri *"bal muxuu i taray ministarkaan doortay?"* Mar kale, markii xukunkii askartu noqday *ka dar oo dibi dhal* waatii suugaanyahan kale yiri:

*...Gar ma qaate waa tuu qabsaday, goor habeenbar ahe*
*Baarlamaankii waa tuu gembiyay, oo dastuur gubay'e*

---

u tagay buu waydiiyay sababta ay shaqaalihiisa u argagixisay. Markaas bay ugu jawaabtay "maandhow anigu waxa aan ahay geeridii ninkaas caawa ayaan Samaara kula ballansanaa, marka waxa aan la yaabay waxa uu Baqdaad ka qabanayo". Sheekadan oo dib ugu laabanaysa sheekaxariirooyinkii hore ee reer Baabil (Babylon) waxaa qaab sheekagaaban ah u qoray (1933) qoraa la oran jiray William Somerset Maugham oo dhalashadiisu Ingiriis ahayd. Isla sheekadan oo sheekadheer (novel) ah waxaa qoray (1934) qoraa Maraykan ahaa oo la oran jiray John O'Hara. **Fiiro gaar ah:** sheekadan waxaa loo weriyaa siyaabo kala duwan balse isku ujeeddo ah.

*Guddiyada waa tuu nagu xukumay, goostay taladiiye*
*Siyaad wacadkii gees buu ka maray, oo qabiil guraye*
*Aqoon iyo intii garaad lahayd, gees ayuu daray'e.*

Mar kale, markii Siyaad Barre la eryay oo xaalkii ka sii daray noqdayna *"ma dorraato raadkaan dhigaan dib ugu soo laabtay"* waatii Abshir Bacadle yiri *"Allow yaa noo diga markaan duqa ku yaacaynay."*

Muqdisho waxa ay u ekayd in ay hal mar dhaqangelisay aragtiyihii Ibnu Khalduun, Thomas Hobbes iyo John Locke.[29] Muqdisho aad bay u wejiyo badnayd.

[29] Ibnu Khalduun (1332-1406) waxa uu aragtidiisi *Cassabiyah* ee buuggiisa *Muqaddimah* ku sheegay in reerguuraaga xoolaraacatada ahi [sida Soomaalida] ay cardaadiqaha ka dhigaan dawladnimada iyo ilbaxnimooyinka balse ayagu aysan salka u dhigi karin dawladnimo iyo ilbaxnimo reer magaalnimo. Thomas Hobbes (1588-1679) waxa uu buuggiisa *Leviathan* ku dhigay aragti ah: bini'aadamku sida keliya ee uu ku hanan karo nolol deggan iyo dawladnimo ilaalisa waa in ay ku hoosnoolaadaan Boqortooyo aan laga daba oran (Absolute Monarchy). John Locke (1632-1704) waxa uu qabay aragti lid ku ah midda Hobbes. Waxa uu aaminsanaa in bini'aadamka qof walbaa leeyahay xorriyad iyo doonis dabiici ah uusanna ku qasbanayn u hoggaansamidda dawlad boqortooyo ama kelitalis ah. Jocke waxa uu ku taliyay unkidda dawlad ay hoggaaminayaan wakiillo dadweynuhu doorteen haddii dawladdaasi dulin noqotana ay dadweynuhu xaq

Dhinac haddii aad fiirisid waxa aad arkaysaa Muqdisho cataabaysa oo ku calaacalaysa in muuqeedi iyo muunaddeedi iyo sooyaalkeedi dheeraaba xoolaraacato tafo qaawan oo aan dhaqan magaalo iyo ilbaxnimo waxba ka aqoon cagta marisay. Dhinac kale haddii aad daymooto waxa aad indhaha ku dhufanaysaa Muqdisho dhahaysa "yaakheey dadkaani ma loo maaro helaayo, Siyaad Barre lee in loo soo naqo waaye madaxa ha ka garaacee." Gees kale haddii aad dhugato, waa Muqdisho kale oo dhahaysa "adeer Muqdisho waa xorowday xaq bayna u lahayd in ay erido maamul dadqalatoobay, aadanuhu meel walba oo uu joogana xaq buu u leeyahay in uu dumiyo dawladdii dulin noqota".

---

dabiici ah u leeyihiin ridisteeda. Locke waxa uu aragtidan ku qoray buuggiisa *Two Treatises of Government.*

## RAQDII AFISYOONE

Fallaaraha qaxmaya ee cadceedda bisha Maarso ku soo ligligtay dhulka waxa aad mooddaa in ay si caabbis la'i ah uga soo dusayaan jiingadda dhakadayda ka dhakoosha. Iridda ka samaysan fuustada la fidiyay ee rinjiga cagaaran la mariyay waxaa iga soo salaamaya hanfiga fallaaraha qoraxda Maarso ee booskeedi cirka ka soo sikatay. Waxa aad mooddaa in laamiga burburay ee hormara fillada shanta qol ah ee aan ku jiraa uu iska diiday fallaaraha kulul ee qorraxda soo dhowaatay ku soo halgaadaysay uuna u soo daadafeeyay qolka dhagaxa iyo shamiitada ka samaysan ee aan aniga iyo soddonka arday ku jirno. Dariishadda keli ah ee dhabarkayga ku beegan qudheedu iima naxariisanayso oo marmar bay hanfi igu soo daacaysaa. Dhawr goor baan dariishadda xiray haddana ballaqay, laakiin in ay ballaqan tahay iyo in ay xiran tahay waa isku mid. Malaha dhismayaasha ka dambeeya ayaa dabayshii ka soo gudbi lahayd isbaaro u dhigtay.

Huurka iyo dhamacda Maarso oo lagu daray darbiyada dhagaxa iyo shamiitada ah, sagxadda ayaduna shamiitada qaawan ah iyo jiingadda gabowday ee korkeenna ku gambooni waxa ay khalkhaliyeen oo mashquuliyeen naftaydii awalba kalaqaarnayd, waxaana gabaabsi noqday dhugmadii aan u yeelan lahaa waxa macallinka na hortaagani sabuuradda ku xarxariiqayo haddana uu tirtirayo asaga oo aan na waydiin in aan qorannay iyo inkale. Soddon daqiiqadood oo uu na hortaagnaa ugu yaraan toban jeer buu sabuuradda buuxiyay misana uu masaxay aniga oo aan wada qoran waxii uu ku qoray.

Tan iyo aroortii habaryar Ardo iskoolkaan i keentay ee fasalka toddobaad la i fariisiyay, dhammaan barayaasha maaddooyinka tirada badan waxaa caado u ahaa dhaqankaas sabuurad buuxinta iyo degdeg ku masixidda ah. Waxaa taasi sababtay in halkii ardaygu dhugmo u yeelan lahaa waxa macallinku sharraxayo uu ku mashquulo minguurinta waxa macallinku sabuuradda ku qoray. Keliya ardayga gacanta fudud uun baa awooday in uu wada qorto waxa macallinku sabuuradda ku

xarxarriiqay, laakiin kuwa sidayda oo kale gacanta culusi kansho uma helin ay uga bogtaan faallada macallinka. Waxa ayba ku qasbanaan jireen in marka xiisaddu dhammaanto ay u tagaan ardayda gacanta fudud si ay uga soo minguursadaan waxii macallinka degdegsanaa tirtiray.

Maalintaase huurka iyo hanfiga Maarso, iyo macallinka degdegga badan waxaa iiga darnaa arrin kale oo maankayga xulayay. Hadba waxa aan eegayay goorsheegta Kaasiyada (Casio) ah ee habaryar Ardo suuqa Bakaaraha iiga soo gadday. Waxa aan sugi la’aa in goorsheegtu kowda duhurnimo dul qotansato si aan halhaleel iridda uga boodo ka dib na aan Baarubax afka saaro. Waxaa igu liqdaarnayd ballantii Afisyoone ee aan habeennada badan soo dharaandhirinayay taas oo saacado koobani ka hareen. Midda ugu daran ee aan ka cararayaahi waa dib u dhac iyo ka daahitaan waxii aan habeennada badan soo dhisayay hal bacaad lagu lisay ka dhiga.

Waxa ay ku bilaabatay sheeno berigaas Muqdisho caan ka ahayd oo la oran jiray *Ku Nasiibso*. Waa intii aan *Jeeb-Tarraqyada* iyo danyarta aniga oo kale ahi aysan

awooddin gadashada moobeellada gacanta (mellphones) balse ay habeenkii ku saamaleyli jireen faleefannada fiilada leh (landlines).

Marka habeenkii waayeelku seexdaan baa dhallintu taleefannada fiilada dheer leh soo jiitaan dabadeedna bilaabaan garaacista lix nambar ayaga oo naawilaya in ay ka qabato gashaanti ay la haasaawaan. Xeerka ku nasiibsadu waxa uu ahaa in taleefanka degdeg la isku saaro haddii nin qabto haddii se qof dumar ahi qabato fursaddu waa konton-konton in qoftaasi noqoto gashaanti ku fahmaysa oo sheekada kula gurta. Waxaa se marar badan dhici jirtay in marwo la qabaa kaa qabato ama ayeeyo, oo halkaas guuldarro kaa raacdo.

Ka dib habeenno badan oo aan guuldarraystay, ugu dambayn habeenkii barakaysnaa waa yimid. Ay qabatay oo “hello” tiriba dareemay in codkaas cuddooni yahay ku xor ah. Yeelkeed’e, jikaar iyo ku adkayn badan dabadood is fahannay sheekadana isku dhurnay oo kala dhurnay.

Wax aan habeenno badan sheeko iyo qosol ku dhafarno, iyo wax aan habeenno tirabeel ah jacayl ujeeddo iyo jiho la'aan ah isla dhisnaba, ugu dambayn ku ballannay in aan isugu nimaanno jardiinka Footada u dhow Hoteel Naasahablood, Timajaraha agtiisa, isgoyska KM4 agtiisa.

Si halhaleel ah intaan yunifoomkii iskoolka isaga bixiyay ka dib na biyo shagax isku siiyay oo bariis isku karis ah degdeg ku laqlaqay baan galay qolkii taleefanku ku jiray dabadeedna lixdii nambar garaacay. Sidii ayada oo taleefanka gacanta ku haysay dhaqso uga jawaabtay wicitaankaygi. “caddeey, quruxeey, hadda ayaan soo baxayaa. Waxa aan xiran ahay surweel jiinis ah oo buluug ah - oo inkasta oo aan lugihiisa dhawr jeer kor u soo laabay haddana qaybta dambe ee ciribta xigtaa ay hiigmeen sidii ay dhulka u miraafayeen. Inta ay habo Ardo igu canaanatay surweelkaan dhulka salaamayaa waa tirabeel. “Ma sidaas baad wadaad ku ahayd? Ma ogtahay in aan surweelkaan ciidda urinaya aan salaad lagaaga aqbalayn?” bay marar badan igu tiri. Balse dhag uma dhigi jirin. – iyo shaati cad gacantana waxa aan ku sitaa buug.” Baan ku iri. Waa joogga aan ugu jecel ahay saddex

joog oo aan haysto marka laga reebo dhawr hoosgunti iyo labo khamiis oo aan Jimcooyinka gashado. Ayaduna ii sheegtay labbiskeeda iyo in ay dhawr buug gacanta ku sidato.

Ayaamahaas galabkii waxa aan ka shaqayn jiray kaalin shidaal oo habo Ardo lahayd. Marka aan iskoolka ka imaado oo qadeeyo ayaa kaalinta shidaalka tegi jiray, habeenkiina qol kaalinta ku dhexyaalla ayaan seexan jiray. Sidaas darteed, waxa aan wacay habo Ardo oo u sheegay in galabta aanan kaalinta imaanayn, waayo iskoolka tartan ardayda u dhexeeya ayaa ka jira ayaan habo u sheegay, aniga oo marmarsiinyo u raadinaya socdaalkayga KM4 ku jeeda ee haasaawaha bilowga ahi shidaalinayo.

Aniga oo degdegaya ayaan isa soo taagay laamiga soddonka, iridda hore ee Hoteel Salaama, dabadeedna waxa aan gurada u fariistay baabuur caasi ah oo KM4 u socda. Markii aan caasigii uga degay goobta (roundabout) KM4 muddo dheer iguma qaadan in aan helo qoftii ku nasiibsadu jacaylkeeda igu beertay. Dabadeed ayada oo i dhinac laafyoonaysa ayaan waddada Waaberi ku

lugaynay. Intii aan hoygeeda Xamarjajab u sii lugaynaynay bay inta dhanka midig jalleecday gacanta ku fiiqday darbi dheer oo dacdarro badani ka muuqato. “ma garanaysaa?” ayay igu tiri ayada oo weli sii eegaysa. “maya, waa maxay? Baan ugu warcelinayay. “waa Afisyoone, saldhiggii iyo taliskii Ciidankii Cirka Soomaaliyeed.” Waa madaxtooyadii Jeneraal Maxamed Siyaad Barre, sannadihii hore ee xukunkiisa,” ayay sii raacisay.

Wax baa qalow igu yiri. Waxa aan dib u gocday gu'yaal hore, waagii aan idaha ku raaci jiray bakadaha Mudug. Waxaa hadalka qalanjadu i xusuusiyay riyo aanan xusuusan sannadihii aan Xamar joogay. Ma ogi sababta aan u xusuusan waayay, balse, waxa aan filayaa in sababtu ahayd intii aan Xamar joogay oo aanan diyaarad arag riinkeedana maqal. Malaha haddii gegida diyaaraduhu furnaan lahayd tobannaan jeer baan maalin walba arki lahaa diyaarad magaalada dul qablamaysa. Mase moogayn waxa ku dhacay diyaaradihii dalkaygu lahaan jiray.

Waxa kale oo su'aal igu dhaliyay sababta Jeneraal Siyaad Afisyoone u degay oo uu Filla Soomaaliya u degi waayay sannadihii hore ee taliskiisa? "Maadaama uu xukunka xoogay baqdin baa haysay, sidaas darteed buu Afisyoone u degay si uu diyaarad ugu baxsado haddii xaalku ku xumaado," ayaan niyadda iska iri aniga oo marna darbiga nasiibka daran eegaya, marna indhaha ku xadaya xubnaha iyo jirka jalaqsan ee qalanjada.

"Oo hadda ayaa deggan?" baan su'aalay. "ma ogi. Kolley barakacayaal buu hoy u yahay, iyo qalfoofta halal ka mid ah diyaaradihii uu saldhigga u ahaan jiray," bay iigu warcelisay.

"Ma diyaaradihii qudhoodi ayaa dhexyaalla?" Ayaan si lama filaan u eg u waydiiyay. "haa. Halkaan keliya raqdoodi ma taallee gegidii horena qayb kale ayaa ku dhex boloshay. Ballidooglena wax baa lagu sheegayay," bay iigu jawaabtay.

Inkasta oo aan horay u maqlay kelmadda "Afisyoone" haddana galabtaas ka hor ma arag. Arkin ma ahan'e aaggaasba galabtaas un baa iigu horraysay.

Nabadgelyo la'aantii iyo diririhii badnaa ee magaalada ka oognaa ayaa qof walba ku ooday daan magaalada ka mid ah. Jidadka xirnaa iyo isbaarooyinkuna isu socodka magaalada waa sii adkeeyeen. Sidaas darteed, waa ay koobnaayeen degmooyinka aan tegay intii aan Muqdisho joogay.

Galabtaas aan lugta ku marayo duleedka raqdii Afisyoone waa mar aan ku baraarugay in dalkaygu uusan hal diyaaradna lahayn, mid ganacsi iyo mid dagaal toona. Dhammaan diyaaradihii dalkaygu waxa ay ku burbureen dagaalladii sokeeye ee dalkayga halakeeyay qaarkoodna garoonno qalaad bay ku bololeen sidii ay u hoganayeen. Waxa kale oo aan ogaaday in dalkaygu uusan lahayn iskool duuliyanimada lagu barto. Balse caloolxumadii aan galabtaas ka qaaday raqdii Afisyoone darted, waxaa si tartiib-tartiib ah uurkayga ugu saqiiray riyadii dayuurado duulinta. Qoraaga Soomaaliyeed ee Nuuraddiin Faarax oo ka murugaysan dibadjoognimadii iyo burburkii dalkiisa Soomaaliya ayaa yiri *"the country died inside me, and I carried it, for a long time, like a woman with a dead*

*baby.”*[30] Aniga oo Nuuraddiin Faarax dhawr eray ka erganaya, ilaa maanta waxa aan dareemayaa in riyadii duuliyanimadu ay calooshayda ku saqiirtay welina aan meydkeedi walwaalayo.

Markii aan qisadaydi la wadaagay qalanjadii ila lugaynaysay waxa ay igu tiri “Inshaa Allaah, maalin un waa ay dhalan doontaa dawlad Soomaaliyeed, adiguna riyadaada waad gaari doontaa.”

Inshaa Allaah maalin un! Rejadaasi waxa ay i xusuusisay ducadii aan ka maqli jiray duqowdii Mudug ay mar walba Eebbe ku tuugi jireen: *“Ilaahow dawlad caaddil ah na sii.”* Waa laga yaabaa in rejada inantaan iyo ducadii odayaashii Mudug maalin Eebbe aqbalo ayaan niyadda iska iri. Balse mar kasta oo aan wax badan ka sii ogaado xaalladdii Muqdisho ku sugnayd iyo dhaqankii

[30] Nuruddin Farah. A life in writing by Maya Jaggi (The Guardian September 2012): **https://www.google.com/amp/s/amp.theguardian.com/culture/2012/sep/21/nuruddin-salah-life-in-writing.** Accessed on March 5, 2022

hoggaamiye-kooxeedyadii magaaladu u kala oodnayd, waxa aan ka sii quusanayay rejadii gashaantidii aan ku-nasiibsada ku bartay iyo Alle-barigii duqowdii Mudug. Mar walba oo aan u sii fiirsado habdhaqankii iyo habfekerkii kuwii hubaysnaa ee Muqdisho u afduubnayd, waxaa sii shiiqayay rejada aan ka qabay ka dhabaynta riyadaydi. Waxa kale oo aan quus ka sii qaaday qiso dhexmartay aniga iyo malleyshiyo hubaysan iyo rag kale oo daacad u ahaa hoggaamiye-kooxeedkii Xuseen Caydiid ee Filla Soomaaliya gacanta ku hayay tan iyo habeenkii ay ka eryeen kelitaliye Maxamed Siyaad Barre.

## FOOGTII FILLADA

Waxa ay ahayd subax qiiradaydu cirka ku shareernayd farxadduna qanjaha i joogtay. Oo miyaanan daw u lahayn in aan sidaas ahaado? Miyaan gaban walbo oo sidayda oo kale ahi sidaas noqdeen maalinta ugu horraysa ee uu nasiib u helo in uu dhex istaago gurigii dalkiisa looga talin jiray? Gurigii ay labo madaxweyne oo Afrikaan ahi markii ugu horraysay si dimoqraaddi xukunka ugu la kala wareegeen, gurigii Jenaraal Siyaad 21 sannadood Soomaalida uga talinayay. Si kale aan u dhigo, miyuu jiraa qof Ruush ah oo aan jeclayn in uu maalin uun booqdo guriga Kremlin-ka? Ama qof Maraykan ah oo aan ku hammin in uu lugta geliyo guriga Cad? Filla Soomaaliya waxa ay iiga dhignayd welina iiga dhigan tahay Aqalka Cad ee Maraykanka iyo Kirimaliinka Ruushka.

Filla Soomaaliya oo dhismaheeda la dhammaystiray dhammaadkii sannadkii 1936 waxaa madaxbannaanidii

iyo unkiddii Jamhuuriyaddii Soomaalida ka hor magaceedu waxa uu ahaa "*Villa del Viceré.*"
Waxaana loo dhisay in ay noqoto degaanka uu ku hoydo Badhasaabkii (Governor) Talyaaniga ee koofurta Soomaaliya ka talinayay. Dabadeed 1960 ayaa Filla Soomaaliya (Villa Somalia) loo bixiyay.[31]

Maadaama aan Xuseen Caydiid isku qabiil ahayn waxaa malleyshiyaadkiisa ka mid ahaa walaalkay iyo rag badan oo aan qaraabo ahayn. Sidaas darteed baan subax raacay nin aan qaraabo ahayn oo ka mid ahaa ragga halkaas joogay. Marka aan Filla Soomaaliya tegayo waa mar aan ilbaxay oo aan in door ah ka bartay taariikhda Soomaaliya iyo tan Filla Soomaaliyaba. Sidaas darteed aragti fiican baan ka haystay Filla Soomaaliya iyo sooyaalkeedaba. Hayeeshee, mar Alla iyo markii aan iridda ka galay Filla Soomaaliya shucuurtaydii dhammayd waa isbeddashay farxaddii iyo raynrayntiina hal mar bay murug iyo caloolxumo isku beddaleen. Waxa aan ka naxay aragxumada iyo dayaca ka muuqday malleyshiyada

---

[31] Xigasho: https://en.m.wikipedia.org/wiki/Villa_Somalia. Accessed on May 13, 2022.

hubaysan ee xarunta joogtay, iyo bololka iyo rifanka dhismaha oogadiisa ku dhacay. Markii aan iridda ka soo galayba waxaa dhanka midig iiga muuqday sawirka Cabdirashiid Cali Sharma'arke oo darbiga ku dheggan kaas oo aad u bololay. Darbiyada dhismaha waxaa iiga muuqday dhawr taangi oo saaran darbiga dhismaha qoriga dhuuntiisuna ay laamiga ku foorarto. Meelo barxadda dhexe ee xarunta ah waxaa fadhfadhiyay wiilal yar yar oo tuute duugoobay gashan kuwaas oo diifi ka muuqatay isla markaana dubnad iyo turub ciyaaraya. Waxaa isu kay qaban waayay sooyaalka iyo haybaddii gurigu lahaa iyo waxii indhahaygu subaxaas arkeen. Guriga aan subaxaas dhex joogay waxba ma dhaamin gelgelin iyo jabad laga hayaamay. Laakiin, aniga ayaa mugdi gudayaye Filla Soomaaliya waxa ay la mid ahayd Muqdishada aan xaalkeeda kor uga soo warramay, in aan wax taas ka beddalan ka fishaana garaad yari bay ii ahayd. Bololka iyo basaaska subaxaas Filla Soomaaliya ka muuqday waa midkii Hotel Jubba ka cabanayay dhawr iyo toban sannadood ka hor ayada oo weli Jaalle Siyaad Fillada fadhiyo. Waxa ay ahayd 1989kii markii Cabdi Muxumed Amiin oo Hoteel Jubba afhayeen u ahi uu lahaa:

*Sidaad ii joojiseen*
*Salaantii waa jarteen*
*Intaa waan jiitamayee*
*Haddeer oo aan juuqda gabay*
*Dadkaygii xaggee jiraan?*
*Ma ii jeedaan miyaa?*
*Gidaarradii in ay jilceen*
*Daaqadihiina iga jabeen*
*War ninkoow, ninkoow, ninkoow.*[32]

Barofaysar Cali Jimcaale Axmed asaga oo ka faalloonaya heestaan, buuggiisa *Daybreak Is Near* waxa uu sheegay in dayaca iyo bololka Hoteelka Jubba astaan u ahaa burburka iyo baaba'a ku habsaday dalkii iyo dadkii Soomaaliyeed uuna muujinayay sida xukuumaddii Siyaad u lumisay kalsoonidii dadweynaha Soomaaliyeed iyo sharcinimadii (inkasta oo aysan markii horeba sharciyad xukunka ku imaan) waayo, Hoteel Jubba oo gubtay wax yar ka dib afgambigii Siyaad Barre xukunka ku yimid,

---

[32] Xigasho: Ali Jimale Ahmed. Daybreak is Near (1996).

waxaa lagu dhisay mashruucii *ISKAA WAX U QABSO* dadweynaha ayaana dhisay ayaga oo dawladdu hagayso, sidaas darteed ayuu Barofaysar Jimcaale leeyahay, Cabdi Muxumed Amiin waxa uu Hoteel Jubba ku mataalayaa Awliyadii Soomaalidu xusi (siyaaran) jirtay oo inta la iska hilmaamay qabrigii ka soo dhex qaylinaysa oo warasadoodi iyo Ahlu-Dariiqii ay ifka uga tageen ku leh "maxaa idinku dhacay oo noo hilmaanteen?" Balse Hoteel Jubba waxa uu soo qayladhaamiyay mar xeero iyo fandhaal kala dhaceen ayuu Cali Jimcaale leeyahay.[33]

Basarxumadii aan subaxaas arkay waxa ay i horkeentay Hashii Maandeeq ahayd raqdeedi oo ragga aan qaraabada nahay ku dulqayilayaan. Lafaheedi oo angagay busta iyo dabayshuna darbo kala daaleen bay dul dulyuurareen. Markaas baan ninkii meesha i keenay iyo saaxiibbadiis oo markaan isugu sheekaynaya in hoggaamiyahoodu uu Imbagaati, Kenya ka soo noqonayo asaga oo madaxweyne ah ku iri "war heedhaha sidee Alle idiin galay? Miyaynaad wax garan? Ninka aad sheegaysaan sow ma ahan kan

[33] Isla xigashada kore.

hoggaamintiisu halkaan idin dhigtay oo lafihii hashii Maandeeq iyo Filla Soomaaliya oo sidaan u suurad xumaatay idin dul fadhiisiyay? Ma ninka halkaas idin dhigay, Filla Soomaaliyana aragxumadaas u yeelay baad weli wanaag ka sii naawilaysaan?" Balse jawaabtii ay i siiyeen waxa ay ahayd mid amakaag leh oo sawir buuxa ka bixinaysa dhoohanaantooda iyo qirasho la'aantooda gefafkii ay qaybta ka ahaayeen ee Soomaalida haadaanta ka tuuray, welina ay ku sii indha adag yihiin hawtulmahagnimadii ay dhawr iyo toban sannadood dabagudayeen. Waxa ay igu tilmaameen in aan ahay wiil yar oo aan waxba kala ogayn oo maskaxda laga beddalay.

Subaxaas aan Filla Soomaaliya ku booqanayo malleyshiyada Xuseen Caydiidka ay filayeen in uu Kenya ka soo noqon doono asaga oo madaxweyne ah, madaxweynihii Xukuumaddii Kumeelgaarka ahayd ee Carta, Jabuuti lagu soo dhisay, Cabdiqaasim Salaad Xasan, waxa uu degganaa oo madaxtooyo u ahaa guri ku yaalla KM4 ka dib markii Xuseen Caydiid u diiday in uu madaxtooyada galo. Waxaa se amakaag lahayd in Xuseen Caydiid Filla Soomaaliyadii uu Cabdiqaasim u diiday uu

dhawr sannadood ka dib madaxtooyadii qaranka ku soo dhaweeyay ciidankii Itoobiya. Intaas kuma uu ekaan'e Xuseen waxa uu marqaati ka noqday safaaraddii Itoobiya oo laga dhex furay gurigii madaxweynaha Soomaaliya. Garaadxumadii Xuseen Caydiid iyo hoggaamiye-kooxeedyadii Muqdisho foolxumadaas iyo taariikhxumadaas bay reer Muqdisho iyo Soomaaliwayn u horseedday.

Maalin kale ayaan Filla Soomaaliya tegay. Laakiin, maalintan waxa aan u tegay in aan soo arko ra’isul wasaarihii Xukuumaddii Soomaalida loogu soo dhisay dalka Kenya, Cali Maxamed Geeddi, oo kowdii bishii May 2005 booqashadii u horreysay Muqdisho ku yimid.

Goor hore oo subaxdii ah ayaan aniga iyo saaxiibaday Filla Soomaaliya iska xaadirinnay si aan safka koowaad u galno. Waxaa xiise igu hayay tegidda goob ay joogaan ra’isul wasaarihii Soomaaliya iyo madaxdii dalku. Waxa aan isu arkayay in aan hoodo iyo ayaan badan ahay mar haddii aan dhextaagan ahay madaxtooyadii qaranka oo ra’isul wasaarahihii dalku ka khudbaynayo meel dhawr

mitir ii jirta. Aan iridka fillada galayba waxaa isaaqay qiiro waddaniyadeed. Waxaa caaddifaddaydi sii kiciyay heesaha Magool ee sameecadaha waawayn ka dananaya. Aniga oo maqiiqan baan safkii koowaad ciriirsaday sacabka iyo jaantana isku daray:

*Maanta maanta maantaa*
*Waa maalin wayne maanta,*
*Maanta maanta maanta*
*Madaxeen bannaane maanta.*
*Maanta maanta maanta*
*Maapkii dhulkeenna maanta,*
*Maanta maanta maanta*
*La ma mari karaayee maantaa.*
*Maanta maanta maanta*
*Maandeeq hasheenni maanta,*
*Maanta maanta maanta*
*Caanihii ka maalnee maanta...*
Iyo
*Soomaalidii midawdoo*
*Saxalkii baxyoo samaatee,*
*Nin lagu seexdoow ha seexan*

*Xil baad siddaa ha seexan....*

Sidaas baan tan iyo saddexdii galabnimo (3pm) u jidbaysnaa aniga oo harraad dhuuntu ila qallashay. Kuwii isu soobaxa soo abaabulayna dadkii ay meesha isugu keeneen galaas biyo ah uma ay darin. Ma bakhiilnimo ayay ka ahayd mise garasho xumo? Mooji!
Goor casarkii ah oo dadkii kax la yihiin daal iyo harraad baa Cali Maxamed Geeddi oo ay dabo iyo feeryaacayaan dad badan oo isugu jiray Soomaali iyo shisheeye, iyo weriyayaal makarafoonno iyo kaamarado ku hubaysani yimid. In cabbaar ah ayaa Cali Geeddi iyo qaar ka mid ah dadkii la socday hadaltiro iyo tororog shubeen, ka dibna iska tageen aniguna Baarubax oo aan saaka ka soo jarmaaday baan u luuday aniga oo gaajo iyo harraad la golongolaya.

Dhawr sannadood ka dib markii Cali Geeddi oo taangi Amxaaro saarani Filla Soomaaliya galay baan naftayda ku canaantay “haddii aad maalintaas dabadhilifkaas toogan lahayd maanta madaxtooyadii qarankayga Xabashi ma uusan keeneen.” Inkasta oo aanan abidkay qori qaadan

xabbadna ridin haddana waxa aan is iri malaha haddii aad subaxaas bastoolad sidan lahayd waa aad toogan kari lahayd, waayo, cidina ima baarin markii aan Fillada galayay. Yeelkeed'e, carada iyo qiirada waddaniyadeed ee aan ka qaaday Xabashida qabsatay madaxtooyadii qarankayga un baa i gubaysaye waa aan hubay in aanan bastoolad iska dhaaf'e toorrey qaateen. Midda se aan hubo ayaa ah in aanan maalintaas Filla Soomaaliya cag dhigeen haddii aan ogaan lahaa in Cali Maxamed Geeddi iyo xukuumaddiisu Xabasho soo horkacayo.[34]

[34] Ujeedkaygu ma ahan in Cali Maxamed Geeddi keligiis dusha ka saarayo keenista ciidanka Itoobiya waayo Cali keligii ma lahayn go'aanka ciidanka Itoobiya lagu soo geliyay dalka balse ujeedkaygu waa tebinta dareenkaygi maalintaas un.

## CEELALYO

In madaxtooyadii qarankayga uu calankii Itoobiya ka dhex babado ma ahayn waxa uu la amakaago qof walba oo si deggan oo aan caaddifadi shidayn dhugmo ugu yeesha sooyaalka siyaasadeed ee Soomaaliya, waayo, waxa ay ahayd silsilad muddo fog soo taxnayd oo ay horkacayeen shisheeye iyo sokeeye badan oo kala ujeeddo iyo kala dano ahaa. In calankii Itoobiya uu caasimaddii qarankayga ka dulbabado waxa ay ahayd gunaanadkii cahdi dhammaaday iyo bilowga mid cusub oo waxa uu rimman yahay aysan qurux badnayn. Waxa uu ahaa baalmadow oo lagu gebagebeeyay sooyaal iyo waayo xanuun badan oo Soomaalida sagootiyay; iyo soo dhaweynta mid cusub oo ka sii xanuun iyo murugo badan. In calankii Itoobiya la suro madaxtooyadii qarankaygu waxa ay tusaale u ahayd sida dadka Soomaaliyeed ugu hoogeen una eedeen hoggaankii talada Soomaalida isaga dambeeyay tan iyo 1956dii. Waxaa la yaab lahayd in

maalintaas calanka Xabashida la suray Filla Soomaaliya ay konton (50) sannadood ka soo wareegtay markii calanka cirka u eg ee Soomaaliyeed la suray Guriga Dawladda ee Muqdisho.

Sannadkii 1956kii markii madaxdii Soomaalidu ku guulaysteen in calanka Soomaaliyeed la suro Guriga Dawladda ee Muqdisho, Boqorkii Itoobiya Xayle Selaase waxa uu socdaal dhagaraysan ku tegay magaalada Qabridahar oo maamulkii Ingiriisku si sharcidarro Xabashida u siiyay. Xayle Selaase oo u guclaynayay fashilinta dawladnimo iyo madaxbannaani dadka Soomaaliyeed helaan waxa uu Qabridahar ka sheegay in Soomaalidu aysan dawladnimo iyo madaxbannaani u qalmin ayna yihiin reer yar oo ka tirsan Itoobiyada wayn. Socdaalkii Xayle Selaase ee Qabridahar waxaa sababay argagax uu ka qaaday Dawladdii Daakhiliga ahayd ee ka dhalatay koofurta Soomaaliya ee ayada oo leh Baarlamaan, Xukuumad iyo Calan la wareegtay talada gudaha ee dhinaca koofureed ee dalweynaha Soomaaliyeed, gogolxaarkana u ahayd dawladnimadii iyo

madaxbannaanidii 1960kii Soomaalidu heshay. Waxaa se murugo iyo ciil iyo caloolxumo ahayd in konton sannadood ka dib hadalkii jeesjeeska iyo nacaybka ahaa ee Xayle Selaase ay hoggaamiyayaal Soomaaliyeed caasimaddii qarankayga ka dhex mudaan tiir uu ka babanayo calankii Itoobiya. Hoggaamiyayaashii Soomaaliyeed ee maanka iyo garaadku ka hagaasay hoggaamintoodi iyo geeddigii ay garwadeenka ka ahaayeen konton sannadood ka dib waxa uu ku soo idlaaday in uu ka maragkaco hadalkii Soomaali nacaybka ahaa ee Xayle Selaase iyo dhammaan cadowga Soomaaliyeed ee hurdada iyo hoyaadka uga maagay gumaynta iyo hagardaamaynta dadka Soomaaliyeed.

Konton sannadood ka dib siyaasiga Soomaaliyeed waxa uu dhaankii ku furay in calankii Xabashidu Muqdisho ka dul lusho askartii Xabashiduna xeebihii Benaadir u dabaal tagaan. Konton sannadood ka dib hoggaamiyayaashii Soomaalidu waxa ay hayaankii dawladnimada iyo qarannimadii Soomaaliyeed ku gebagebeeyeen in dadkii Soomaaliyeed intii qaxday maahane intii kale magan u noqdaan cadowgii faylaha goynayay dalkii

Soomaaliyeedna noqdo garoon ay ku hardamaan shisheeye ka kala yimid Waqooyiga Ameerika, Yurub, Jasiiradda Carbeed, Afgaanistaan, Itoobiya, Yugaandha, Suudaan iyo meelo kale.

Haddii siyaasiga Soomaaliyeed ahmiyadda koowaad siin lahaa danaha dadka Soomaaliyeed, haddii uu horutubyeynta nolosha iyo badbaadada dadkiisa sarraysiin lahaa, danihiisa gaarka ahna ka tanaasuli lahaa marka ay caqabad ku noqdaan danta guud ee dadweynaha Soomaaliyeed, maanta dhulka Soomaaliyeed ma noqdeen gego ay ku hardamaan afkaaro shisheeye. Haddii danaha iyo afkaaraha shisheeyaha hangool la isaga qaban lahaa ummadda Soomaaliyeed Far Soomaali qoran bay yeelan lahayd 1960kii ka hor, mana dhacdeen in siyaasiyiintii Soomaaliyeed ee waagaasi labo kooxood ugu kala qaybsamaan qorista Far Soomaaliga ayada oo qolo waliba rabtay in ay Far Soomaaliga ku qorto habka shisheeyihii baritaarayay rabeen.

Haddii ahmiyadda koowaad ee siyaasiga Soomaaliyeed ahaan lahayd ilaalinta jiritaanka ummadda Soomaaliyeed,

dhaqankeeda, xeerarkeeda, diinteeda, wadajirkeeda, nolosheeda iyo dawladnimadeeda ma dhacdeen in toban wadaad oo Soomaaliyeed la toogto 1975tii ka dib markii ay diideen aragti iyo dhaqammo shisheeye oo dalkeenna loo soo xawilay.

Haddii siyaasiga Soomaaliyeed danaha dadweynaha Soomaaliyeed ka hor marin lahaa tiisa gaarka ah ma dhacdeen in 1977/78dii lala colloobo awooddii dunida ugu waynayd uguna halis badnayd, The Soviet Union.
Sidaa oo kale ma dhacdeen in Soomaaliya dagaal sokeeye dhexmaquurato kursiga Filla Soomaaliya yaalla dartiis. Waxa kale oo aan dhacdeen in raggii Siyaad Barre eryay ay Muqdisho dhexdeeda ku dagaallamaan kursiga Filla Soomaaliya yaalla dartiis. Haddii siyaasiga Soomaaliyeed lahaan lahaa in yar oo damiir ah ma dhacdeen in Muqdisho shan iyo toban sannadood u kala oodnaato niman siyaasiyiin isku magacaabay oo doonaya in ay madax noqdaan. Waxa kale oo aan dhacdeen in dalkayga lagu martiqaado dambilayaal argagixiso ah oo dalalkoodi ka soo cararay. Sidaas daraaddeed, garaadxumada iyo hammi-gaabnida siyaasiga Soomaaliyeed ee tan iyo

1960kii soo taxnayd waxa ay ceelalyo ama gogolxaar u ahayd in madaxtooyadii qarankayga calanka Itoobiya ka babado Soomaaliyana noqoto garoon ay ku ciyaaraan awoodo iyo afkaaro shisheeye. *Guduneey ima goyseen haddii aan gabalkey kugu daabnayn.*

# TAHRIIB

Galabtii aan inatareega koofurta Gaalkacyo taagan gurada u fariistay indhahaygu ma qabanayn meel Muqdisho ka shishaysa, mana suuraysan karin in barbaarta Muqdisho ay guryahooda uga hayaamayaan si la mid ah ama ka daran sida barbaarta Mudug iyo gobollada kale dhulkoodi uga soo barakacayeen. Laakiin, markii aan Muqdisho gu’yaal dhawr ah joogay baan ku baraarugay dhallinyaradii barbarkayga joogtay oo in yari ka sii dabayar tahay. Waxa aan mar qur ah arkay dhinacyadaydi oo abaari soo leeftay. Dhallintii aan isku xaafadda ahayn, kuwii aan isku iskoolka ahayn iyo intii aan aqaannay oo dhan baa maalinba hormo dhaqaajisay. Qaarkood waalidiintood baa guryo u xaraashay si ay u siiyaan doollar ay ku tahriibaan. Qaar kale tabtii aan Mudug uga soo dhuuntay bay habeen madow mirqeen bilooyin ka dib na saxaraha Liibiya ka soo cabaadeen ayaga oo gacanta Maggafe ku jira. Maalin walba war murug leh iyo

uurkutaallo ayaa laga soo tebiyanayay kumannaanka kun ee ubaxii dadka iyo dhulka Soomaaliyeed ahaa ee laashashka liita ku galay badaha u dhexeeya Afrika iyo Yurub; iyo Afrika iyo Careebiya. Guri walba oo Soomaaliyeed baa geeridu hor yuurarsatay. Kii xabbad iyo madfac ka badbaaday waxaa leeftay abaar iyo gaajo, kii abaar iyo macluul faraciddiyo leh uga baxsadayna mawjadaha badaha adduunyada ayaa isbaaro u dhigtay. In badan ayaga oo aan badaha gaarin bay Saxaraha Afrika saxariir ugu tawafeen.

Haddana, waxaas oo silic iyo saxiir ah, waxa war tiiraanyo leh maalin walba laga soo tebinayay Saxaraha Afrika iyo badaha dunidu kuma dhibcin dhagaha dhallintii Muqdisho kamana horjoogsan u xirxirashada tahriibka arxanka daran. Hammiga iyo higsiga dhallinta Muqdisho waxa uu ahaa dhoof iyo tahriib. Goor walba iyo goob kasta oo dhallintu isugu timaaddo sheekadoodu waxa ay ahayd wararka dhoofka iyo tahriibka. Higsigii iyo himiladii dhallinyaradii Soomaaliyeed waxa ay noqdeen u hilhilashada geeddi ay dalkooda uga hayaamayaan. Xataa

kuwii reerahoodu ladnaayeen safafka hore ee tahriibka ayay galeen. Kuwo degaanno nabad ah ku noolaa ayaa ayaguna saxariirta tahriibka dhadhamiyay. Xataa waxaa la sheegay in rag ganacsi bulaalay haystay ay habeen madow meheradohoodi xaraasheen oo ayaga iyo xaasaskoodi iyo ubadkoodiba Saxaraha Liibya iyo Suudaan silic ugu dhinteen. Taas macneheedu waa in Soomaalida dalkooda ka hayaamayay oo dhani aysan col iyo gaajo ka cararayn balse uu haleelay cudur dibad jacayl la yiraahdo. Ama wax uu Dr. Xuseen Bulxan ku tilmaamay *"Meta-Colonialism"*[35] taas oo ah gumaysi nooc cusub ah oo Saykooloji ahaan dadka Afrika lagu gumaynayo. Ayada oo la adeegsanayo warbaahinta iyo teknooliyada casriga ah ayaa dadyowga Afrika loo qurxiyay ama laga raariday in habnololeedka reer Yurub iyo Ameerika ama caddaanku yahay kan keliya ee sharaf iyo maamuus leh. Ayada oo la adeegsanayo qalabka warbaahinta iyo teknoolajiyada ayaa dadkeenna loo qurxiyay habnololeedka caddaanka, halka teennii naloo

[35] Xuseen Cabdullaahi Bulxan, "Stages of Colonialism in Africa: From Occupation of Land to Occupation of Being," *Journal of Social and Political Psychology* 2015, Vol. 3(1), 239–256 doi:10.5964/jspp.v3i1.14.

dacareeyay. Taasina waxa ay sababtay in aan dhulkeenna ka yaacno oo dhulal kale nolol ka raadinno, halkii ay ahayd in aan dhulalkeenna nolol muunad leh ka abuuranno, dhibaatooyinkeennana annagu xallisanno. Si walba ha ahaatee, waxaa isweydiin mudan yaa mas'uul ka ah in dhulkeenna na loo dacareeyo? Ma gumaystayaasha mise hoggaamiyayaasheenna? Ma annagaa nolosha isu dacaraynay mise duul shisheeye? Ma meta-colonialism-ka mise maangaabnida madaxyaweynteenna?

Si walba ha ahaatee, aniguna ugu dambayn dhallinyaradii hayaamaysay baan ka mid noqday. Ka gadaal in muddo ah oo buufiska dhoofku iga dhex sharqamayay, ugu dambayn waxa aan go'aansaday in aan dabagalo raadka boqollaalkii kun ee iga horreeyay.

Haddii gu'yaal ka hor aan Mudug dhuumasho uga soo hayaamay aroortaan waxa aan boorsooyinka u xirxirtay si aan dhuumasho ahayn. Haddii markii aan Gaalkacyo ka soo dalaabayay aan boorsadaydi uga soo tegay cabsi aan ka qabay habaryarahay, saaka waxaa boorsooyinka i la dadaaminaysa habaryar Ardo. Haddii aan Gaalkacyo ka

soo dhuuntay ayada oo qadadu miiska gurigii habaryar Astur ii saaran tahay, saaka waxa aan guriga habo Ardo sagootinayaa aniga oo ka laacay quraac si gaar ah loogu sameeyay sagootiskayga.

Aniga iyo habo Ardo oo boorsooyinkii dadaaminayna ayaa soo istaagay bartii uu taagnaa baabuurkii Toyota Mark II ga ahaa ee Baydhabo i gayn lahaa. Qorshaha socdaalkayga oo Nairobi Kenya ku jeeday, markii hore waxaa ii qorshaysnayd in aan diyaarad raaco laakiin duullimaadyadii oo beryahaasi aad qaali u noqday baa igu qasbay in aan socdaal dhulka ah maro. Habaryar Ardo aad bay uga welwelsanayd socdaalka dhulka ah dhawr goor bayna dib ii digtay ayada oo rejo ka qabtay in duullimaadyadu sidii caadiga ahayd ku soo noqdaan, balse ugu dambayn waxa aan ku cadaadiyay in aan dhulka maro. Anigu waxa aan doorbidayay socdaalka dhulka ah aniga oo dalbarasho niyadda ku hayay.

Aniga iyo toban qofood oo kale waxa aan isku gurnay baabuur warshaddii samaysay u qaabaysay in uu qaado shan ruux oo qur ah. Balse yaa dan kale wax warshad

Jabbaan ku taallaa warqado ku xarxariiqday. Soomaaliya wax walba waa suuragal wax walba waa bannaan yihiin.

Baabuurka waxaa lahaa darawalna ka ahaa aabbaha Maxamedkii mooryaanka marqaansani ku dilay iridka hore ee gegida Nambar Konton. Dalabshaan, inkasta oo uu ahaa oday wayn haddana waxa uu ahaa saaxiibkay aan aad isugu dhownahay. Waxa aan isku baranay kaalinta shidaalka ee habo Ardo oo uu kalyanti wanaagsan u ahaa. Ka sokow in uu ahaa kalyanti shidaalka iga iibsada sheekaduna isugu keen baxdo, oday Dalabshaan waxa aan abaal wayn uga hayaa in uu ii oggolaan jiray in aan baabuurkiisa wato tan iyo waagii aan bilaabay barashada darawalnimada.

Barashada darawalnimada dhibaato badan baan kala kulmay dhawr baabuurna waxa aan gaarsiiyay dhaawac ay habo Ardo magdhowday. Tan iyo aroortii aan Muqdisho imid waxaa iga go’nayd in aan barto sida baabuur loo wado, taasna waxaa fursad i siiyay kaalin shidaalka habo Ardo oo baabuur tirabadan hoy u ahaa. Baabuurrey badan baa furayaasha baabuurtooda dhigan

jiray xafiiska kaalinta shidaalka oo hadba qofkii jooga ayaa ay u dhiibi jireen. Ayaamihii hore waxa aan u fiirsan jiray sida darawaliintu baabuurta u wadaan. Waxa aan daawan jiray sida ay marshooyinka (gears) u kala beddalaan. Aniga oo aan baabuur dhaqaajin baan marsho walba booskeeda xifdiyay. Waxa aan bartay shaqada farisyoonaha (clutch), joojiyaha (brake), iyo sheellaraha (accelerator). Maalintii koowaad ee aan baabuur dhaqaajiyo waxa ay ahayd subax aysan garaashka baabuur badan oollin dad kalena aysan ila joogin. Baabuur uu lahaa nin aan qaraabo ahayn oo aan furihiisa hayay baan garaashka gudihiisa iskudayo badan ka dib ku guulaystay in aan dhaqaajiyo. Maalintaas ka dib mar walba oo fursad helo garaashka dhexdiisa ayaan baabuurka ku dhaqdhaqaajin jiray ilaa aan maalintii dambe baabuurkii ninka qaraabada ahaa ku qaaday baabuur kharaabay oo garaashka dhex yaallay. Maalintaas waxa aan u naxay sidii aan qof dilay oo kale. Markii aan habo Ardo u sheegay waxii aan falay, si daran bay iigu qaylisay dhawr maalmoodna waa ay ii xanaaqsanayd. Shilkii ugu ba’naa ee aan barashada baabuurka ku galo waxa uu ahaa maalin aan watay baabuur uu lahaa nin aan

saaxiib ahayn. Dhawr goor buu baabuurkiisa ii dhiibay, asaguna kursiga hore ii fariistay si uu u hubsado in gaariga la igu aamini karo. Maalintaas ka dib dhawr goor buu baabuurka i siiyay oo aan keligay magaalada ku dhexmushaaxay. Yeelkeed'e, maalin baan baabuurkii meel bacaad ah si daran ugu cayriyay dabadeedna waxaa go'day birta xiriirisa taayarka bidix iyo isteerinka. Mar kale ayaa habo Ardo bixisay doollar baabuurka lagu hagaajiyo. Si kastaba ha ahaatee, halgan dheer iyo indha'adayg ka dib waxa aan ku guulaystay in helo aqoonsiga darawalnimada oo la ii qiro in aan baabuur wadi karo. Taasna waxaa mahaddeeda leh Dalabshaan oo ka sokow in uu mar walba baabuurkiisa igu aamini jiray igu dhiirragelin jiray barashada darawalnimada. Waxa kale oo asaguna aan abaal u hayaa Faratol Maxamed Faarax oo Toyota Carolla uu lahaa in aan wato ii oggolaan jiray.

Markii aan ka dhaqaaqnay kaalintii shidaalka habo Ardo ee aan waddada soddonka afka saarnay baan xoogaa welwel ah dareemay aniga oo ka fekeraya waxa aan kala kulmi doono safarka dheer ee ii bilowday. Yeelkeed'e,

waxa aan ku faraxsanaa in aan socdaalka ku bilaabay oo aan la socdo saaxiibkay Dalabshaan iyo baabuurkiisa.

Markii aan soo istaagnay koontaroolka Afgooye ee ku yaalla cirifka galbeed ee Muqdisho waxaa laamiga ku gudbanaa bir dheer oo ay labada cirif uga duuban yihiin calallo uskag badan. Dabadeedna oday Dalabshaan baa inta uu muraayadda daaqadda dejiyay u baaqay rag hubaysan oo hor yuuraary buul muunad xun oo waddada geeskeeda ka dhakoolay. Mid nimankii ka mid ah oo qori Aake ahi garabka u suran yahay baa dhankeenna u soo luuday dabadeedna darawalkii ayaa u dhiibay kurjad Shilin Soomaali ah oo laastiig dhexda uga xiran yahay. Ka dib na kuray yar oo darxumo ka muuqato ayaa naga hor wareejiyay birtii basarka xumayd ee nagu hor gudbanayd.

Isbaarada koontaroolkii hore ee Afgooye waxa ay ahayd tii ugu horreysay soddomeeyo isbaaro ama jidgooyo oo aan sii mari doonno, qaarkoodna nafteenna halis geliyeen. Laga bilaabo koontaroolka Afgooye ilaa Isha Baydhabo oo aan casarliiqii gaarnay waxaa daadsanaa tobaneeyo isbaaro oo mid walba boqollaal kun oo Shilin Soomaali

ah darawalku waydiin lahaan ku siiyay. Waxaa xusuus gooni igu reebay hilibkii dhaylada ahaa ee shiilnaa iyo caanihii geela ee qaboobaa ee aan Wanlaweyn uga qadeeyay. Oday Dalabshaan baa lacagta iga bixiyay asaga oo igula kaftamay “maadaama aad dhoofaysid wax baan kugu sii erganayaa.”

Beryahaas darawaliintu baabuurtooda meel walba lama tegi karin, gaar ahaan goobaha iyo gobollada aan qabiilladoodu degganeyn. Sidaas darteed waxa baabuurta gobollada u kala gudbin jiray wax loogu yeeri jiray “Mukulaal Madow.” Yacni baabuurta waxaa degaan walba dhexmarin jiray darawal beesha halkaas deggan ka dhashay. Ama rakaabka ayaa lagu kala wareejin jiray labo baabuur. Tusaale ahaan: oday Dalabshaan markii uu Baydhabo na keenay waxa uu nagu wareejiyay baabuur uu wato darawal u dhashay gobollada Baay iyo Bakool halka asaguna (Dalabshaan) uu Muqdisho ula noqday rakaabkii uu siday darawalkii uu nagu wareejiyay.

Habeenkii waxa aan dhaxnay Hoteel Bakiin oo bartamaha Baydhabo ku yaal. Aroortii markii aan salaadda Fajar

tukannay waxa aan fuulnay Xaajiyo-Khamsiin annaga oo afka saarnay waddada Waajid aadda. Markii aan Baydhabo ka baxnay annaga oo hal kiilo mitir wax aan dhammayn soconnay baa nin dhallinyaro ah oo hoosgunti iyo jaakad wayn xirani darawalkii gacanta u haatiyay markii baabuurkii istaagayna waxa uu darawalkii ka codsaday in uu horay u sii dhaweeyo darawalkiina aqbal buu yiri. Xoogaa markii aan soconnay baan ka duldhacnay dhagaxaan iyo makaabyo (qodad waawayn) waddada ku go'an. Meeshu ma ahayn meel darawalku isbaaro ku ogaa, sidaas darteed buu darawalkii asaga oo shakisan baabuurkii istaajiyay. Markii baabuurkii istaagay baa ninkii jaakadda waynaa ee aan asxaanka u falnay inta uu baabuurkii ka booday jeebka jaakadda bastoolad kala soo baxay dabadeedna inta uu ammaanka bastooladdii furtay buu darawalkii u sheegay in uu lacag baad ah bixiyo haddii uu rabo in uu nabad ku gudbo. Muran iyo tuugmo fashilmay ka dib darawalkii lacagtii baadda ahayd buu dhiibay.

Barqo kulul baan gaarnay Waajid oo dhagaxeedu Gaalkacyo i xusuusiyay quraac ka dib na jidka Luuq aada

ayaan ku haloosinnay. Dhalandhool iyo wirwir hanfi kulul ka dib casardheer baan Luuq Ganaane heeryada kaga rognay. Inkasta oo abaar darani faraba'an ku haysay haddana waxa aan la tacajabay sida la yaabka leh ee webiga Jubba magaalada ugu meegaaran yahay. Baaxadda biyaha iyo ballaca wabiga Jubba ayaa ayaduna indhadaraandar lahayd.

Qado waqtigeedi ka daahday iyo xoogaa nasasho ah dabadeed mar kale ayaan inta caynka u dhuujinnay jidka Baladxaawo u baxana ku carraabinnay. Waxa uu ahaa jid aad mooddid geerigo'an omos ah oo abaar naxariis darani jeenyaha ku fidsatay. Indhaheennu ma qaban sankuneefle dhaqaaqa. Waxaa dhinacayga fadhiyay nin Baydhabo naga soo raacay kaas oo kolkosha ku sitay buug jaldigiisa sawirka Nelson Mandela ku sawiran yahay oo Af Ingiriisi ku qoran. Inkasta oo aan barayfadyadii (private schools) Muqdisho xoogaa Ingiriisi ah qaab indhacaddays ah uga soo bowsaday soo na akhriyay dhawr buug oo Af Soomaali ah wargeysyadii Eefoorta (A4) ahaa ee Muqdisho na aan si joogto ah u akhrin jiray, haddana weli ma akhrin buug Af Ingiriisi ku qoran. Sidaas awgeed baan

u xiisaynayay in ninku iiga sheekeeyo waxa uu werinayay buugga Mandela ee *"Long Walk to Freedom."* Asaguna si wacan buu iigu soo koobay halgankii dheeraa ee Mandela.

Wax aan cid kaa dheer, ceel kaa dheer ku haloosinnaba milay libdhadu baalka sii dhiganaysay baa ilkuwareertay ku beegan dhanka midig ee foolkeenna bidhaamo ari ah ka aragnay halka dhanka bidixna aqal Soomaali dab ka hor bidhaamayo inooga muuqday. Markii aan xoogaa ku soo dhawaannay aragii ayaa waxaa noo muuqday nin qori Aake ah garraarsan oo dhanka ariga naga soo qoorataysanaya. Inta uu waddada bartankeeda istaagay oo qorigii cabbaystay buu inta lawga mutay shiish nagu soo fiiqay. Darawalkii ayaa inta uu baabuurkii soo qaboojiyay waxa uu joojiyaha ku qabtay meel dhawr tallaabo u jirta ninkii qoriga nagu soo fiiqayay. Dabadeed inta uu daaqadda dejiyay buu darawalkii ninkii hubaysnaa haybiyay waxa uu rabo asaguna si dhib yar buu lacag u dalbaday. Darawalkii waxa uu ninkii hubaysnaa ugu dhaartay in uusan Shilin dhexda ka duleela siin doonin. Darawalku waxa uu ninka ula murmay sidii nin uu

bargaranayo. Tobaneeyo daqiiqo markii ay murmayeen baa darawalkii oo xanaaqsani u dhaqaaqay dhankii aqal Soomaaligii dabku ka hor bidhaamayay oo dhawr boqol oo mitir inoo jiray. Dabadeed waxa uu in cabbaar ah asaga oo faraha taagtaagaya la murmay haweeney aqalka joogtay oo dabka bidhaamayay casho ku karsanaysay. Intaas uu Darawalku naga maqnaa annaguna baabuurkii ayaan dhexyuurarnay ayada oo ninkii hubaysnaa na hor liqdaaran yahay. Dabadeed waxaa nagu soo guryanoqday darawalkii oo u muuqday in uu haweeneydii faramarnaan kala soo noqday. Darawalku waxa uu aqalka u aaday in uu haweeneyda uga dacwoodo ninkeeda baaddoonka ah.

Markii murankii dheeraaday baa rabkaabkii darawalkii ka codsadeen in uu ninka wax u dhiibo balse waxa uu ku dhaartay in uusan senti hayn. Ka dib rakaabkii ayaa Shilimaad iskudardaray oo ninkii hubaysnaa siiyay. Markii ninkii naga horwareegay oo aan waddada cagta saarnay baa darawalkii noo sheegay in uu ninka iyo xaaskiisaba garanayo.

Goor aasku madoobaaday, Maqrib tegay Ceshena aan la gaarin baan Baladxaawo galnay. Baladxaawo waxaa ballaysinkaygu ahaa qoys ay habo Ardo saaxiibbo ahaayeen. Yaasiin-Boorkeriye oo ahaa aabbaha qoyska waxa uu ahaa ganacsade Baladxaawo caan ka ah. Sannadkii 1991 ayuu Yaasiin ka soo qaxay Muqdisho oo uu ganacsi iyo guryo dhawr ah ku lahaa. Guryihii oo Muqdisho uga soo qaxay waxaa mas'uul ama Mukulaal Madow uga noqotay habo Ardo oo kirada uga qaadi jirtay ka dib na Baladxaawo ugu diri jirtay. Halka Yaasiin habo Ardo wakiil uga ahaa Baladxaawo oo ay inatareeyo sokor ah u diri jirtay.

Waxaa boosteejada baabuurta iigu yimid Maxamed Boorkeriye dabadeedna gurigii i geeyay. Reer Yaasiin-Boorkeriye si gobonnimo leh ayay ii soo dhoweeyeen iina sooreen. Baladxaawo waxa aan ku xusuustaa in ay ahayd magaalo yar oo ganacsi bulaalay uu ka socday. Waxa ay lahayd maqaayado cunto heer sare ah leh.  Waxa kale oo aan ku xusuustaa shaleemadeedi oo aan dhawr habeen aniga iyo Maxamed Boorkeriye ku soo cawaynnay.

Lix caanamaal oo aan Baladxaawo joogay ka dib, waxaa magaalada ka qarxay dagaal u dhexeeyay labo jufo dabadeedna nabadgelyadayda oo loo cabsaday darteed Maxamed Boorkeriye oo arday ka ahaa dugsi sare oo Mandheera ku yaalla ayaa si dhib yar kastamka Kenya iiga gudbiyay.

Mandheera waxa aan marti ugu noqday qoys aan qaraabo-qansax ahayn oo muddo dheer Mandheera degganaa. Inkasta oo Mandheera iyo Baladxaawo yihiin labo magaalo oo mataano ah haddana kala duwanaan muuqata ayaa u dhexaysay. Waxa aan dareemay in Mandheera ka kululayd kana huur badnayd Baladxaawo. Meherad ama dukaan walba oo Mandheera ku yaalla waxaa lagu iibinayay cabitaan la qasay oo qabow. Waxa kale oo iga yaabiyay cunnooyinka ay maqaayadaha Mandheera iibiyaan oo aad uga duwanaa kuwii aan aqaannay. Waxa aan u xiisay caraftii baastadii aan ku cuni jiray Gaalkacyo, Muqdisho iyo Baladxaawo.
Waxa kale oo iga yaabiyay sida daran ee jaadku faraba'an Mandheera ugu hayay. Meel walba waxaa daadsanaa

qashinka jaadka. Waxa ay u ekayd in reer Mandheera oo dhani qayilaan.

Ka dib toban caanamaal oo Mandheera joogay goor casarliiq ah ayaan inataree uga carraabay. Aniga iyo inatareega la isku sallad!

“Kijana, shuka, shuka wewe. Harakisha bana,” ayuu cod dhiillo iyo handadaad xambaarsan iigu sheegay. Waa erayo aanan fahmin muggaas, balse aan muddo dambe ka baran doono iskool Af Sawaaxiliga lagu barto. Macnaha erayadaasi waa “*wiilow soo deg, soo deg, soo deg waryaa, si dhaqso ah.”* Waxa uu i farayay in aan ka soo dego Inataree faaruq ah oo aan shalay galab Mandheera ka soo raacay. Darawalkii inatareega ayaa cod nuxuus ah oo aanan fahmin wax ugu sheegay askarigii murqaha iyo feeraha kuusnaa ee i handadayay. Codka darawalku waxa uu u ekaa qof baqaya hadalkiis. Laakiin hadalkiisi daciifnimadu ka muuqatay dhag uma uu dhigin’e daaqaddii aan fadhiyay buu si xooggan u furay asaga oo weli i handadaya sidii uu aabbihiis aabbahay ka adkaan jiray oo kale.

Dabcan, askarigaas Nyeri (Inyeeri waa magaalo ku taal bartamaha Kenya ee qowmiyadda Kikuuyadu degto) ka yimid, galabtaas waa u gaartay oo waxa uu dareemayay in

aabbihiis aabbahay labo jirka uga adkaa, asaguna uu galabtaas iga adag yahay oo sidii uu doono iigu handadi karo dhulkaygi. Waxa uu igu handadayaa oo iigu cagajuglaynayaa Ceelwaaq oo ah degmo ka mid ah dhulwaynaha Soomaaliyeed. Yaa nin Nyeri ka yimid awood u siiyay in uu igu cariiqsado gudaha dhulkayga? Haa, Ceelwaaq waa degmo ka mid ah dhulka Soomaaliyeed. Haa, Ceelwaaq waa dhul Soomaaliyeed. Haa, Ceelwaaq waa magaalo ka mid ah dalkayga. Haa, Ceelwaaq, Mandheera, Wajeer iyo Gaarisaba waa dhulkayga. Taasina waa mid aanan ka xishoonayn kana tanaasulayn. Balse, ninkaas Nyeri ka soo doolaalo tegay waxa uu igu handadayay awood uu siiyay nin cad oo qudhiisu ka soo doolaalo tegay jasiiradda Britain. Ninkaas Nyeri ka soo doolaalay ee sedka uusan lahayn ka dhaxlay nin ka yimid galbeedka fog ee Yurub waxa uu igu maagay ama igu haystay in aan xudduudka dalkiisa xeer la’aan ku soo galay. Yacni waxa uu iga doonayay in aan Muqdisho iyo Ceelwaaq, ama Gaalkacyo iyo Gaarisa fiise (visa) u kala qaato. Waxa uu iga rabay in u kala socdaalka Muqdisho iyo Ceelwaaq aan asaga oo Nyeri ka yimid oggolaansho uga doonto. Bal cibaaradaas eeg!

Igaarkaan murqaha kuusan ee gudaha dhulkayga igu handadaya miyaan loo sheegin in xudduudkaan uu katallowgiisa oggolaanshaha iiga doonayo aan meegaarkiisi dadka Soomaaliyeed ee dhulka leh laga talagelin? Miyuusan ogayn in xataa Kenyaanka kale (sida asaga oo Nyeri ka yimid) aan caddaankii xudduud-shareedkaan xirriiqay ka talagelin?

Tan kale, miyaan Afrikaanku ka xoroobin gumaystayaashii reer Yurub ee dhulalka Afrika qabsaday? Haddii Afrika ka xorowday gumaystihii ba'a iyo hoogga baday sidee ku dhacday in Afrika weli ku dhaqanto dhaqannadii iyo xeerarkii hagardaamada ahaa ee gumaysigu Afrika uga tegay? Sidee ku dhacday in xeryihii gumaysigu ku kala ooday dadka Soomaaliyeed weli sii oodnaadaan? Sidee Afrika xornimo u sheegan kartaa ayada oo ay weli kala maqan yihiin xigtadii iyo xigaaladii Soomaaliyeed ee gumaysigu xudduudaha baas kala dhexdhigay? *Ma anigaa waalan mise cadan baa laga heesayaa?*

Si kastaba ha ahaatee, sida dadka Soomaaliyeed badankoodu aysan u aqoonsanayn xudduudaha shaydaanku dhexdhigay baanan aniguna u aqoonsanayn xudduudka uu igaarkaan Nyeri ka yimid ka tallaabiddiisa oggolaanshaha iiga doonayo. Waxa aan isu arkayay ama aaminsanaa in ninkaani gardarro igu maagayo dalkayga gudihiisana igu handadayo. Laakiin, nin laga tabar badan yahay baa loo taliyaaye, handadaad iyo cagajuglayn ka dib waxaa la igu qasbay in aan inatareegii ka soo dego.

Markii gaarigii la iga soo dejiyay baa darawalkii inatareega waday ee Mandheera la iiga soo daray iga soo dabadegay oo askarigii i handadayay iyo labo kale oo la socotay af aanan fahmayn kula hadlay asaga oo sidii hore daciifnimo iyo miskiinnimo ka muuqato. Dabadeed si gunnimo ka muuqato ayuu cod dullaysan iigu yiri “saaxiib nimanku kuma dhaafayaan ee raac, marka ay saldhigga boliiska ku geeyaanna dadkaagi waco oo u sheeg in lagu xiray.” Ka dib na inta uu jeebka gacanta geliyay buu ka soo bixiyay lacag aan horay ugu dhiibtay. Aniguna lacagtii ayaan jeebka gashtay. Markii aan lacagtii jeebka gashaday baa mid ka mid ahaa saddexda askari ee i

afduubanayay isirkiisuna Soomaali ahaa Af Soomaali igu yiri “waraa lacagta maad iska tirisid?” “Meeqa waaye lacagtu?” ayuu sii dabadhigay. Aniga oo ka caraysan ciiddayda la igu handadayo iyo afduubka la igu qabsaday baan si caro leh ugu jawaabay “lacagta sow anigu ma lihi, maxaa tirinteeda kaa galay?” Jawaabtii oo aan afkayga ka wada dhammaan buu ninkii su’aasha qaldan i waydiiyay dharbaaxo iga soo jiiday. Dabadeedna aniga oo dharbaaxadii la daandaansan bay saddexdoodi inta ay ila boodeen igu tuureen kuraasta dambe ee shirka gaari Cabdibile ah oo ay markii hore nagu soo erayadeen.

Waxa ay naga soo erayadeen Ceelwaaq oo aan ka soo qadaynay meesha ay nagu qabanayaan ama igu afduubteenna waa qiyaastii labaatameeyo kiilo mitir duleedka Ceelwaaq dhanka Wajeer.

Inatareega waxaa Mandheera iiga soo daray qoyskii aan qaraabada ahayn ee Mandheera igu hayay. Sababta ay inatareega iigu dooreen oo baska ii saari waayeenna waxa ay ahayd maadaama aanan Kibaandhe haysan basaskuna

baaritaanno badan maraan bay inatareega faaruq-taagga ah iigu dooreen.

Mandheera galab casarliiq ah ayaan ka carrownay, habeenkiina waxa aan ku sii guulnay tuulo Carabiya lagu magacaabo. Jarmaado iyo dhalandhool dheer ka dib duhurkii ayaan Ceelwaaq sii istaagnay. Qado iyo nasasho yar dabadeedna carraabo ayaan ugu jiidnay ilaa Cabdibilaha Ceelwaaq naga soo raacdaystay isbaaro noo dhigtay.

Markii nimankii i afduubtay ay kursiga dambe ee Cabdibilaha igu riteen, waxaa labada gees iga fariistay murqa kuuskii reer Nyeri iyo mid kale oo sidiisa oo kale u kuusan oo asaguna ka mid ahaa kuwa doolaalada ku yimid, halka kii Soomaaliga ahaa baabuurka waday. Labada nin ee dhinacyada iga fariistay waxa ay u ekaayeen in ay si kutalagal ah feerahayga yar-yar u cadaadinayaan, waayo, sida ay isugu kay kuuseen darteed, waxa aan ku dhawaaday in aan neefsan kari waayo. Kuraasta aan ku fadhinnay si waafi ah ayay noogu fillayd ee maxaa ciriiriga keenay? Ma waxa ay ka baqayeen in

aan baabuurka ka boodo oo ka fakado oo sidaas bay dhinacyada iiga cadaadinayeen oo isugu kay hiigayeen? Taasi suurogal iima ahayn xataa haddaan fakasho u hollado, waayo, labada dhudhun silsilad baa iiga jabsanayd. Midda se ciriiriga iyo jeebbada iiga darrayd ee aan la gubanayay waxa ay ahayd ciilka aan u qabay kan Soomaaliga ah ee Cabdibilaha waday. Waxaa dhagahayga sida fiinta ka sii foorinayay dharbaaxadii uu sida fulaynimada ah iigu gaaday. Labaatankii daqiiqadood ee aan Ceelwaaq ku soo soconnay ama la iigu soo waday aan iraahdo, illeen anigu khiyaarkayga ku ma socone, waxa aan ku foognaa ninka i dharbaaxay ee gaariga waday. Mar waxa aan fiirinayay labbiskiisa oo waxa aan la yaabbanaa ninka khamiiska cad iyo koofida Barawaaniga ah ku labbisan ee haddana gardarrada ku dharbaaxaya gabanka yar ee socotada ah. Haa, waxa uu xirnaa khamiis iyo koofi cad. Marna waxa aan iswaydiinayay oo aan su'aal gelinayay isirkiisa. Waxa aan niyadda iska waydiinayay Soomaalinimada axadkaan u adeegaya shisheeyaha doolaalada ku yimid ee dadkiisa dhibaataynaya oo weliba asagu u gacanqaadaya ruux Soomaali ah oo dhulkiisu u kala socdaalaya. Waxaa dhaqankiisu i xusuusiyay sheeko

fadhikudirireed runteeda iyo beenteeda aanan ogayn oo ahayd sidan:

Cabdirasaaq Xaaji Xuseen baa berigii uu ra'isul wasaarahaa Soomaaliya ahaa yiri "Kenya dhul baa iiga maqan ee dad iigama maqna." Niyadda ayaan iska iri "bal axmaqaan axmaqu dhalay eega, waa kuwii uu Cabdirasaaq Xaaji sheegay. Wax gumaysi u adeega oo khayr leh ayaan la sheegin. Doqoni walaalkeed bay u xoogwayn tahay. Raganimada uu igu dharbaaxayo muu shisheeyaha dhulkiisa haysta isaga celiyo?"

Waxa aan gocanayay dharbaaxadii uu sida gardarrada ah iigu malaasay.

Yeelkeed'e, ninkaas gardarrada igu dharbaaxay iyo dadka Soomaaliyeed ee Kenya xukunto waxa ay mudan yihiin in loo garaabo, waayo, waa dadka gumaysigii Ingiriisku ku jawrfalay dawladdii Soomaaliyeedna gabtay oo gef wayn ka gashay. Gumaysigii Ingiriisku waxa uu afduubay doonistii dadkan Soomaaliyeed iyo aftidii ay 1963dii ku go'aansadeen in aysan Kenya waxba ku darsan beddalkeedana ay Soomaaliya ku biiraan taas oo Ingiriisku iska indhatiray. Halka dawladdii Soomaaliyeed

ay 1968kii Kenya heshiis la gashay ayada oo aan ka talagalin dadkii Soomaaliyeed ee halganka hubaysan Kenya kula jiray. Taas oo sababtay in halgamayaashii Soomaaliyeed iyo shacabkoodiba noqdaan kuwo meel cidlo ah waraabe ku cuno. Heshiiskii ra'isul wasaare Maxamed Xaaji Ibraahin Cigaal Caruusha kula galay Jomo Kenyatta waxa uu ahaa nabar dhabarka ka jabiyay halgankii reer NFD. Kenya oo ka faa'iidaysanaysa dayacii dawladdii Soomaaliyeed dadkaas ku dayacdayna waxa ay reer NFD kula dhaqaaqday xasuuqyo foolxun oo ay ka mid ahaayeen xasuuqii Wagalla (1984) ee ay reer Wajeer ku xasuuqday, midkii Gaarisa Gubaay (1980) ee ay reer Gaarisa ku xasuuqday iyo kuwo kale oo badan sida Galamagala, Liboi iyo Madogashe. Xasuuqyada ay Kenya kula kacday dadka Soomaaliyeed ee NFD ku dhaqan waxaa ugu xanuun badnaa xasuuqii Wagalla oo la xaqiijiyay in 5000 oo shacab aan wax galabsan dhagta dhiigga loogu daray, iyo midkii Gaarisa Gubaay oo 300 oo qofood lagu xasuuqay. Dawladda Kenya waxa ay kale oo ay burburisay hanti farabadnayd oo dadkaasi lahaayeen sida guryihii oo ay dab qabadsiisay iyo xoolihii oo ay laysay. Tusaale ahaan waxaa la sheegay in ciidanka

Kenya kadin geel ah ku xasuuqeen Meesha la yiraahdo Dhuujis (Dujis Dam).[36]

Waxa kale oo i gubayay in aanan kansho u helin in aan ka falceliyo gardarradii uu ii la bareeray ninkii dharbaaxada igu jiiday. Oo maxaan tolow samayn lahaa haddii jaallayaashiis aysan igu soo qamaami lahayn ee ay aniga iyo asaga isku kaaya dhaafi lahaayeen? Abkowgay Cawl Faarax (hooyaday Nuuro Nuur Cawl awoowgeed) baa gacanfudud iyo dhirif lagu xifaalayn jiray. Abkow Cawl iskadhaaf nin u gacanqaaday in uusan u jawaabine, waxaa la sheegaa in Abkow Cawl uu maalin ku durduriyay hilbo lagu qoondeeynayay madal Alle-bari la isugu yimid. Goobaha Alle-bariga ama siyaarooyinka lagu dhigo ee miyiga waxaa caado ka ah in marka hore la tiriyo dadka madasha u soo hilbaysi doontay dabadeedna arigii la soo qalay hilbihiisa ayaa qaaddimiinta madashu qorsheeyaan oo waslad-waslad u jarjaraan si ay isugu jaangooyaan tirada martida iyo wasladaha hilibka.

---

[36] Halkaan ka eeg warbixinno laga qoray xasuuqyadii Kenya kula kacday dadka Soomaaliyeed: https://garissacity.wordpress.com/tag/garissa-gubay-massacre/. https://www.google.com/amp/s/www.aljazeera.com/amp/features/2014/2/27/kenyas-wagalla-massacre-30-years-later. Accessed on May 8, 2022 (labada xigashaba).

Waxaa la sheegaa in Abkow Cawl iyo oday kale maalintaas ay madasha maamulayeen oo hilbaha wasladaynayeen. Dabadeed Abkow Cawl oo toorrey soofaysan hilbihii ku wasladaynaya ayaa waxa uu arkay cad aad u yar oo shilis ah oo ku haray digsi ka mid ah digsidii hilbaha lagu keenay dabadeedna toorreydiisi caaraddeeda ayuu inta ku muday afka galshay. Ka dib odaygii kale ayaa Abkow Cawl kula kaftamay hadal uusan jeclaysan hadalkaas oo Abkow Cawl u qaatay in hunguri xumo odaygu ku tilmaamay, dabadeedna Abkow Cawl oo shalay maahane ay dorraad ka tagtay baa inta kor u booday waxa uu ku durduriyay oo ku tuntay hilbihii Alle-bariga oo ku jira saxuuntii martida loogu gayn lahaa oo halkan safan. Waxa bari idaad iyo garab sabeen shilis ahayd faniinaya maalintaas waa la yaabay.

Dhacdadaasi waxa ay noqotay mid taariikhda gashay oo qosol iyo maad miiran ah. Waxa ayna noqotay tilmaan lagu tusaaleeyo dhirif iyo gacanfudayd reer awoowgay lagu xifaaleeyo.

Gacanfudaydka reer awoowgay lagu xifaaleeyo marka lagu daro oraahda Soomaaliyeed ee tiraahda "*doofaarka ficil la'aan baa lagu cadaabaa"* darteed waxa ay u badan tahay in aanan gacmaha ka laabteen ninkii gardarrada igu dharbaaxay. Mise waa aan iska bootaynayaaye sida Soomaali badan oo burburkii iyo dagaalladii sokeeye awgood dalkooda uga qaxay hebdo ugu noqdeen nacabka shisheeye ayaan u hogan lahaa oo indhaha ka mirrig-mirrigsiin lahaa?

Foolxumada qaxaha iyo burburku dadka Soomaaliyeed badeen waxaa ka mid ah in Soomaalidu noqdeen qowmiyad dhan oo qab iyo han jabtay oo u nuglaatay askarta bahallada ah ee dalalka dariska, kuwaas oo sidii dugaag baahan ugu qamaamay maatidii Soomaaliyeed ee dalalkooda u soo qaxay, kulana kacay dil, kufsi, boob iyo xarig. Soomaalidii uu Gerald Hanley ku sheegay *"the proudest, the bravest, the vainest, the most merciless, the friendliest...."* kolkii ay dalkoodi ka qaxeen waxa ay noqdeen sida uu Ibraahin-Hawd ku tilmaamay *"gob jabtay."* Waxa ay noqdeen sida geel maqlay aar libaax oo gurxamaya.

Nimankii kuuskuusnaa ee ka yimid Nyeri iyo meelo ka fogfog iyo dabadhilifkii u adeegayay sidii ay ii sii wadeen bay i geeyeen saldhigga boliiska ee Ceelwaaq ka dib na inta ay igala hareen lacagtii, suunkii, kabihii, moobeelkaygi niiclaha ahaa iyo wax walba oo aan watay bay aniga oo hoosgunti iyo funaanad keliya xiran igu tuureen qol mugdi ah.

Waxa ay ahayd markii iigu horraysay ee aan xabsi galo ama xorriyadda la iga qaado. Intii hore oo dhan waxaa maskaxdaydu ku foognayd ninkii i dharbaaxay iyo shisheeyaha dhulkayga igu afduubtay balse markii qol mugdi ah oo albaab bir ah oo culus leh la igu tuuray baa cabsi iyo argagax igu soo kadiyeen. Afduubka iyo xabbiska waxaa iiga darnaa qolka madow ee haddii isha farta lagaa gelinayo aadan arki karin. Weligayba mugdiga waa aan necbaa oo waa aan ka baqi jiray.
Markii qolkii mugdiga ahaa la igu tuureen ka dib na albaabkii birta ahaa kor la iiga qataaray baan sidii neef maryaad ah qolkii madoobaa hadba gees caasha saaray aniga oo labada gacmood iga horreeyaan sidii qof hurdo

ka soo alaalaxay habeen saqdhexe oo nalkii qolka raadinaya. Cabbaar markii aan sidii doorshaankii mugdigii gabgableeyay baan salka la helay walax markii aan taabtay ii la ekaaday jardiinkii ku oolli jiray bannaanka gurigii habo Ardo ee Baarubax. Dhagaxii aan salka la helay baan aniga oo neeftuuraya dulqandoodsaday aniga oo dareemaya cabsi aadna u khalkhalsan. Waxa aan galay feker dheer. Waxa aan xusuustay hooyaday oo aan ahaa wiilkeeda curadka ah dhawr sannadoodna aanan arkin. Waxa aan dib u milicsaday oo qiimayn ku sameeyay go’aankii aan Bendar Qaali uga soo dhuuntay hooyaday oo aan i ogayn. Waxaa ii muuqday hummaag iga nixiyay oo i tusay in go’aankii aan Bendar Qaali uga soo dhuuntay waalidkay oo aan i ogayn ahaa gef aan sameeyay. Waxa aan niyadda iska iri: waalid caasinnimo ayaa aad ku tallaabsatay qolkaan mugdiga ahina waa cidhibxumadii waalid caasinnimadii aad ku kacday. Waxa aan iswaydiiyay waxa ay hooyaday ka dheeftay sagaalkii bilood ee ay caloosha igu sidday iyo fooshii xanuunka badnayd ee ay i foolatay. Waxa aan is iri “bal maxay hooyaday iga dheeftay oo igu xusuusanaysaa haddii caawa qolkaan madow la igu

qasho?” Nuuraddiin Faarax ayaa laga hayaa *“She [mother] gives great and receives little.”*

Aniga oo tallankaas dhexmaquuranaya indhahaygana ay illin kululi ka soo dareertay baa waxaa igu soo duxay ama ii muuqday hummaag aan ka dhex arkay aabbahay oo u muuqday in aysan cajabin xaaladdii aan ku sugnaa. Waxaa aabbe oogo-hadalkiisa (body language) laga dheehan karayay in uu ka xanaaqsanaa daciifnimadayda ama fulaynimadayda. Hummaaggii aabbe inta uu ii soo dhowaaday buu igu yiri “war maxaad la barooranaysaa ma xaniin baa lagaa sarayaa?” “haddii aad dhimanaysid dhareerka waa la iska duwaa,” ayuu ii sii dabadhigay.

“Miyaan barooranayay?” baan naftayda waydiiyay. Waxa aan xusuustay buuggii uu akhrisanayay ninkii ila saarnaa Xaajiyo-Khamsiintii aan Baydhabo ka soo raacay, *Long Walk to Freedom* oo uu Nelson Mandela ku tebinayay halgankiisi dheeraa ee gobonimodoonkii Koofur Afrika iyo 27dii sannadood ee xabsiga ku jiray.

Markii xusuustaasi igu soo duxday baan u garaabay hadalkii aabbahay uu hummaagga iigu sheegay.

“Maxaan la calaacalayaa rag baa 27 sannadood xabsi ku jiraye?” intaan iswaydiiyay baan dhagaxii shamiitada lagu malaasay ee sariirta maxbuuska ahaa ku dengiigsaday. Xoogaa ka dib na waa aan gam’ay.

Aroortii markii aan indhaha kala qaaday baan dareemay iftiin aad nuxuus u ah oo ka soo dusaya shabaq si bakhiilnimo ah loo sanceeyay oo ku yaallay darbiga qolka aan ku xabbisnaa.

Goor barqo dheer ah ayaa askari inta uu albaabkii soo furay i soo hoos dhigay weel muunad xun oo muharago iyo xabbad rooti ahi ku jiraan. Dabadeedna asaga oo ju’ ii oran buu iska dhaqaaqay albaabkiina igu xiray. Xoogaa ka dib isla askarigii ayaa igu soo noqday dabadeedna waxa uu Af Ingiriisiga oo aan wax yar ka fahmayay igu waydiiyay haddii aan rabo in aan dadkaygi wacdo iyo inkale. Anigu si halhaleel ah ayaan “haa” ku iri. Dabadeed inta uu weelkii qaatay buu iga tegay. Cabbaar ka dib waxa uu igu soo noqday asaga oo sida niiclahaygi iyo labo boqol (200) oo Shilin oo kaarka hadalka ah. Waxa uu ii sheegay in uu kaarka iiga soo gaday lacagtaydi ay shalay

galab igala hareen. Waxa uu intaas ii sii raaciyay “u sheeg dadkaaga in Ceelwaaq aysan maxkamad iyo xabsi lahayn oo 24 saacadood gudahood Mandheera laguu gudbin doono, haddii aadan iska afgaran taliyaha.” Taliyaha uu ka hadlayaa waa taliyaha saldhigga Ceelwaaq, afgarashaduna waa in aan madaxfurasho bixiyo si xorriyaddaydi la iigu soo celiyo. Sidaas baa loo afduubtaa dabadeedna madaxfurasho laga ga qaataa dadka Soomaaliyeed.

Yeelkeed’e, aad baan ugu farxay farriintaas yididdiilada leh, iyo sida gobonimada leh ee askarigu iigu adeegay. Weliba waxa aan la yaabay in uu ii sheegay in kaarka hadalka uu lacagtaydi iiga soo gaday. Waxa aan u malaynayay in lacagtaas aanan dib dambe u arkin doonin oo askartu iga dhacday.

Inta aan kaarkii ku shubtay niiclahaygi ayaan wacay ina habreedkay Daahir Yuusuf oo Wajeer joogay u na sheegay sidii wax u dhaceen. Daahir waxa uu la hadlayay rag ay saaxiibbo iyo macriifo ahaayeen oo Ceelwaaq joogay dabadeedna salaaddii duhur intaan la gaarin xor

baan ahaa. Weliba raggii Daahir ii soo diray waxa ay taliyihii saldhigga iiga soo qoreen warqad aan jidka dareen la'i ugu mari karo ilaa Nairobi.

Markii aan salaadda duhur masaajidka ku soo tukaday baan soo fariistay maqaayad ku taallay ka soo horjeedka saldhigga boliiska. Aniga oo halkaygi fadhiya oo shaah fiiqsanaya ayaa waxaa i hormaray ninkii gardarrada igu dharbaaxay. Inta aan eegay baan niyadda iska iri "dabadhilifow waa i kanaa aniga oo xor ah ee maxaad iga qaadi kartaa? Waa sidaas oo abaalna kuu erganayn". Maalintii xigtay casirkeedina Wajeer baan u carraabay.

Inta aanan gunaanadin sheekada socdaalkaygi ilaa Nairobi aan ku hormaro werinta qiso uu nooga sheekeeyay siyaasi Soomaali Kenyan ah oo aan Islii kula kulmay safarkaygi ka dib.

Habeen baan raacay rag asxaabtayda ahaa oo dhalashada Kenya haystay oo u socday goob ay kulan kula lahaayeen nin Soomaali ah oo u tartamayay kursi xildhibaan ee baarlamaanka Kenya. Mudanihii musharraxa ahaa waxa

uu nooga sheekeeyay sheeko qudhiisa ku qabsatay gobolka Soomaalida ee Kenya xukunto, iyo aragtida siyaasiyiinta Kenya ka haystaan mustaqbalka gobolkaas. Waxa uu yiri “waxa aan raacay wafti uu hoggaaminayay hoggaamiyaha mucaaradka Kenya Raila Odinga, kaas oo ku jeeday magaalada Gaarisa. Markii aan magaalada Gaarisa gaarnay baa waxaa nala ku joojiyay koontarool yaalla iridka magaalada laga soo galo ee dhanka Nairobi. Markii aan koontaroolkii dhaafnay baan Raila waydiiyay sababta meeshaan koontaroolka loo dhigay: Waxa aan ku iri “halkani xudduud ma ahan ee waa maxay koontaroolkani? Waxa kale oo aan la yaabay, waddadii laamiga ahayd ee sida hagaagsan u dhisnayd waxa ay ku dhammaatay iridda Gaarisa laga galo (dhanka Nairobi) oo gobolka Soomaalidu gebi ahaantiiba waddo laami ah ma leh. Markaa ayaan Raila waydiiyay sababta Waqooyi-Bari laamiga loo gaarsiin waayay? Raila waxa uu iigu jawaaby “dawladda Kenya weli si dhab ah uma rumaysna in Waqooyi-Bari uu Kenya ka tirsan yahay, waxa ay aammisan yihiin in dadka Waqooyi-Bari maalin uun aayohooda ka tashan doonaan. Sidaas daraaddeed dawladda Kenya kharash iskama geliso gobolkan.”

Waxa kale oo gacanbidixaynta dawladda Kenya ku hayso Soomaalida reer NDF toosh afar qaad ku ifiyay weriyaha wayn ee Soomaaliyeed "Maxamed Caddow". Maxamed Caddow oo reer Gaarisa ah markhaatina ka ahaa xasuuqii Gaarisa Gubaay waxa uu sannadkii 2013 Talefishanka Aljazeera (qaybta Ingiriisiga ku hadashada) ka sii daayay barnaamij muuqaal dhokomentari ah oo uu cinwaan uga dhigay *"Not Yet Kenyan."*[37]

In gaboodfallada iyo gacanbidixaynta Kenya ku haysay shacabka Soomaaliyeed ee NFD dhab yihiin qof walba oo Waqooyi-Bari iyo Kenya tagay indhihiisa ayuu ku arkay.

Afar caanamaal oo aan Wajeer joogay ka dib ina habreedkay waxa uu igu daray baabuur Cabdibile ah oo jaadka u kala daabbula Wajeer iyo Meru (xerada jaadka Kenya). Wajeer malahayga waxa ay ahayd meeshii ugu kululayd ee aan abidkay arko. Ka Gaalkacyo ku Wajeer

---

[37] Halkaan ka daawo barnaamijkii Maxamed Caddow ee Not Yet Kenyan: https://www.google.com/amp/s/www.aljazeera.com/amp/program/al-jazeera-correspondent/2013/12/15/not-yet-kenyan.

oo aan baabuur ku maray ma arag meel Wajeer ka kulul. Aniga oo funaanad yar oo gacmagaab ah xiran baan Wajeer ka raacay Cabdilihii jaadka daabbuli jiray, balse sidii aan dhul qarfe ah oo waddo la'aan ah hanfiguna ku saloolanayo ayaan hal mar un dhexda u galnay dhul cagaaran oo qabowga aad mooddid in Firiij lagu soo ballaqay. Ninkaygi dhididku ka dareerayay oo waxa aan is arkay aniga oo gawsaha isla dhacaya qarqaryo darteed. Tan iyo galabtii aan Gaalkacyo inatareega ka soo fuulay haddii aan soo arkayay magaalooyin mugdi ah oo jidadkoodu habaas badan yihiin, galabkan waxa aan la indhadaraandaray magaalooyin iyo tuulooyin wada ifaya jidadkooduna dhisan yihiin nadiifkana yihiin. Kulayl, hanfi, habaas, waddo la'aan, koronto la'aan, isbaaro iyo koontaroollo waxaa iigu dambaysay markii aan ka gudbay xudduudka dabiiciga ah ee u dhexeeya Soomaalida iyo Kenyaanka. Ama aan dhaho xudduudka dhabta ah iyo kan dhalanteedka, ama kan runta ah iyo kan macmalka ah.

Habo Ardo ayaan ka maqlay maalin "*Kenya waxaa lagala yimaadaa kabo iyo koodh wayn.*"

Markii aan ka tallaabay xudduudka dhabta ah ee Soomaalida iyo Kenyaanka ayaan ogaaday dulucda

hadalkii habo Ardo: markii aan Meru imid baan arkay dad koodhadh xiran kabo waawaynna gashan.

Mar labaad baan Nairobi u raacay Cabdibile jaad daabbule ah oo rag qaraabada ahi wateen. Milay saqdhexe ah ayaan galnay Nairobi oo wax walba oo aan horay u soo arkay godka qashinka ku tuurtay. Weligay ma malaysan in magaalo Afrikaan oo sidaas u horumarsani qaaradda madow ku taallo. Waxa aan la ashqaraaray baaxadda iyo bilicda Nairobi. Waxa aan la amakaagay laamiyada ballaca wayn iyo magaalada wada nalalka ah. Waxa aan isbarbardhigay Nairobi iyo Muqdishadii mugdiga ahayd ee boholuhu meel walba ka qodnaayeen. Waxa aan iswaydiiyay sababta magaalooyinka Soomaalida dibudhaca iyo mugdiga ugu wacan? Waxa aan iswaydiiyay waxa Soomaalida ka reebay horumarka asaaggood gaaray?

Subaxii markii aan ka soo toosay qol ku yaallay fooqa sagaalaad ee hoteel Islii ku yaallay baan daaqadda ka eegay laamiyada magaalada aan guuraha ku soo galay. Waxaa indhahaygu qabteen kumannaan ruux oo kala isir,

kala midab iyo kala diimo ah oo u kallahaya raacdaynta nolol-maalmeedkooda. Waxaa indhahaygu qabteen minnaaradaha masaajidyada iyo kuwa kaniisadaha oo boqollaal tallaabo isku jira. Waxa aan arkayay gabdho muslimiin ah oo xijaaban iyo kuwo aan muslimiin ahayn oo goonnooyin dabagaab ah ku labbisan oo si dhiillo iyo dareen la’aan ah laamiyada u laafyoonaya.

Daaqadda aan laamiyada ka daymoonayay waxa ay ku beegnayd dhanka bari oo fallaaraha qorrax soo gurguuranaysaa ka soo liqdaarnaayeen. Waxa aan hummaagsaday waayihii iyo noloshii ay wajahayeen dalkii iyo dadkii aan uga soo tegay halka fallaaruhu ka soo miiqan yihiin. Waxa aan gocday waxii dhul aan soo jibaaxay. Waxa aan daymooday oo qiyaasay waxa mustaqbalku ii rimman yahay iyo halka hayaanka noloshaydu ku dambayn doono. Aniga oo weli daaqaddii fooqa sagaalaad ee hoteelka Islii dhakoola oo sidii maqane-jooga ku foogan kaaha waaberi ayaan maqlay hees maqalkeeda muddo hore iigu dambaysay. Ma hubo in heestu ka daarnayd qolalka hoteelka mid ka mid ah, ama guryaha u dhow; iyo in ay uurkayga ka danaanaysay.

Waa hees uu qaadi jiray hoobalkii Cumar Cabdulle (Cumar-Shoolli):

*Jalaadada*[38] *iyo Jalwiskaygii*[39]
*Anoo jiifaa Jaarku yaabaye...*
*Jaahwareeroo hadba jimicsiga laabta jiidaye...*
*Qardajeex iyo Jeexyo bahallaan*[40] *soo jibaaxaye,*
*Sow jiirada baas, sow jiirada baas*
*Jid la maro ma leh?*
*Sow jiirada baas, sow jiirada baas*
*Jid la maro ma leh?*

---

[38] Jalaado=gooha riyaha.
[39] Jalwis=ololka geela.
[40] Jeexyo bahal leh (meel dugaag dad cun ahi joogo).

# BUUGKAASHI

Ali Jimale Ahmed (tifaftiray), The Invention of Somalia, 1995.
Ali Jimale Ahmed, Daybreak is Near, 1996.

Cabdulqaadir Aroma, Sababihii Burburka Soomaaliya, 2005.
Florence Scovel Shinn, The Game of Life and How to Play it, 1925.
George Alagiah, A Passage to Africa, 2001
George Orwell, Nineteen Eighty-four, 1949.
Gerald Hanley, Life and Death Among Somalis, (taariikh la'aan).
Hassan Abukar, Mogadishu Memoir, 2015
Ibnu Batuta, The Travels of ibn Batuta 1325-1354 (Translated by Reverend Samuel Lee, 1829).
Ibraahin-Hawd Yuusuf Axmed, Aanadii Negeeye, 2013.
James W. Pennebaker, Writing to Heal: A Guided Journal for Recovering from Trauma and Emotional Upheaval, 2004.
Mohamed Osman Omar, The Road to Zero, 1992.
Nuruddin Farah, Maps, 1986.
Rashiid Shiikh Cabdillaahi (Gadhwayne), Qaran iyo Qabiil: Laba aan Isqaban, 2018.

Sidney Poitier, Life Beyond Measure, 2008.

## Ku Saabsan Qoraaga

Cali Maxamed Diini waxa uu 1986kii ku dhashay miyiga waqooyiga Mudug, Soomaaliya.
Horay waxa uu u qoray buugaagta kala ah: *Waayihii Warsame* (2019) iyo *Xakame: Noqo Qof Iska Adag Naftaadana Xakamee* (2021).
Waxa kale oo uu qoray maqaallo kala duwan oo ay ka mid yihiin *Qabyada Shaqallada Far Soomaaliga: Shaqal Culus iyo Shaqal Gujaysan*; iyo *Hanibal Ma Soomaali Buu Ahaa?* Cali waxa uu taariikhda ka bartay jaamacadda Murdoch ee ku taalla Perth Australia, imminkana uu ka barto Social Psychology.